Boggaan si ula kac ah ayaa loo baneeyay

Minnesota – Janaayo 2024

# Ku soo dhawoow bulshada

## UnitedHealthcare Community Plan of Minnesota Baahiyaha Gaarka ah ee Daryeelka Aasaasiga ah (SNBC) Buug-gacmeedka Medicaid oo Kaliya

Buug-yarahan waxaa ku jira macluumaad muhiim ah oo ku saabsan adeegyada daryeelka caafimaadkaaga.

**Adeegyada Xubinta (Member Services):**
**1-888-269-5410**, TTY **711**, ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso. Wicitaankan waa bilaash.8:00 subaxnimo–6:00 galabnimo, Isniinta–Jimcaha

UnitedHealthcare
9800 Health Care Lane
Koodhka Boostada: MN006-W900
Minnetonka, MN 55343

**myuhc.com/CommunityPlan**

CSMN24MD0165230_001

United Healthcare Community Plan

Boggaan si ula kac ah ayaa loo baneeyay

United Healthcare Community Plan

CB5 (MCOs) (10-2021)

## Ogaysiiska Xuquuqda Madaniga

**Takoorka waa mid lid ku ah sharciga.** UnitedHealthcare Community Plan of Minnesota cidna kuma takooraan iyadoo lagu saleynayo waxyaabaha soo socda:

- Qoomiyadda
- Midabka
- Dhalashada
- Caqiiqada
- Diinta
- Nooca jinsiga
- Heerka kaalmada Dadweynaha
- Da'da
- Naafanimada (oo ay ku jiraan naafanimada jireed ama maskaxeed)
- Jinsiga (sida fikradaha khaldan ee laga haysto jinsiga iyo aqoonsiga jinsiga)
- Xaaladda guur
- Rumaysnaanta siyaasadeed
- Xaaladda caafimaad
- Heerka caafimaad
- Helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka
- Khibrad sheegashooyinka
- Taariikhda caafimaadka
- Macluumaadka hidda sidaha

Waxaad xaq u leedahay inaad gudbiso caabasho takoor ah haddii aad rumaysan tahay inay qaab takoor ah kuula dhaqmeen UnitedHealthcare Community Plan of Minnesota. Waxaad gudbin kartaa cabasho oo aad codsan kartaa in lagaa caawiyo gudbinta cabashada si fool-ka-fool ah ama adoo u maraya boostada, telefoonka, fakiska, ama iimaylka:

**Civil Rights Coordinator**
**UnitedHealthcare Civil Rights Grievance**
P.O. Box 30608
Salt Lake City, UTAH 84130
Telefoonka Bilaashka ah: **1-888-269-5410**, TTY **711**
Iimaylka: **UHC_Civil_Rights@uhc.com**

**Taageerada iyo Adeegyada Dheeraadka ah: UnitedHealthcare Community Plan ee Minnesota** waxay bixisaa adeegyo iyo gargaar dheeraad ah, sida turjumaano aqoon leh ama macluumaad lagu heli karo qaabab la adeegsan karo, si lacag la'aan ah oo waqtiyeysan si loo xaqiijiyo fursada loo wada siman yahay ee la xiriirta kaqeybqaadashada barnaamijyadeena daryeelka caafimaadka. **Kala xiriir Adeegyada Xubnaha 1-888-269-5410.**

**Adeegyada Taageerada Luuqadeed: UnitedHealthcare Community Plan ee Minnesota** waxay bixiyaan dhukmintiyo la tarjumay iyo turjumida luuqadda lagu hadlo, si lacag la'aan ah oo wakhtiga loogu talogalay ah, marka ay lagama maarmaan tahay inuu qofku helo taageero la xiriirta dhinaca luuqadda si loo xaqiijiyo in dadka ku hadla Ingiriisiga xaddidan ay si habsmi ah u helaan macluumaadka iyo adeegyada aan bixino.**Kala xiriir Adeegyada Xubnaha 1-888-269-5410.**

Jadwalka Tusmada

## Cabashooyinka Xuquuqda Madaniga ah

Waxaad xaq u leedahay inaad gudbiso caabasho takoor ah haddii aad rumaysan tahay inay qaab takoor ah kuula dhaqmeen UnitedHealthcare Community Plan of Minnesota. Sidoo kale waxaad toos ula xiriiri kartaa mid kasta oo ka mid ah hay'adaha soo socda si aad ugu gudbiso cabasho takoor ah.

**Waaxda Caafimaadka Mareykanka iyo Xafiiska Adeegyada Aadanaha ee Xuquuqda Madaniga (Office for Civil Rights, OCR)**

Waxaad xaq u leedahay inaad u gudbiso cabasho OCR, oo ah hay'adda dawladda dhexe, haddii aad rumaysan tahay in laguugu takooray wax ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- Qoomiyadda
- Midabka
- Dhalashada
- Da'da
- Naafanimada
- Jinsiga
- Diinta (mararka qaarkood)

Toos ula xiriir **OCR** si aad cabasho ugu gudbiso:

Office for Civil Rights
U.S. Department of Health and Human Services
Midwest Region
233 N. Michigan Avenue, Suite 240
Chicago, IL 60601

Xarunta Jawaab-celinta Macmiilka: Wicitaanka bilaashka ah: 800-368-1019
TDD Telefoonka bilaashka ah: 800-537-7697
Iimayka: **ocrmail@hhs.gov**

**Minnesota Department of Human Rights (MDHR)**

Halkan Minnesota, waxaad xaq u leedahay inaad u gudbiso cabasho MDHR haddii aad rumaysan tahay in laguu takooray wax ka mid ah waxyaalaha soo socda:

- Qoomiyadda
- Midabka
- Dhalashada
- Diinta
- Caqiiqada
- Jinsiga
- Nooca jinsiga
- Xaaladda guur
- Heerka kaalmada dadweynaha
- Naafanimada

Toos ula xiriir **MDHR** si aad cabasho ugu gudbiso:

Minnesota Department of Human Rights
540 Fairview Avenue North, Suite 201
St. Paul, MN 55104

Cod: 651-539-1100
Telefoonka bilaashka ah: 800-657-3704
MN Relay: 711 ama 800-627-3529
Fakiska: 651-296-9042
Iimaylka: **Info.MDHR@state.mn.us**

**Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (Department of Human Services, DHS)**

Waxaad xaq u leedahay inaad u gudbiso cabasho DHS haddii aad aaminsantahay in lagugu takooray barnaamijyadeena daryeelka caafimaadka mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Qoomiyadda
- Midabka
- Dhalashada
- Diinta (mirarka qaarkood)
- Da'da
- Naafanimada (oo ay ku jiraan naafanimada jireed ama maskaxeed)
- Jinsiga (sida fikradaha khaldan ee laga haysto jinsiga iyo aqoonsiga jinsiga)

Cabashooyinku waxaa waajib ah inay qoraal ahaadaan oo la soo gudbiyo 180 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda aad ogaatay takoorka aad sheegayso. Cabashadu waxaa waajib ah inay ku qoran yihiin magacaaga iyo cinwaankaaga oo ay sharraxayso takoorka aad ka caabanayso. Waan fiirin doonaa oo kugu wargelin doonaa si qoraal ah haddii aan awood u leenahay inaan baarno. Haddii aan awood u leenahay, waan baari doonaa cabashada.

DHS waxay si qoraal ah kugu wargelin doontaa natiijada baaritaanka. Waxaad xaq u leedahay inaad rafcaan ka qaadato haddii aad go'aanka ku qanci waydo. Si aad rafcaan u qaadato, waxaa waajib ah inaad u dirto codsi qoraal ah DHS si ay dib ugu eegaan natiijada baaritaanka. Qoraalka soo koob oo sheeg sababta aad u diidan tahay go'aanka. Ku dar macluumaadka dheeraadka ah ee aad u malaynayso inuu muhiim yahay.

Haddii aad cabasho u gudbiso qaabkan, dadka u shaqeeya hay'adda ku magacaaban cabashada kaama aargoosan karaan. Tani waxay ka dhigan tahay sinnaba inaysan kuugu ciqaabi karin inaad cabasho ka gudbisay. U gudbinta cabasho qaabkan kaa joojin mayso inaad raadsato tallaabooyin kale oo sharci ama maamul ah.

Toos ula xiriir **DHS** si aad u gudbiso cabasho takoor ah:

Civil Rights Coordinator
Minnesota Department of Human Services
Qaybta Fursadaha Siman iyo Helitaanka
P.O. Box 64997
St. Paul, MN 55164-0997
Cod: 651-431-3040 ama isticmaal adeegga gudbinta ee aad doorbidayso

## Bayaanka Caafimaadka Hindida Maraykanka

Hindida Maraykanka way sii wadan karaan ama bilaabi karaan inay isticmaalaan rugaha Adeegaha Caafimaadka qabiilka iyo Hindida (Indian Health Services, IHS). Kaaga baahan mayno oggolaansho hore ama kugu soo rogi mayno shuruudo si aad adeegyo uga hesho rugahaan. Waayeelada da'doodu tahay 65 jir iyo kuwa ka wayn tani waxa ka mid ah adeegyada Ka-dhaafitaanka Waayeelka (Elderly Waiver, EW) oo la heli karo iyadoo loo marayo qabiilka. Haddii dhakhtar ama bixiye kale oo ku sugan rug qabiileed ama IHS kuu gudbiyo bixiye ku jira shabakadeena, uma baahan doontid inaad aragto bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah kahor gudbinta.

**1-888-269-5410**, TTY **711**

Attention. If you need free help interpreting this document, call the above number.

ያስተውሉ፡ ካለምንም ክፍያ ይህንን ዶኩመንት የሚተረጉምሎ አስተርጓሚ ከፈለጉ ከላይ ወደተጻፈው የስልክ ቁጥር ይደውሉ።

ملاحظة: إذا أردت مساعدة مجانية لترجمة هذه الوثيقة، اتصل على الرقم أعلاه.

သတိ။ ဤစာရွက်စာတမ်းအား အခမဲ့ဘာသာပြန်ပေးခြင်း အကူအညီလိုအပ်ပါက၊ အထက်ပါဖုန်းနံပါတ်ကို ခေါ်ဆိုပါ။*

កំណត់សម្គាល់៖ បើអ្នកត្រូវការជំនួយក្នុងការបកប្រែឯកសារនេះ ដោយឥតគិតថ្លៃ សូមហៅទូរស័ព្ទតាមលេខខាងលើ។

請注意，如果您需要免費協助傳譯這份文件，請撥打上面的電話號碼。

Attention. Si vous avez besoin d'une aide gratuite pour interpréter le présent document, veuillez appeler au numéro ci-dessus.

Thov ua twb zoo nyeem. Yog hais tias koj xav tau kev pab txhais lus rau tsab ntaub ntawv no pub dawb, ces hu rau tus najnpawb xov tooj saum toj no.

ဟ်သူဉ်ဟ်သး. နမ့ၢ်လိဉ်ဘဉ်တၢ်မၤစၢၤကလီနၤလၢ တၢ်ကကွဲးကျိးထံဝဲဒဉ် လံာ်တီလံာ်မီတခါအံၤအဃိ ကိးလီတဲစိနီဉ်ဂံၢ် လၢထးအံၤန့ဉ်တက့ၢ်.

알려드립니다. 이 문서에 대한 이해를 돕기 위해 무료로 제공되는 도움을 받으시려면 위의 전화번호로 연락하십시오.

ໂປຣດຊາບ. ຖ້າຫາກທ່ານຕ້ອງການການຊ່ວຍເຫຼືອໃນການແປເອກະສານນີ້ຟຣີ, ຈົ່ງໂທຣໄປທີ່ໝາຍເລກຂ້າງເທິງນີ້.

Hubachiisa. Dokumentiin kun tola akka siif hiikamu gargaarsa hoo feete, lakkoobsa gubbatti kenname bilbili.

Внимание: если вам нужна бесплатная помощь в устном переводе данного документа, позвоните по указанному выше телефону.

Digniin. Haddii aad u baahantahay caawimaad lacag-la’aan ah ee tarjumaadda (afcelinta) qoraalkan, lambarka kore wac.

Atención. Si desea recibir asistencia gratuita para interpretar este documento, llame al número indicado arriba.

Chú ý. Nếu quý vị cần được giúp đỡ dịch tài liệu này miễn phí, xin gọi số bên trên.

# Jadwalka Tusmada


Ku soo dhawoow UnitedHealthcare . . . . . . 10

Qaybta 1-aad: Lambarrada telefoonka iyo macluumaadka xiriirka . . . . . . 12

Qaybta 2-aad: Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan helitaanka daryeelka aad u baahan tahay . . 16

Qaybta 3-aad: Xeerka Xuquuqda Xubinta . . . . . . 24

Qaybta 4-aad: Waajibaadyada xubnaha . . . . . . 26

Qaybta 5-aad: Kaarka aqoonsiga (ID) xubinimadaada qorshaha caafimaadka . . . . . . 27

Qaybta 6-aad: Kharash wadaagista . . . . . . 28

Qaybta 7-aad: Adeegyada la daboolo . . . . . . 29

Qaybta 8-aad: Adeegyada aan annagu daboolin . . . . . . 74

Qaybta 9-aad: Adeegyada aan lagu daboolin Qorshaha laakiin laga yaabo in la daboolo iyadoo loo marayo ilo kale . . . . . . 75

Qaybta 10-aad: Goorta la wacaayo shaqaalaha gobolkaaga . . . . . . 77

Qaybta 11-aad: Isticmaalida Qorshaha caymiska ee caymiye kale . . . . . . 78

Qaybta 12-aad: Kharash-soo-ceshiga ama qaansheegashada kale . . . . . . 79

Qaybta 13-aad: Hannaanka Cabashada, Racfaanka iyo Racfaanka Gobolka (Dacwad-dhageysiga Cadaaladda ah ee gobolka) . . . . . . 80

Qaybta 14-aad: Qeexitaano . . . . . . 88

Qaybta 15-aad: Macluumaad dheeraad ah . . . . . . 97

# Ku soo dhawoow UnitedHealthcare

Waxaan ku faraxsanahay inaan kugu soo dhaweyno xubin ahaan UnitedHealthcare Community Plan of Minnesota (oo loo yaqaano “UnitedHealthcare,” “Qorshe” ama “Qorshaha”). UnitedHealthcare (oo loo yaqaano “anaga,” “anagu,” ama “waxeena”) waa qayb ka mid ah Baahiyaha Gaarka ah ee Aasaasiga ah ee BasicCare (SNBC). Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota waxay u qaabaysay barnaamijkan ikhtiyaariga ah si uu u siiyo daryeel caafimaad dadka naafada ah. Waxay isku daraysaa dhakhtarka, isbitaalka, guriga kalkaalinta, ilkaha, caafimaadka habdhaqanka, baxnaaninta, iyo daryeelka kale ee caafimaadka hal nidaam daryeel oo isku xiran. Adeegyadaada caafimaadka intooda badan waxaad heli doontaa adigoo u marayo shabakada bixiyayaasha Qorshaha. Marka aad u baahan tahay daryeel caafimaad ama aad su'aalo ka qabto adeegyadaada caafimaadka, waad na soo wici kartaa. Waxaan kaa caawin doonaa inaad go'aansato waxa aad samaynayso marka xigta iyo dhakhtarka aad isticmaaleyso.

Waxaa kula soo xiriiri doona UnitedHealthcare, si aad u dhammaystirto qiimaynta caafimaadka ee isku duwaha daryeelka. Qiimaynta ayaa gacan naga siin doonta in aan kugu xirno adeegyada daryeelka caafimaadka ama adeegyada kale ee aad heli karto xubin ahaan. Iyadoo lagu saleynayo jawaabahaaga, waxaa laga yaabaa inaan kula soo xiriirno si aan u helno macluumaad dheeraad ah. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan qiimeyntan, wac Adeegyada Xubinta.

Buug-gacmeedkan Xubintu waa qandaraaska aan kula galnay. Waa dukumeenti muhiim ah oo sharci ah.

Buug-gacmeedkan Xubinta waxaa ku jira:

- Macluumaadka xiriirka
- Macluumaad ku saabsan sida loo helo daryeelka aad u baahantahay
- Xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadahaaga xubin ka mid ah Qorshaha ahaan
- Macluumaadka ku saabsan kharash wadaagista
- Liiska adeegyada daryeelka caafimaadka ee la daboolo iyo kuwa aan la daboolin
- Goorta la wacaayo shaqaalaha gobolkaaga
- Isticmaalida Qorshaha caymiska ee caymiye kale ama ilo kale oo lacag-bixin
- Macluumaad ku saabsan waxa la sameeyo haddii aad qabto cabasho (ashtako) ama aad dooneyso inaad racfaan ka qaadato tallaabo Qorshe, sida lagu qeexay Qaybta 13-aad
- Qeexitaano

Gobolada ka tirsan goobta adeegga Qorshaha waa kuwaan soo socda:

- Scott
- St. Louis

Fadlan noo sheeg sida aanu wax u sameyneyno. Waad na soo wici kartaa waqti kasta. (Qaybta 1-aad ee Buug-gacmeedka Xubinta wuxuu sheegayaa sida la noola soo xiriiro.) Faallooyinkaaga mar kasta waa la soo dhaweynayaa, hadday yihiin kuwa togan ama taban intaba. Waqti ka waqti, waxaan sameynaa sahano aan kaga codsanayno xubnaheena inay noo sheegaan mahadhooyinkooda nagu aaddan annaga. Haddii lagula soo xiriiro, waxaan rajaynaynaa inaad ka qaybqaadan doonto sahanka qanacsanaanta xubinta. Jawaabahaaga ku sabsan su'aalaha sahanka ayaa naga caawin doona inaan ogaano waxa aan si fiican u sameyneyno iyo waxa aan u baahanahay inaan wanaajino.

# Qaybta 1-aad: Lambarrada telefoonka iyo macluumaadka xiriirka

## Sida loola xiriiro Adeegyadeena Xubinta

Haddii aad qabto wax su'aalo ama walaacyo ah, fadlan wac, iimayl ama farriin u qor Adeegyada Xubinta. Waan ku farxi doonaa inaan adiga ku caawino. Saacadaha adeegyada xubinta waa 8:00 subaxnimo – 6:00 galabnimo, Isniinta-Jimcaha.

| | |
|---|---|
| Wac | **1-888-269-5410**, TTY **711** |
| Mareegta | myuhc.com/CommunityPlan/MN |
| Mareegta moobeelka | **UnitedHealthcare app** |

## Macluumaadka xiriirka ee Qorshaheena ee loogu talagalay adeegyada qaarkood

| | |
|---|---|
| Racfaanada iyo Cabashooyinka | Fakis: **801-994-1082** |

Cinwaanka lagu soo gudbinaayo racfaanka ama cabashada qoran:

UnitedHealthcare
Cabashooyinka iyo Racfaan Qaadashooyinka
P.O. Box 31364
Salt Lake City, UT 84131-0364

Ka tixraac Qaybta 13-aad wixii macluumaad dheeraad ah.

| | |
|---|---|
| Adeegyada kalagoysyada lafaha | **1-888-269-5410**, TTY **711** |
| Adeegyada Ilkaha | **1-888-269-5410**, TTY **711** |
| Shuruudaha Caymiska Qalabka Caafimaadka ee Waaraya | **1-888-269-5410**, TTY **711** |
| Khadka Kalkaaliyaha | **1-800-718-9066**, TTY **711** |



**Su'aalo ma qabtaa?** Booqo myuhc.com/CommunityPlan, ama ka wac Adeegyada Xubinta lambarka **1-888-269-5410**, TTY **711**, ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso. Wicitaankan waa bilaash.

Adeegyada turjubaanka:

| | |
|---|---|
| Luqadda Calaamadaha Maraykanka (ASL) | **1-888-269-5410**, TTY **711** |
| Luuqada lagu hadlo | **1-888-269-5410**, TTY **711** |
| Caafimaadka Maskaxda iyo Adeegyada Caafimaadka Habdhaqanka | **1-888-269-5410**, TTY **711** |
| Rijeetooyinka daawada | **1-888-269-5410**, TTY **711** |
| Adeegyada Dhibaatada Isticmaalka Maandooriyaha | **1-888-269-5410**, TTY **711** |
| Gaadiidka | **1-888-444-1519**, TTY **711** |

# Macluumaadka xiriirka kale ee muhiimka ah

Dadka qaba dhibaatada maqal la'aanta ama naafanimada hadalka waxay soo wici karaan lambarrada soo socda si ay u helaan agabyada ku qoran Buug-gacmeedkan Xubinta: TTY **711**, Adeegga Gudbinta ee Minnesota 1-800-627-3529 (TTY, Codka, ASCII, Gudbiyaha Maqalka), ama 1-877-627-3848 (adeega gudbinta hadal-ka-hadal). Wicitaannada lambarradani waa bilaash.

Si aad u hesho macluumaad ah oo wax badan uga ogaato dardaarannada daryeelka caafimaadka iyo sida horay loogu sii fuliyo dardaaranka hore, kala xiriir Adeegyada Xubinta UnitedHealthcare lambarka **1-888-269-5410**, TTY **711**. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dardaarannada daryeelka caafimaadka ayaa laga heli karaa: **myuhc.com/CommunityPlan**.
Waxaad sidoo kale ka booqan kartaa mareegta Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH) barta: **https://www.health.state.mn.us/facilities/regulation/infobulletins/advdir.html**

Si aad khiyaanada iyo xadgudubka ugu wargeliso UnitedHealthcare telefoon ahaan lambarka 1-844-359-7736 ama onlayn ahaan **https://www.uhc.com/fraud**. Si aad si toos ah ugu wargaliso khiyaanada ama xadgudubka Gobolka, kala xiriir Qaybta Dib u Eegista Kormeerka iyo Daacadnimada (SIRS) ee Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (DHS) talefoon ahaan 651-431-2650 ama 1-800-657-3750 (lambarka bilaashka ah) ama TTY 711; ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso (koolkaan ama wicitaankaan ayadoo uu yahay bilaash wax qarash ah uusan ku baxayn);; fakis ahaan kan 651-431-7569; ama **DHS.SIRS@state.mn.us**. Wicitaankan waa bilaash.

## Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota

Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (DHS) waa hay'ad goboleed oo dadka ka caawisa inay daboolaan baahiyahooda aasaasiga ah. Waxay bixisaa ama maamushaa daryeelka caafimaadka, caawimaada dhaqaalaha, iyo adeegyo kale. DHS waxay ku bixisaa barnaamijka Caawimaada Caafimaadka (Medicaid) iyada oo loo marayo gobolada. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan u qalmitaankaaga ku aadan Caawimaada Caafimaadka (Medicaid), la xiriir shaqaalaha gobolkaaga.

## Dhexdhexaadiyaha loogu talagalay Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka ee La Maareeyo ee Dadweynaha

Qofka Dhexdhexaadiyaha ah ee loogu talagalay Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka Dadweynaha ee La Maareeyo, marka la joogo Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota, wuxuu ka caawiyaa dadka ka diiwaangashan qorshaha caafimaadka xalinta dhibaatooyinka helitaanka, adeegga, iyo biilasha. Waxay kaa caawin karaan inaad noo soo gudbiso cabasho ama racfaan. Dhexdhexaadiyaha wuxuu sidoo kale kaa caawin karaa inaad codsato Racfaanka Gobolka (Dacwad-dhageysiga Caddaaladda ah ee gobolka). Wac 651-431-2660 (aagga magaalada caasimada Twin Cities) ama 1-800-657-3729 (lambarka bilaashka ah caasimada aan ka tirsaneyn) ama TTY 711. Saacadaha adeegga waa 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha.

## Goobta Naafada MN™ (Disability Hub MN™)

Disability Hub MN™ waa shabakad dhigaal oo gobolka oo dhan ah oo bilaash ah oo kaa caawinaysa xallinta dhibaatooyinka, adeegsiga nidaamka, iyo inaad qorsheysato mustaqbalkaaga. Disability Hub MN ka wac 866-333-2466 laga bilaabo 8:30 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo, Isniinta ilaa Jimacaha, ama booqo barta **disabilityhubmn.org** si aad wax dheeri uga ogaato xulashooyinkaaga oo aad u hesho caawimaad ku aadan sameynta isbeddelada. Wicitaankan waa bilaash.

## Khadka Isku xirka Halyeeyada™

Khadka Isku xirka Halyeeyada™ wuxuu siiyaa macluumaad iyo tixraacyo halyeeyada iyo qoysaskooda. Waaxda Arrimaha Halyeeyada ee Minnesota (MDVA) waxay bixisaa xarunta wicitaanka ee LinkVet. Inta lagu guda jiro saacadaha shaqada, shaqaalaha MDVA ee tababaran ayaa ku siin doona macluumaadka faa'iidooyinka halyeeyada, daryeelka caafimaadka, waxbarashada, iyo dib u midaynta.

**Saacadaha shaqada**

Isniin–Jimce 7:00 subaxnimo 8:00 habeennimo. CST
Sabtida: 9:00 subaxnimo–2:30 galabnimo. CST
Axada: 11:00 subaxnimo–4:30 galabnimo. CST
Fasaxyada Xiran

Wac 888-LinkVet (1-888-546-5838) ama TTY 711, ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso. Wicitaankan waa bilaash.

## Sida loola xiriiro barnaamijka Medicare

Medicare waa barnaamijka caymiska caafimaadka federaalka ee loogu talagalay dadka da'doodu tahay 65 jir ama wixii ka weyn, wixii da'doodu ka yar tahay 65 jir ee leh naafanimo gaar ah, iyo da' kasta oo leh kelyo-gab joogto ah (oo loo yaqaano Cudurka Kelyaha ee Marxaladda Dhammaadka ama ESRD).

Xarumaha loogu talagalay Adeegyada Medicare & Medicaid (CMS) waa wakaalada Federaalka ah ee mas'uulka ka ah Barnaamijka Medicare. Waa kuwan siyaabaha aad ku heli karto caawimaada iyo macluumaadka ku saabsan Medicare ee ka socda CMS:

- Wac 800-MEDICARE (800-633-4227) si aad su'aalo u weydiiso ama aad buug-yareyaasha macluumaadka ee bilaashka ah uga hesho Medicare. Isticmaalayaasha TTY waa inay wacaan 877-486-2048. Wicitaankan waa bilaash. Wakiilada adeegga macmiilka ayaa diyaar ah 24 saacadood maalintii, oo ay ku jiraan maalmaha fasaxa ah.
- Booqo **www.medicare.gov**. Tani waa mareegta rasmiga ah ee dowladda ee macluumaadka Medicare. Mareegtan waxay ku siinaysaa macluumaad badan oo ugu dambeeyay oo ku saabsan Medicare iyo guryaha dadka lagu xanaaneeyo iyo arrimaha kale ee Medicare ee hadda jira. Waxay haysaa qalab kaa caawinaya inaad is barbar dhigto Qorshayaasha Dheefaha Medicare iyo Qorshayaasha Daawooyinka Rijeetada Lagu Qoro ee aaggaaga. Waxaad ka raadin kartaa hoosta “Foomamka, Caawimaada & Dhigaalada” waxaadna si toos ah uga daabacan kartaa buug-yaraha “Medicare & You” kumbuyuutarkaaga. Dooro “Lambarada Taleefoonka iyo mareegaha” si aad u heshid xiriiro waxtar leh oo la xidhiidha ururada gobolkaaga. Haddii aadan haysan kumbuyuutar, maktabad ku taala deegaankaaga ama xarunta waayeelada ayaa laga yaabaa inay kaa caawiso inaad booqato mareegtan adigoo isticmaalaya kumbuyuutarkooda.

# Qaybta 2-aad: Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan helitaanka daryeelka aad u baahan tahay

Waqti kasta oo aad hesho adeegyo caafimaad, eeg si aad u xaqiiso in bixiyuhu yahay bixiye ku jira shabakada Qorshaha. Inta badan, waxaad u baahantahay inaad isticmaasho bixiyayaasha ku jira shabakada Qorshaha si aad u hesho adeegyadaada. Xubnaha waxay heli karaan Diiwaanka Bixiyaha kaasoo ay ku qoran yihiin bixiyayaasha ku jira shabakada Qorshaha. Diiwaanka Bixiyaha ayaa kuu sheegi kara adiga xogta ku saabsan bixiyeyaasha sida magaca cinwaanka, taleefan nambarka, aqoonta xirfadeysan ee u qalmitaanka, takhasuska gaarka ah, iyo luuqadda uu ku hadlo bixiyuhu. Wac Adeegyada Xubinta qeybta qaabilsan haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho xog ku saabsan tasdiiqinta guddiga, soo xadirida iskoolka caafimaadka, barnaamijka daganaanshaha, iyo xaaladda tasdiiqinta guddiga. Waxaad dalban kartaa nuqul la daabacay oo ah Diiwaanka Bixiyaha waqtigii aad doonto. Si aad u xaqiijiso macluumaadka wakhtigan, waxaad: wici kartaa bixiyaha, wici kartaa Adeegyada Xubinta adigoo ka wacaya lambarka ku qoran Qaybta 1-aad, ama booqanaya websaytkeena ku yaala Qaybta 1-aad.

Marka aad xubin ka tahay ama aad xubin ka noqoto UnitedHealthcare waxaad dooraneysaa ama laguu qoondeeynayaa Bixiyaha Daryeelka Aasaasiga ah (PCP). Bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) wuxuu ku siin karaa adeegyada daryeelka caafimaadka intooda badan oo aad u baahan tahay wuxuuna kaa caawin doonaa isuduwida daryeelkaaga. Waad iska badeli kartaa bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP). Fadlan la xiriir Adeegyada Xubinta si aad isaga beddesho bixiyahaaga.

Gudbin uma baahnid si aad u isticmaasho takhasuslaha ku jira shabakada Qorshaha. Si kastaba ha noqotee, rugtaada daryeelka aasaasiga ah ayaa bixin karta adeegyada daryeelka caafimaadka ee aad u baahan tahay intooda badan waxayna kaa caawin doontaa qabanqaabinta daryeelkaaga.

La xiriir rugtaada daryeelka aasaasiga ah si aad u hesho wixii macluumaad ah ee ku saabsan oggolaanshooyinka hore ee saacadaha rugta caafimaadka, iyo si aad ballan uga qabsato. Haddii aadan oofin karin ballantaada, wac rugtaada isla markaaba.

Waad iska beddeli kartaa Bixiyahaaga Daryeelka Aasaasiga ah ama rugtaada. Si aad u ogaato sida arrintan loo sameeyo, ka wac Adeegyada Xubinta lambarka taleefanka ee ku yaalo Qaybta 1-aad.

# Kalaguurka daryeelka

Haddii aad tahay xubin cusub oo dhawaan isdiiwaangelisay oo hadda ka helayso daryeel bixiye aan ahayn bixiyaha ku jira shabakada Qorshaha, waxaan kaa caawin doonaa inaad u gudubto bixiyaha ku jira shabakada.

Haddii daawada aad hadda qaadanayso aysan hoos imaanayn qorshahaaga cusub, waxaa laga yaabaa inaad awooddo inaad hesho sahay kumeelgaar ah oo 90 maalmood ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, wac Adeegyada Xubinta.

# Maareynta isticmaalka

UnitedHealthcare ayaa rabta inaad hesho xaddiga saxda ah ee daryeelka tayada leh. Waxaannu rabnaa inaan hubinno in adeegyada daryeelka caafimaadka ee la bixiyo ay caafimaad ahaan daruuri yihiin, xaaladdaada waafaqsan yihiin oo lagu bixiyo xarunta daryeelka ee ugu fiican. Waxaan waliba rabnaa inaan hubino in daryeelka aad hesho yahay dheef caynsan. Hannaanka tani loo sameeyo waxaa loo yaqaanaa maaraynta adeegsiga (utilization management, UM). Waxaannu raacnaa siyaasado iyo tallaabooyin si aannu u qaadanno go’aanno ku saabsan ansixinta adeegyada caafimaad. Kuma abaalmarino bixiyayaasha ama shaqaalaha inay diidaan caymiska. Dhiirigalin kuma siino go’aanada UM. Annagu uma abaalmarino qofna markay diidaan daryeel loo baahan yahay.

# Oggolaanshayaasha hore

Ansixinteena ayaa loo baahan yahay si adeegyada qaarkood loo daboolo. Tani waxaa loo yaqaan Oggolaanshaha Hore. Oggolaanshaha waa in la helaa kahor inta aadan helin adeegyada ama kahor inta aadan kharash ka bixinin adeegyada. Qaar badan oo ka mid ah adeegyadaan ayaa lagu xusay Qaybta 7-aad. Fadlan la shaqee dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ah si aad u hesho oggolaanshaha hore marka loo baahdo. Markay jiraan xaalado degdeg ah, waxaanu go’aan ku qaadan doonaa 72 saacadood gudahood kadib markaanu dhakhtarkaaga codsiga ka helno. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka wac Adeegyada Xubinta lambarka telefoonka ee ku qoran Qaybta 1-aad.

Inta badan, waxaad u baahantahay inaad isticmaasho bixiyayaasha ku jira shabakada Qorshaha si aad u hesho adeegyadaada. Haddii aad u baahantahay adeeg caymis oo aadan ka heli karin bixiyaha ku jira shabakada Qorshaha, waa inaad annaga naga heshaa oggolaansho hore oo aad ku isticmaasho bixiye ka baxsan shabakada. Waxyaabaha ka reeban sharcigan waxay yihiin:

- Adeegyada loo helo si furan: qorsheynta qoyska, ogaanshaha dhalmo la'aanta, baaritaanka iyo daaweynta cudurrada galmada lagu kala qaado (STD-yada), iyo baaritaanka ku aadan cudurka laga qaado cillada difaac yarida jirka (AIDS) ama xaaladaha kale ee la xiriira Fayraska difaac yarida jirka bini'aadamka (HIV). Waxaad isticmaali kartaa dhakhtar, rug, farmashiye kasta, ama wakaalada qorsheynta qoyska, xitaa haddii aysan ku jirin shabakadeena, si aad u hesho adeegyadaan.
- Adeegyada degdegga ah iyo xasilinta kadib

Wixii macluumaad dheeraad ah, ka wac Adeegyada Xubinta lambarka telefoonka ee ku qoran Qaybta 1-aad.

Haddii aan awoodi weyno inaan kuu helno bixiye ku jira shabakada qorshaha ee u qalma, waa inaan ku siinaa oggolaansho hore oo lama huraan ah si aad u isticmaasho takhasusle u qalma mid ka mid ah shuruudaha soo socda:

- Xaalad (joogto ah) raagta
- Xanuunka maskaxda ama jirka oo nafta halis gelin kara
- Uurka ka dambeeya saddexda bilood ee ugu horreeya (saddex-biloodka hore)
- Cudur ka sii darayo ama naafanimo
- Xaalad ama cudur kasta oo kale oo halis ah ama aad u daran oo u baahan daaweyn uu sameeyo takhasusle

**Haddii aadan naga helin oggolaanshaha hore marka loo baahdo, biilka waxaa laga yaabaa inaan la bixinin.** Wixii macluumaad dheeraad ah, ka wac Adeegyada Xubinta lambarka telefoonka ee ku qoran Qaybta 1-aad.

Haddii bixiyaha aad dooratay uusan gabi ahaanba ku jirin shabakadeena Qorshaha, waa inaad doorataa bixiye kale oo ku jira shabakada Qorshaha. Waxaad sii wadan kartaa isticmaalka adeegyada laga helo bixiyaha aan hadda gabi ahaanba ka tirsanayn shabakadeena Qorshaha mudda ilaa 120 maalmood ah sababaha soo socda dartood:

- Xaalad ba'an
- Xanuunka maskaxda ama jirka oo nafta halis gelin kara
- Uurka ka dambeeya saddexda bilood ee ugu horreeya (saddex-biloodka hore)
- Naafanimada jirka ama maskaxda waxaa lagu qeexaa inay tahay awood u waaayida inaad ka qaybqaadato hal ama in ka badan hawlaha nolosha ugu waaweyn. Tani waxay khusaysaa naafanimada dhammaatay ama la filayo inay ku dhammaato ugu yaraan hal sano ama ay u badan tahay inay sababto dhimasho.
- Xaalad naafanimo ama raagta taasoo marayso marxalad ba'an

Haddii dhakhtarkaaga uu kuu caddeeyo inay noloshaada ka dhiman tahay 180 maalmood ama ka yar, waxaa laga yaabaa inaad sii wadato isticmaalka adeegyada inta noloshaada ka hartay adigoo ka qaadanaayo bixiye aan gabi ahaanba qayb ka ahayn shabakadeena.

Wixii macluumaad dheeraad ah, ka wac Adeegyada Xubinta lambarka telefoonka ee ku qoran Qaybta 1-aad.

Marka la joogo UnitedHealthcare, waxaan leenahay shaqaale kuwaasoo kaa caawin kara inaad ogaato habka ugu wanaagsan ee loo isticmaalo adeegyada daryeelka caafimaadka. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan waxyaabaha ay ka mid yihiin halka aad ka heli karto adeegyada, helitaanka oggolaanshaha loogu talagalay adeegyada, ama xannibaadaha saaran daawooyinka dhakhtarku qoro, waan kaa caawin karnaa. Naga soo wac Adeegyada Xubinta **1-888-269-5410**, TTY **711**, 8:00 subaxnimo illaa 6:00 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha. Haddii aad u baahantahay caawimaad luuqadeed si aad uga hadasho wax ku saabsan arrimahaan, UnitedHealthcare waxay kugu siin kartaa macluumaadka afkaaga hooyo iyadoo adeegsaneysa turjubaan. Wixii ku aadan adeegyada farahadalka, wac **711**. Wixii ku aadan caawimada luuqadeed ee kale, wac Adeegyada Xubinta.

# Adeegyada la daboolo iyo kuwa aan la daboolin

Iska diiwaangelinta Qorshaha ma damaanad qaadayo in alaabaha qaarkood la daboolo. Daawooyinka dhakhtarku qoro ama qalabka caafimaadka qaarkood ayaa laga yaabaa inaan la daboolin. Tani waa run xitaa haddii horay loo daboolay.

Adeegyada iyo agabyada qaarkood lama daboolo. Dhammaan adeegyada caafimaadka waa inay caafimaad ahaan lagama maarmaan u yihiin si ay u noqdaan adeegyo la daboolo. Si taxaddar leh u akhri Buug-gacmeedkan Xubinta. Waxaa ku qoran adeegyo iyo agabyo badan kuwaasoo aan la daboolin. Ka tixraac Qaybaha 7-aad iyo 8-aad.

Adeegyada qaarkood lama daboolo sida ku cad Qorshaha laakiin waxaa laga yaabaa in la daboolo iyadoo loo marayo ilo kale. Ka tixraac Qaybta 9-aad wixii macluumaad dheeraad ah. Haddii aadan hubin in adeegga la daboolo/caymiyo iyo in kale, ka wac Adeegyadeena Xubinta lambarka taleefanka ee ku qoran Qaybta 1-aad.

Waxaa laga yaabaa inaan u daboolno adeegyada dheeraadka ah ama beddelka ah si waafaqsan shuruudaha qaarkood.

Codsiyada daboolidda/caymiska habraacyada, aaladaha, ama daawooyinka caafimaad ee cusub waxaa dib u eega kooxda agaasimayaasha caafimaadka oggolaanshaha kahor ee UnitedHealthcare. Kooxdan waxaa ka mid ah dhakhaatiirta iyo khubarada kale ee daryeelka caafimaadka. Waxay isticmaalaan tilmaamaha qaranka iyo cadaynta cilmiga sayniska si ay u go'aamiyaan in ay tahay in UnitedHealthcare ay ansixineysso qalabka, habraacyada, ama daawooyinka cusub iyo in kale.

# Kharash wadaagista

Kharash wadaagistu waa qadar ay xubnaha qorshaha caafimaadka masuul ka noqon karaan inay siiyaan bixiyeyaashooda ee adeegyada caafimaadkooda. Waxaa ka mid ah lacagaha laga jarayo iyo kuwa la bixinayo. **Ma haysatid kharash wadaag loogu talagalay adeegyada lagu daboola hoosta Qorshaheena.** Haddii aad diiwaanka qorshaheena iska saarto, waxaa laga yaabaa inaad yeelato kharash wadaaga adeegyada qaarkood.

Haddii aad leedahay Medicare, waa inaad ka heshaa rijeetada lagu qoray daawooyinkaaga intooda badan iyadoo loo marayo qorshaha rijeetada daawada ee Medicare (Medicare Qaybta D). Waxaa laga yaabaa inaad haysato lacagta dheeraadka ah ee caymiska oo aan lahayn xaddid bille ah ee qaar ka mid ah daawooyinkan.

# Lacagaha la siiyo bixiyeyaasha

Ma awoodna inaan dib kuu siino lacagaha biilasha caafimaadka ee aad bixiso intooda badan. Sharciyada gobolka iyo dawlada dhexe ayaa noo diidaya inaan si toos ah lacag kuu siino. Haddii aad lacag ka bixisay adeeg aad u malaynayso inay ahayd inaan daboolno, wac Adeegyada Xubinta.

Waxaa laga yaabaa inaad hesho adeegyo caafimaad ama agabyo oo qorshaha aan lagu daboolin haddii aad oggolaato inaad adiga iska bixiso lacagtooda. Bixiyeyaasha waa inay kaa saxiixaan foom oo aad ku qirayso inaad adigu mas'uul ka tahay biilka. Bixiyeyaasha waa inay kaa saxiixaan foom kahor inta aysan bixinin adeegyo ama agabyo kuwaasoo qorshaha aan lagu daboolin.

# Wacyigelinta dhaqanka

Waxaan fahamsanahay in caqiidadaada, dhaqankaaga, iyo qiyamkaaguba ay door ku leeyihiin caafimaadkaaga. Waxaan dooneynaa inaan kaa caawino inaad ilaaliso caafimaadkaaga iyo xiriirka wanaagsan ee kaala dhexeeyo dhakhtarkaaga. Waxaan dooneynaa inaan xaqiijino inaad daryeel ku hesho hab dhaqan ahaan xasaasi ah.

# Adeegyada turjubaanka

Waxaan ku siin doonaa adeegyada turjubaanka si ay kaaga caawiyaan inaad hesho adeegyada. Tani waxaa ka mid ah turjubaanada luqadda lagu hadlo iyo turjubaanada Farahadalka Mareykanka (ASL).

Adeegyada turjubaanka luuqada lagu hadlo ee fool-ka-foolka ah waxaa la daboolaa kaliya haddii turjubaanku ku qoran yahay Liiska Turjubaanka Daryeelka Caafimaadka ee Luuqadda Lagu Hadlo ee Waaxda Caafimaadka ee Minnesota. Fadlan ka wac Adeegyada Xubinta lambarka taleefanka ee ku qoran Qaybta 1-aad si aad u ogaato turjubaanada aad adeegsan karto.

# Caymiska caafimaad ee kale

Haddii aad leedahay caymis kale ee caafimaad ama ilka, noo sheeg **ka hor** inta aadan daryeel helin. Waanu ku soo ogaysiin doonaa haddii ay tahay inaad isticmaasho bixiyayaasha ku jira shabakada Qorshaha, ama bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee uu isticmaalo caymiskaaga kale. Waxaan kula qabanqaabin doonaa qorshahaaga caymiska kale. Haddii caymiskaaga kale ee caafimaadka ama ilkaha uu isbadelo, u sheeg shaqaalaha gobolkaaga.

Haddii aad leedahay Medicare, waa inaad heshid daawooyinka dhakhtarku qoro intooda badan adoo u marayo Barnaamijka Daawooyinka Dhakhtarku Qoro ee Medicare (qaybta Medicare Part D). Waa inaad ka diiwaangashan tahay qorshaha daawada dhakhtarku qoro ee Medicare si aad u hesho adeegyadaan. Qorshaha ma bixiyo kharashka daawooyinka dhakhtarku qoro kuwaasoo lagu daboolo Barnaamijka Daawooyinka Dhakhtarku Qoro ee Medicare.

# Macluumadka gaarka ah

Annaga, iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee adiga ku daryeela, waxaan xaq u leenahay inaan helno macluumaadka ku saabsan daryeelkaaga caafimaad. Markaad iska diiwaangeliso Barnaamijka Daryeelka Caafimaadka ee Minnesota, waxaad na siisay oggolaanshahaaga inaan sidan sameyno. Waxaan u ilaalin doonaa macluumaadkan si gaar ah sida sharcigu qabo.

# Barnaamijka Adeeg-qaataha La Xaddiday

Barnaamijka Adeeg-qaataha La Xaddiday (RRP) waxaa loogu talagalay xubnaha si khaldan u isticmaalay adeegyada caafimaadka. Tani waxaa ka mid ah helitaanka adeegyada caafimaadka ee aysan xubnaha u baahnayn, iyagoo u isticmaalaya qaab ka kharash badan intii ay ahayd, ama qaab laga yaabo in khatar ku tahay caafimaadka xubinta. UnitedHealthcare way ogeysiin doontaa xubnaha haddii lagu meeleeyo Barnaamijka Adeeg-qaataha La Xaddiday.

Haddii aad ku jirto Barnaamijka Adeeg-qaataha La Xaddiday, waa inaad ka heshaa adeegyada caafimaadkaaga hal bixiye daryeel aasaasi ah oo laguu qoondeeyay, hal rug caafimaad, hal isbitaal

oo uu isticmaalo bixiyaha daryeelka aasaasiga ah iyo hal farmashiye. UnitedHealthcare waxaa laga yaabaa inay kuu qoondeyso bixiyeyaasha kale ee adeegyada caafimaadka. Waxaa sidoo kale laguu qoondeyn doonaa hay'adda caafimaadka guriga. Waxaa laga yaabaa inaan laguu oggolaanin inaad isticmaasho dooqa kaalmada daryeelka gaarka ah ama xulashooyinka isticmaalka dabacsan, ama adeegyada macaamiisha ee la hago.

Waxaa lagugu xaddidi doonaa bixiyeyaashaan loo qoondeeyay daryeelka caafimaadka ugu yaraan muddo 24 bilood ah kadib u qalmitaanka Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka ee Minnesota (MHCP). Dhammaan gudbinta ku socota takhasuslayaasha waa inay ka yimaadaan bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah oo ayna helaan Barnaamijka Adeeg-qaataha La Xaddiday ee UnitedHealthcare. Adeeg-qaatayaasha la xaddiday waxaa laga yaabaa in aaysan jeebkooda lacag ka bixinin si ay u isticmaalaan bixiye aan loo qoondayn kaasoo la mid ah nooca bixiyaha adeeg ee bixiyayaasha loo qoondeeyay.

Meelaynta barnaamijka way sii socon doontaa haddii aad badesho qorshayaasha caafimaadka. Meelaynta barnaamijka sidoo kale way sii socon doontaa haddii aad u beddelato adeegga khidmada lagu helo ee MHCP. Kuma waayi doontid u qalmitaanka ku aadan MHCP sabab la xiriirta meelaynta barnaamijka.

Dhammaadka 24-ka bilood, isticmaalkaaga adeegyada daryeelka caafimaadka dib-u-eegis ayaa lagu sameyn doonaa. Haddii aad weli si khaldan u isticmaashay adeegyada caafimaadka, waxaa lagugu meelayn doonaa barnaamijka ilaa 36 bilood oo dheeraad ah oo u qalmitaan ah. Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato meelaynta Barnaamijka Adeeg-qaataha La Xaddiday. Waa inaad gudbisataa racfaan 60 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda ku qoran ogeysiiska annaga naga socda. Waa inaad racfaan qaadataa 30 maalmood gudahooda si aad uga hortagto xaddidaada in la fuliyo inta lagu gudajiro racfaankaaga. Waxaad adigu codsan kartaa Racfaan Goboleed (Dacwad-dhageysiga Cadaaladda ah ee gobolka) ka dib markii aad hesho go'aankeena kaas oo aan ku go'aansanay inaan dhaqangalino xaddidaada. Ka tixraac Qaybta 13-aad.

# Joojinta Xubinimada

Caymiskaaga aad nagu leedahay wuu dhammaan doonaa haddii aad go'aansato inaad ka baxdo Qorshaheena. Waxaad dooran kartaa inaad diiwaanka iska saarto wakhti kasta. Waxaad ahaan doontaa mid diiwaangashan ilaa dhammaadka bisha. Si aad noogu sheegto inaad rabto inaad ka tagto Qorshaheena, waxaad noo soo qori kartaa ama fakis noogu soo diri kartaa warqad ama waxaad buuxin kartaa foomka iska-tirida oo u soo dir Adeegyada Xubinta ama lambarkeena fakiska ee ku qoran Qaybta 1-aad. Hubi inaad saxiixdo oo taariikhayso warqadaada ama foomkaaga. Waa mid waxtar leh inaad ku darto taariikhda dhalashadaada. Taariikhda dhaqangalka waxay ku xiran tahay taariikhda codsigaaga la helo.

Caymiskaaga aad nagu leedahay ayaa u dhammaan doona mid ka mid ah sababaha soo socda:

- Gabi ahaanba uma qalantid Kaalmada Caafimaadka (Medicaid)
- Waxaad wayday u-qalmitaanka SNBC sababtoo ah gabi ahaanba hadda naafo ma tihid
- Waxaad u qalantaa Medicare laakiin si joogto ah uguma diiwaangashind Medicare Qaybta A iyo Medicare Qaybta B labadaba
- Waxaad leedahay caymis caafimaad oo qiimo dhaqangal ah leh
- Waxaad leedahay kharash dhimis oo ma aadan bixin
- Waxaad ka guurtay aagga adeegga Qorshaheena
- Waxaad gaartay da'da 65
- Waxaad dooratay inaad ka baxdo qorshaha

Haddii aadan gabi ahaanba u qalmin Caawimaada Caafimaadka (Medicaid), waxa laga yaabaa inaad u qalanto inaad ka iibsato caymiska caafimaadka MNsure. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan MNsure, wac 855-3MNSURE ama 855-366-7873, TTY, isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso, ama booqo **www.MNsure.org**. Wicitaankan waa bilaash.

# Qaybta 3-aad: Xeerka Xuquuqda Xubinta

## Waxaad xaq u leedahay in:

- Laguula dhaqmo si xushmad, karaamo, iyo tixgelin leh oo ku aadan xog qarintaada shakhsiyeed
- Hel adeegyada aad u baahantahay 24 saacadood maalintii, toddobada maalmood isbuucii. Tani waxaa ka mid ah xaaladaha degdeg ah.
- Laguu sheego dhibaatooyinkaaga caafimaad
- Lagula yeesho wadahadal furan si aad u hesho macluumaad ku saabsan xulashooyinka daawaynta ee ku habboon ama caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah xaaladahaaga oo ay ku jiraan sida daawayntu kuu caawin doonto ama kuu waxyeelayn doonto, iyada oo aan la eegayn kharashka ama faa'iidada caymiska
- Inaad hesho macluumaad ku saabsan ururkayaga, adeegyadayada, xirfadlayaashayada caafimaad iyo adeeg bixiyeyaashayada, iyo xuquuqaha iyo waajibaadyada xubinta
- Aad kala qaybqaadato bixiyeyaasha go'aanada ay gaaraayaan ee ku saabsan daryeelkaaga caafimaadka
- Aad diido daaweynta oo hesho macluumaadka ku saabsan waxa dhici karo haddii aad diido daaweynta
- Aad diido daryeelka laga helo bixiyayaasha gaarka ah
- Aad ogaato in diiwaanadaada si gaar ah loo xafidi doono sida uu sharciga qabo
- Aad weydiiso oo hel nuqul ka mid ah diiwaanadaada caafimaadka. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad codsato in la saxo diiwaanada.
- Aad hesho ogeysiiska go'aanadeena haddii aan diidno, yareyno, ama joojino adeeg, ama diidno lacag bixinta loogu talagalay adeegga
- Aad noo soo gudbiso cabasho ama racfaan innaga. Waxaad sidoo kale cabasha u gudbisan kartaa Waaxda Caafimaadka ee Minnesota.
- Aad codsato Racfaan Goboleed (Dacwad-dhageysiga Cadaaladda ah ee gobolka) Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (sidoo kale loo yaqaano "gobolka"). Waa inaad racfaan naga qaadataa kahor inta aadan codsan Racfaanka Gobolka. Haddii aan qaadano in ka badan 30 maalmood si aan go'aan uga gaarno racfaanka qorshahaaga oo aanan codsanin muddo kordhin, uma baahnid inaad sugto go'aankeena si aad u codsato Racfaanka Gobolka.

- Aad hesho sharxaad cad oo ku saabsan adeegyada daryeelka guriga ee la daboolo
- Aad bixiso tilmaamo qoran oo ogeysiinaaya dadka kale rabitaankaaga ku saabsan daryeelkaaga caafimaad. Tani waxaa loo yaqaanaa “tilmaamaha daryeelka caafimaadka.” Waxay kuu oggolaanaysaa inaad magacaabato qof (wakiil) si uu go'aanada kuugu gaaro haddii aadan awoodin inaad go'aansato, ama haddii aad dooneyso in uu qof kale kuu go'aamiyo.
- Aad doorato meesha aad ka heli doonto adeegyada qorsheynta qoyska, ogaanshaha dhalmo la'aanta, adeegyada baaritaanka iyo daaweynta cudurada galmada la isku qaadsiiyo, iyo adeegyada baaritaanka AIDS-ka iyo HIV-da
- Aad hesho fikrad labaad oo ku saabsan caafimaadka, fayo-qabka maskaxda, iyo adeegyada cillada isticmaalka maandooriyaha
- Aad xor ka ahaato xannibaadyada ama gooni u socoshada loo adeegsado qaabka: qasbida, edbinta, ku habboonaanshaha, ama aargoosiga
- Codso nuqul qoraal ah oo ka mid ah Buug-gacmeedkan Xubinta ugu yaraan hal mar sannadkiiba
- Hel isku duwida daryeelka. Waxa sidoo kale xaq u leedahay inaad diido isku duwida daryeelka.
- Si ikhtiyaari ah iskaga-bax
- Aad naga hesho macluumaadka soo socda, haddii aad iyaga codsato. Ka wac Adeegyada Xubinta lambarka telefoonka ee ku qoran Qaybta 1-aad.
  - Inaan isticmaalno qorshaha dhiiragelinta dhakhtarka kaasoo saameeya isticmaalka adeegyada gudbinta iyo in kale, iyo faahfaahinta qorshahani haddii aan isticmaalno
  - Natiijooyinka daraasada dib-u-eegista tayada dibada oo ka timid gobolka
  - Shahaadooyin xirfadeed ee ku aadan bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka
- Aad talooyin ka bixiso siyaasadeena ku aadan xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha
- Aad ku dhaqanto xuquuqaha halkan ku qoran

# Qaybta 4-aad: Waajibaadyada xubnaha

## Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad:

- Akhrido buug-gacmeedkan Xubinta oo aadna ogaato adeegyada lagu daboolo sida waafaqsan Qorshaha iyo sida iyaga loo helo
- Tusto kaarka aqoonsiga xubinta qorshahaaga caafimaadka iyo kaarka Barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Minnesota mar kasta oo aad hesho daryeel caafimaad. Sidoo kale tus kaararka kale ee caymiska caafimaadka ee aad leedahay, sida Medicare ama caymiska gaarka ah.
- Xiriir la sameyso dhakhtarka shabakada qorshaha kahor inta aadan xanuunsan. Tani waxay idiinka caawinaysaa adiga iyo dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ah inaad fahantaan wadarta guud ee xaaladaada caafimaad.
- Siiso macluumaadka uu ku weydiiyo dhakhtarkaaga ama qorshahaaga caafimaad si daryeelka saxda ah ama adeegyada laguu siiyo. La wadaag macluumaadka ku saabsan taariikhdaada hore ee caafimaadka.
- La shaqeyso dhakhtarkaaga si aad u fahamto guud ahaan xaaladaada caafimaad. Hormariso hadafyada daaweynta ee la isku raacsan yahay marka ay suurtogal tahay. Raacdo qorshayaasha iyo tilmaamaha ku aadan daryeelka aad kula heshiisay dhakhtarkaaga. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan daryeelkaaga, weydii dhakhtarkaaga.
- La shaqee isku-duwahaaga daryeelka si aad u abuurto qorshahaaga daryeelka. Haddii aadan rabin isku duwida daryeelka ama aad rabto in aad xaddido inta xiriir ee aad ka heleyso isku-duwaha daryeelka ama maamulaha kiiska, wac qorshahaaga caafimaadka si aad u ogeysiiso.
- Ogaato waxa la sameeyo marka ay dhibaato caafimaad dhacdo, goorta iyo goobta aad ka raadsanayso caawimaada, iyo sida looga hortago dhibaatooyinka caafimaadka
- Ku dhaqanto daryeelka caafimaadka kahortagga ah. Samee tijaabooyinka, baaritaanada iyo tallaallada adiga lagugula taliyay oo ku salaysan da'daada iyo jinsigaaga.

Nala soo xiriir haddii aad qabto wax su'aalo, walaacyo, dhibaatooyin, ama talo soo-jeedin ah. Ka wac Adeegyada Xubinta **1-888-269-5410**, TTY **711**.

# Qaybta 5-aad: Kaarka aqoonsiga (ID) xubinimadaada qorshaha caafimaadka

Xubin kasta waxaa uu heli doona kaarka aqoonsiga (ID) xubinimada Qorshaha.

Mar kasta waa inaad wadataa kaarka aqoonsiga (ID) xubinimadaada qorshaha.


Waa inaad tustaa kaarka aqoonsiga (ID) xubinimadaada qorshaha mar kasta oo aad hesho daryeel caafimaad.

Waa inaad isku garab isticmaashaa kaarka aqoonsiga (ID) xubinimadaada qorshaha iyo kaarkaaga Barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Minnesota. Sidoo kale tus kaararka kale ee caymiska caafimaadka ee aad leedahay, sida Medicare ama caymiska gaarka ah. Ka tixraac Qaybta 11-aad: Isticmaalida Qorshaha caymiska ee caymiye kale si aad u hesho wixii ah macluumaad dheeraad ah.

Ka wac Adeegyada Xubinta telefoonka ku qoran Qaybta 1-aad isla markiiba haddii kaarka aqoonsiga xubinimadaada uu kaa lumo ama lagaa xado. Waxaan kuu soo diri doonaa kaar cusub.

Wac shaqaalaha gobolkaaga haddii kaarkaaga Barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Minnesota uu lumo ama la xado.

Waa kan tusaalaha kaarka aqoonsiga xubinta ee Qorshaha si loo muujiyo waxa uu u egyahay:



# Qaybta 6-aad: Kharash wadaagista

Kharash wadaagistu waa qadar ay xubnaha qorshaha caafimaadka masuul ka noqon karaan inay siiyaan bixiyeyaashooda ee adeegyada caafimaadkooda. Waxaa ka mid ah lacagaha laga jarayo iyo kuwa la bixinayo. **Ma haysatid kharash wadaag loogu talagalay adeegyada lagu daboola hoosta Qorshaheena.** Haddii aad diiwaanka qorshaheena iska saarto, waxaa laga yaabaa inaad yeelato kharash wadaaga adeegyada qaarkood.

Haddii aad leedahay Medicare, waa inaad ka heshaa rijeetada lagu qoray daawooyinkaaga intooda badan iyadoo loo marayo qorshaha rijeetada daawada ee Medicare (Medicare Qaybta D). Waxaa laga yaabaa inaad leedahay qayb-bixin aan lahayn xadid bila ah oo loogu talagalay qaar ka mid ah daawooyinkan. Haddii aad leedahay qayb-bixin, waa inaad qayb-bixintaada si toos ah u siisaa daryeel-bixiyahaaga.

# Qaybta 7-aad: Adeegyada la daboolo

Qaybtan waxa ay sharxaysaa adeegyada waaweyn ee lagu daboolo hoosta Qorshaha loogu talagalay xubnaha Caawimada Caafimaadka (Medicaid). Ma ahan liis dhamaystiran oo ku aadan adeegyada la daboolo. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad fahamto waxa ay yihiin adeegyada la daboolo/caymiska leh, ka wac Adeegyada Xubinta lambarka taleefanka ee ku qoran Qaybta 1-aad. Adeegyada qaarkood waxaa ay leeyihiin xaddidaadyo. Adeegyada qaarkood waxaa ay u baahan yihiin oggolaansho hore. Adeega lagu calaamadeeyay sumada (*) waxaa loola jeedaa waa loo baahan yahay oggolaansho hore ama waxaa laga yaabaa in loo baahdo. Xaqiiji in ay jirto oggolaansho hore oo kuu diyaarsan kahor inta aadan qaadanin adeegga. Dhammaan adeegyada daryeelka caafimaadka waa inay caafimaad ahaan lagama maarmaan u noqdaan iyaga si loo daboolo. Ka tixraac Qaybta 2-aad wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan oggolaanshaha hore. Sidoo kale waxaad ka wici kartaa Adeegyada Xubinta lambarka telefoonka ee ku qoran Qaybta 1-aad si aad u hesho wixii ah macluumaad dheeraad ah.

## Adeegyada Cirbadeynta jirka

**Adeegyada la daboolo:**

Adeegyada cirbadeynta jirka waxaa la daboolaa marka uu bixiyo cirbadeeye ruqsadeysan ama dhakhtar kale oo ruqsadeysan oo Minnesota ka haysta tababarka iyo shahaadada cirbadeynta.

Ilaa 20 qaybood oo adeegyada cirbadeynta ah ayaa la oggolyahay shantirsiga sanad kasta iyagoo an oggolaansho lahayn. Weydiiso oggolaansho hore haddii qaybo dheeraad ah loo baahanyahay.*

Adeegyada cirbadeynta waxaa lagu daboolaa kuwa soo socda:

- Xanuun daran iyo midka mudada dheer
- Niyad-jab
- Walaaca
- Cudurka dhimirka ee muddada dheer
- Cilada cadaadiska dhaawaca ka dib
- Hurdo la'aanta
- Joojinta sigaarka
- Cilada lugaha aan nasashada lahayn
- Xanuunada dhiiga caadada
- Af qaleelka (afka qalalan) ee la xiriira kuwan soo socda:

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

- Cilada ilinta iyo candhuuf la'aanta (Sjogrens syndrome)
- Terabiga shucaaca
- Lalabada iyo mataga la xiriira kuwan soo socda:
  - Habraacyada qalliinka kadib ah
  - Uurka
  - Daryeelka kansarka

# Isuduwida Daryeelka

Waxaa laguu qoray isku duwe daryeel kaasoo kugu xiri doona adeegyada iyo agabyada aad u baahan tahay si aad u hesho daryeelka ugu wacan ee macquulka ah. Isku duweyaasha daryeelka ayaa sidoo kale kaa caawin kara inaad wax badan ka ogaato caafimaadkaaga, wixii xaalado caafimaad ah ee aad qabto, waxayna kaa caawin karaan sidii aad u raaci lahayd qorshahaaga daryeelka. Isku duweyaasha daryeelka ayaa kuu raaci kara ballamaha caafimaadka haddii aad sidaa ka dooneyso. Isku duweyaasha daryeelka iyo shaqaalaha UnitedHealthcare Member Services ayaa la heli karaa si ay uga jawaabaan suaalaha ku saabsan UnitedHealthcare iyo barnaamijka SNBC.

Isku duwe daryeel ayaa mar waliba laguu heli karaa. Waad joojin kartaa isticmaalida adeegaan waqtigii aad doonto adigoo usheegaya isku duwaha daryeelkaaga ama la xiriiraya UnitedHealthcare. Haddii aad dooneyso inaad baddasho isku duwaha daryeelkaaga, kala xiriir Adeegyada Xubinta qeybta qaabilsan taleefanka ku qoran Qeybta 1-aad ama waxaad u sheegi kartaa isku duwaha daryeelkaaga inaad baddasho inaad dooneyso waana la baddalayaa isku duwaha daryeelkaaga. Haddii lagu siiyo maareynta kiiska degmada aadse dooneyn inaad la shaqeyso maareeyaha kiiska ee degmada, waxaad dalban kartaa taa baddalkeeda inuu kula shaqeeyo isku duwe daryeel oo ka socda UnitedHealthcare.

Dhammaan xubnaha waxa ay leeyihiin isku-duwaha daryeelka loo xilsaaray kaas oo lagu heli karo taleefoon ahaan ama si fool-ka-fool ah si uu uga caawiyo helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka. Isku duwaha daryeelka ayaa kaa caawin doona inaad hesho daryeel ka hortag ah, ka jawaabto su'aalaha ku saabsan dheefaha, samayso/beddasho bixiye daryeel caafimaad ama kaa caawin doona inaad hesho khabiir. Waxay sidoo kale kula soo xiriiri doonaan si ay u dhammaystiraan Qiimaynta Khatarta Caafimaadka (HRA) si loo ogaado adeegyo dheeraad ah oo ku caawin kara iyo si loo sameeyo qorshe daryeel oo taageera baahiyahaaga. Tani waxa ka mid noqon kara kaalmada helitaanka adeegaha daryeelka gaarka ah ama adeegyada ka dhaafitaanka iyo adeegyada hoos ku taxan.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

**Adeegyada la daboolo:**

- Qiimeyn lagu aqoonsanaayo sida isku duwaha daryeelku uu kaaga caawin karo daryeelkaaga caafimaadka, guriyeynta, helitaanka cunnada, iyo baahiyo kale
- Waxay kaa caawinayaan diyaarinta jadwalka, xiriirin, iyo helitaanka qiimaynada amabaaritaanada, iyo adeegyada daryeelka caafimaadka sida ilkaha, caafimaadka habdhaqanka, baxnaaninta, iyo daryeelka aasaasiga ah
- Abuuridda iyo cusbooneysiinta qorshehaaga daryeelka, oo ku salaysan baahiyahaaga gaarka ah iyo la shaqeynta dadkii aad soo xulato
- Markii ogolaansho lagaa helo, isku duweyaasha daryeelka ee UnitedHealthcare waxay la xiriiri karaan hayadaha iyo dadka kaa caawin kara sidii aad ku dabooli lahayd baahiyahaaga:
  - Waxay kaala shaqeyn doonaan adi iyo dd kale oo aad xulatay markii aad isbaddal ku samaynayso baahiyahaaga daryeelka caafimaadka ama isbitaal jiifinta
  - Waxay kugu caawin doonaan helitaanka agabyada aad u baahan tahay bulshadaada dhexdeeda
  - Waxay kaala shaqeyn doonaan Adeegyada Guriga iyo Bulshada Kusalaysan maareeyeyaasha kiis cafinta ama maareyeyaasha kale ee kiiska
- Ayadoo la adeegsanaayo kaqeybgalkaaga, isku duweyaasha daryeelka ee UnitedHealthcare waxay sidoo kale qabtaan waxyaabaha soo socda:
  - Waxay kaa caawinayan sidii aad u dejisan lahayd yoolal loogu tala galay caafimaadkaaga iyo fayoobida waxayna kaala shaqeyn doonaan inaad gaadho yoolashaad
  - Way kula soo xiriiri ama kula kulmi adiga si joogto ah si aad u niqaashtaan caafimaadkaaga iyo fayoobidaada
  - Waxay ku soo xasuusin markii aad u baahan tahay adeegyada ka hortagga ah, baaritaannada, ama ballamaha qeybta ka ah qorshahaaga daryeelka

**Qoraalada:**

Haddii aad qabto suaalo ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo la xiriiridda isku duwaha daryeelkaaga, kawac Adeegyada Xubinta ee UnitedHealthcare taleefanka kuqoran Qeybta 1-aad.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Baaritaanada Ilmaha iyo Dhallinta (C&TC)

**Adeegyada la daboolo:**

**Booqashooyinka caafimaad ee baaritaanada Ilmaha iyo Dhallinta (C&TC)**

Booqashooyinkani waxay carruurta, dhallinta, iyo da' yarta qaangaarka ah siinayaan adeegyada kahortaga ah oo haboon, kuwa ilkaha, kuwa caafimaadka maskaxda, kuwa kobaca, iyo, markii loo baahdo, kuwa takhasuslaha.

Iyadoo ku xiran da'da, booqashooyinkan waxaa ka mid noqon kara:

- Cabbirrada koritaanka
- Waxbarashada caafimaadka
- Taariikhda hore ee caafimaadka oo ay ku jirto nafaqada
- Baaritaanka koritaanka
- Baaritaanka caafimaadka maskaxda ama dareenka bulshada
- Baaritaanka jirka madaxa-ilaa-suulka ah
- Tallaallada
- Tijaabooyinka shaybaarka
- Baaritaanada aragtida
- Baaritaanada maqalka
- Caafimaadka afka, oo ay ku jiraan adeegsiga varnish fluoride

**Qoraalada:**

C&TC waa barnaamij daryeel caafimaad oo booqashooyin caafimaad leh oo loogu talagalay xubnaha laga bilaabo dhalashada ilaa 21 sano jir.

Laga bilaabo da'da 11, booqasho kasta waxaa ku jiri kara hal-hal-mar oo lala yesho bixiyaha daryeelka caafimaadka. Tani waxay wakhti u siineysaa kurayda iyo dhallinta inay si asturan su'aalo u waydiiyaan una bartaan inay maareeyaan caafimaadkooda. Inta jeer ee C&TC loo baahan yahay waxay ku xiran tahay da'da, oo carruurta ku jirta daryeelka korinta waa inay marar badan helaan booqashooyin:

**Dhalashada ilaa 2-1/2 sano jir:** 0-1, 2, 4, 6, 9, 12, 15, 18, 24 iyo 30 bilood

**3 ilaa 21 sano jir:** 3, 4, 5, 6, 7, 8, 9, 10, 11, 12, 13, 14, 15, 16, 17, 18, 19 iyo 20 sano jir

Booqashada C&TC waxa loo isticmaalaa gelitaanka Head Start, WIC, dugsiga, daryeelka ilmaha, iyo hawlaha xerooyinka iyo ciyaaraha. Hubi inaad soo qaado foomka wakhtiga booqashada si uu daryeel-bixiyuhu u buuxiyo.

La xiriir Rugtaada Daryeelka Aasaasiga ah si aad u jadwaleysato booqashooyinka caafimaadka kahortagga ah ee C&TC.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Daryeelka kalagoysyada lafaha

**Adeegyada la daboolo:**

- Hal qiimayn ama baaritaan shantirsiga sanad kasta
- Gacan ku haynta (habaynta) lafdhabarta si loo daaweeyo kala fakashada lafaha lafdhabarta - ilaa 24 daweyn shantirsiga sanad kasta, oo ku xaddidan lix bil kasta. Daawaynaha ka badan 24 shantirsiga sanad kasta ama lix bil kasta waxay u baahan yihiin oggolaansho hore.
- Raajooyinka marka loo baahdo si loo taageero ogaanshaha kala fakashada lafaha lafdhabarta

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Isku habaynada kale, fiitamiinada, agabyada caafimaadka, daaweynada, iyo qalabka ka socda lafatuujiyaha

# Adeegyada ilkaha

**MUHIIM AH: Kani ma ahan liis dhammaystiran.  Cayminta gaarka ah lama dammaanad qaado.**

Xayiraadaha adeegga ayaa khusayn kara adeegyada ku qoran qaybta adeegyada ilkaha. Waxa laga yaabaa inay adeegyada qaar u baahdaan ama aysan u baahan oggolaansho hore daruurinimo caafimaad darteed. Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan adeegyadan, waxaad la xiriiri kartaa Adeegyada Xubinta.

**Adeegyada la daboolo:**

Adeegyada ogaanshaha:

- baarista iyo qiimaynta afka
- adeegyada sawirista, oo ay ku jiraan:
- Raajada ilkaha (Bitewing)
- Halka Raajo ee ogaanshaha dhibaatooyinka
- Raajada afka oo dhan (Panoramic)
- Raajada afka oo idil

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

Adeegyada kahortagga ah:

- daawaynta joojinta suuska
- nadiifinta ilkaha
- marinta flouride ee ilkaha
- buuxinta kahortagga suuska
- tilmaamaha nadaafada afka

Adeegyada dib u soo celinta:

- buuxinta daloolada
- buuxinta daloolada ee suuxinta wata si xanuunka loo yareeyo
- buuxinta dahaarka ah ee gooni-goonida ah, ku kooban resin-ta iyo bir-xadiidda aan daxlin

Endodontics: (xididka ilkaha)

- hawlaha endodontic-ga ah ee kale

Daaweynta Ciridka Ilkaha:

- Burburinta guud ee huurada iyo wasaqda ilkaha (ka saarida afka oo dhan)

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

- Ilko qorida iyo wasakhtirka godka ilkaha
  - habraacyada dabagalka ah (dayactirka ciridka ilkaha) (muddo laba sano ah ka dib xoqida iyo sifaynta xididka)

Habaynta muuqaalka ilkaha:

- Qalabka loo isticmaalo saaritaanka (ilko iyo qaybo, cirid iyo ilko macmal ah) (hal qalab saddex sanaba xagasha iligii kastaba); qaybaha had iyo jeer waxay u baahan yihiin oggolaansho hore
- Dib u habaynta, wax ka badelka, dib u haaginta, dayactirada iyo dib u dhisida qalabyada la istcmaalo (ilkaha iyo qaybo)
- Badelka aaladaha lumay, la xaday, ama waxyeeloobay oo aan la hagaajin karin markay jiraan xaaladaha qaarkood
- Badelka qayb kamid ah qalabka haddii qaybta hadda jirta aan la badeli karin si loo daboolo baahiyaha ilkaha
- Xarkaha qaboojiya unugyada
- Isku xirka sixida ilkaha iyo dayactirka

Qalliinka afka:

- saaridda ilkaha
- saarista gaws-dambeedka (leh Oggolaansho Hore)

Daawaynta Ilko-raaranka oo leh Oggolaansho Hor

Adeegyada guud ee dheeraadka ah ee daryeelka ilkaha:

- Daaweynta gurmadka ah ee ku aadan xanuunka ilkaha
- Suuxdinta guud, suuxdinta qotoda dheer
- Xarunta daryeelka ee la balaariyey/guriga oo loogu yeero goobaha machadyada qaarkood oo ay ku jiraan: guryaha daryeelka hoyga, machadyada loogu talagalay cudurada maskaxda (IMDs), Xarumaha Daryeelka Dhexdhexaadka ah ee loogu talagalay Shaqsiyaadka Qaba Naafanimada Koritaanka (ICF/DDs), Guriga Daryeelka Gaarka ah, Xulashooyinka daaweynta la Balaariyey ee Minnesota (METO), xarumaha kalkaalinta, xarumaha kalkaalinta xirfadeysan, iyo sariiro lulid (sariirta daryeelka ee taalo isbitaalka)
- Maareynta habdhaqanka marka loo baahdo si loo hubiyo in adeega ilkaha ee la daboolo si sax ah oo badqab leh loo sameeyo

---

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

- Nitrous oxide
- Dib u habaynta qaniinyada afka
- Suuxinta afka ama faleenbada

**Qoraalada:**

Haddii aad doorato inaad faa'iidooyinka ilkaha ee aad ka hesho xaruunta Caafimaadka Aqoonta bbuxda leh ee Dawlada Dhexe (FQHC) ama rugta caafimaadka ilkaha ee ay dawladu maamusho, waxaad heli doontaa isla faa'iidooyinka aad xaqa u leedahay ee hoos yimaada Gargaarka Caafimaadka (Medicaid).

Haddii aad bilowdo adeegyada isku habaynta ilkaha, uma baahnaan doonno dhamaystirka qorshaha daawaynta si aan lacag bixiyaha ugu bixino adeegyada la helay.

Haddii aad ku cusub tahay qorshaheena caafimaadka oo aadna mar hore bilowday qorshaha daawaynta adeegga ilkaha (tusaale. daryeelka isku habaynta ilkaha), nala soo xiriir si an iskugu dubaridno daryeelka.

Ka tixraac Qaybta 1-aad wixii macluumaadka xiriirka Adeegyada Ilkaha ah.

# Adeegyadda ogaanshaha

**Adeegyada la daboolo:**

- Tijaabooyinka shaybaarka iyo raajooyinka
- Tijaabooyinka ogaanshaha caafimaad ee kale ee uu dhakhtarkaagu amray

**Qoraalada:**

Baaritaanada lagu ogaanayo cudurada ayaa caynsan haddii ay buuxiyaan shuruudaha caynsanaanta ee Medicare ama kuwayaga oo baaritaanadu yihiin kuwa caafimaad ahaan lagama maarmaan ah. Ma aha in baaritaan kasta caynsanaan doono. Adeegyada ayaa laga yaabaa in lagu bixiyo xafiiska dhakhtarka, rug caafimaad, isbitaalka bukaan-socodka, goobta bukaan-socodka, shaybaar madax-bannaan ama xarunta baaritaanka adeegsado shucaaca.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Dhakhtarka iyo adeegyada kale ee caafimaadka

**Adeegyada la daboolo:**

- Booqashooyinka dhakhtarka oo ay ku jiraan:
  - Daaweynta cudurada xasaasiyadda iyo baaritaanka xasaasiyadda
  - Daryeelka loogu talagalay haweenka uurka leh (ka tixraac Qoraalada)
  - Qorshaynta qoyska — **Adeegga si furan loo helo**
  - Tijaabooyinka shaybaarka iyo raajooyinka
  - Baaritaanada jirka
  - Baaritaanada kahortagga ah
  - Booqashooyinka xafiiska kahortagga
  - Takhasuslayaasha
  - La-talinta daawada fogaan araga ah
  - Tallaalada iyo daawooyinka lagu bixiyo xafiiska dhakhtarka
  - Booqashooyinka ku aadan xannuunka ama dhaawaca
  - Booqashooyinka isbitaalka ama guriga kalkaalinta
- Cirbadaynta loogu talagalay xanuunka iyo xaaladaha kale ee gaarka ah, ee uu sameeyo cibadeeyo shatiyeysan ama gudaha baaxadda tababarka ee bixiye shatiyeysan oo leh tababar cirbadayn ama aqoonsiga
- Adeegyada kalkaalisada tacliinta sare leh: adeegyada ay bixiso kalkaalisada ruqsadeysan, kalkaalisada suuxinta, kalkaalisada umulisada, ama kalkaalisada takhasuska caafimaadka
- Habdhaqan Guri oo Caafimaad leh: isku duwaha daryeelka aasaasiga ah, adeegyada caafimaadka dhimirka, iyo adeegyada bulshada
- Dhiiga iyo wax soo saarka dhiiga
- Caymiskka tijaabada caafimaad: Daryeel joogto ah kaas oo: 1) lagu bixiyo isaga oo qayb ka ah daawaynta hannaanka ee Tijaabada Caafimaadka; 2) waa caadi, caado ahaan, oona ku haboon xaaladaada; iyo 3) sida caadiga ah waxaa lagu bixin doonaa meel ka baxsan Tijaabada Caafimaadka. Tani waxaa ka mid ah adeegyada iyo alaabaha loo baahan yahay in lagu daaweyo saamaynta iyo dhibaatooyinka daawaynta hannaanka.
- Baaritaanada kansarka (ay ku jiraan baaritaanka naaska, baaritaanka ilma galeenka, baaritaanka kansarka qanjirka, baaritaanka kansarka mindhicirka)

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

- Adeegyada Caafimaadka
- Isku duwida daryeelka shaqaalaha caafimaadka bulshada iyo adeegyada waxbarashada bukaanka
- Adeegyada Farsamoyaqaanka Degdegga ah ee Caafimaadka Bulshada (CMET)
  - Isbitaalka kadib ama kalkaalisada kadib booqashooyinka ka saarida guriga ee uu amray bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah
  - Booqashooyinka qiimeynta badbaadada ee uu dalbado Bixiyaha Daryeelka Aasaasiga ah ama dhakhtarka (PCP)
- Adeegyada Dhakhtarka Bulshada: adeegyada qaarkood waxaa bixiya dhakhtarka caafimaadka bulshada. Adeegyada waa inay qayb ka ahaadaan qorshaha daryeelka ee bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah. Adeegyada waxaa ka mid noqon kara:
  - Qiimeynta caafimaadka
  - Kormeerida iyo barashada cudurrada mudada dheer
  - Ku caawi daawooyinka
  - Tallaalka iyo tallaalida
  - Ururinta muunadaha shaybaarka
  - Daryeelka dabagalka ah kadib markii lagugu daaweeyay isbitaal
  - Hadraacyada kale ee caafimaad ee yaryar
- La-talinta iyo baaritaanka cudurrada galmada la isku qaadsiiyo (STDs), AIDS-ka iyo xaaladaha kale ee HIV-ga la xiriira — **Adeegga si furan loo helo**
- Adeegyada daryeelka cudurka neefta ee la kobciyey (oo loogu talagalay xubnaha u qalma ee ay da'dsoodu ka yar tahay 21 sano jir kuwaasoo lagu sameeyey baaritaan la xiriira inay qabaan cudurka neefta oo aan si fiican loo xakameyn Karin, marka ay soo buuxiyaan shuruudo gaar ah)
  - Booqashooyinka guriga si loo go'aamiyo haddii ay jiraan wax-kiciya neefta guriga xubinta
  - Waxaa loo baahan yahay inuu adeegga ku siiyo xirfadle caafimaad oo haysta rukhsad, xirfadle caafimaad oo qaabilsan arrimaha guriga, iyo hormuud qaabbilsan qiimeynta khatarta. Wakaaladdaada caafimaadka dadwaynaha ee deegaanka ayaa kaa caawin doonta inaad hesho mid ka mid ah xirfadlayaashan daryeelka caafimaadka si uu kuu caawiyo ama waxaad la xiriiri kartaa Adeegyada Xubinta.
- Adeegyada Daryeelka Caafimaadka ee Guriga: isku duwida daryeelka ee xubnaha leh baahiyada daryeel caafimaad ee adag ama dabadheer
- Waxbarashada caafimaadka iyo la-talinta (tusaale ahaan, joojinta sigaarka, la-talinta nafaqada, barashada sonkorowga)

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.



**Su'aalo ma qabtaa?** Booqo **myuhc.com/CommunityPlan**, ama ka wac Adeegyada Xubinta lambarka **1-888-269-5410**, TTY **711**, ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso. Wicitaankan waa bilaash.

Jadwalka Tusmada

- Isku duwida Adeegga Bulshada Ku salaysan ee isbitaal Gaaritaanka (IRSC): isku dubbarididda adeegyada lagu bartilmaameedsanaayo yareynta isticmaalka qolka gargaarka degdegga ah ee isbitaalka (ER) xaaladaha qaarkood. Adeegan waxaa uu wax ka qabtaa caafimaadka, bulshada, dhaqaalaha, iyo baahiyaha kale ee xubnaha si loo yareeyo isticmaalka ER iyo adeegyada kale ee daryeelka caafimaadka.
- Tallaallada
- Adeegyada caafimaadka lugaha (saarida cidiyaha suulasha ee waxyeelobay, diir kaca maqaarka lugaha, iyo daryeelka cagaha kale ee aan caadiga ahayn)
- Daaweynta neefsashada
- Adeegyada kalkaalisada caafimaadka dadweynaha ee shatiyaysan ama kalkaalisada diiwaangashan oo ku tababaranaysa rugta caafimaadka dadweynaha si waafaqsan qaybta dawladeed
- Daawaynta AIDS-ka iyo xaaladaha kale ee HIV-ga la xiriira — **Ma ahan** Adeeg si furan loo helo. Waa inaad isticmaashaa bixiye ku jira shabakada Qorshaha.
- Daawaynta cudurrada galmada lagu kala qaado (STDs) — **Adeegga si furan loo helo**
- Maareynta daryeelka qaaxada iyo indha indheynta tooska ah ee qaadashada daawada

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Qaababka macmalka ah ee aad uur ku yeelan karto (Bacriminta macmalka ah, oo ay ka midka yihiin bacriminta in-vitro iyo adeegyada la xiriira, daawooyinka dhalmada iyo adeegyada la xiriira)

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Adeegyada Wax-kaqabadka Koriinka iyo Habdhaqanka ee Degdega ah ee Xili Hore la Bixiyo (EIDBI)

## (carruurta da'dooda ay ka yar tahay 21)

Ujeeddada macaashka EIDBI waa in la bixiyo caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah, Waxqabadka hore iyo degdeg ah ee loogu talagalay dadka qaba Cudurka dhibaatada korin la'aanta habdhaqan (ASD) iyo xaaladaha la xiriira. Qoysasku waxay wax badan ayay baran karaan oo ku saabsan **EIDBI iyagoo qaadanaya koorsada EIDBI 101** ee onlaynka ah (https://pathlore.dhs.mn.gov/Courseware/DisabilityServices/EIDBI/EIDBI101_F/index.html). Waraaqda Soo Dhaweynta **EIDBI ee Daryeelayaasha** (https://www.dhs.state.mn.us/EIDBI-Welcome-Letter) waxaa ku qoran macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka marka qoysku bilaabo adeegyada.

Qoysasku waxay wax badan ka baran karaan ootisamka, iyo sidoo kale khayraadka iyo taageerada, iyagoo booqanaya **degelka Minnesota Autism Resource Portal** (https://mn.gov/autism/).

Macaashka waxaa sidoo kale loogu talagalay:

- Wax bar, tababar oo taageer waalidiinta iyo qoysaska
- Horumarinta madaxbanaanida dadka iyo ka qaybgalka qoyska, dugsiga iyo nolosha bulshada
- Horumarinta natiijooyinka mudada dheer ee mustaqbalka fog iyo tayada nolosha dadka iyo qoysaskooda

Adeegyada EIDBI waxaa bixiya bixiyeyaasha ka diiwaangashan EIDBI kuwaasoo khibrad u leh hababka la ansixiyay kuwaasoo ay ka mid yihiin:

- **Falanqaynta Habdhaqanka ee Dabaqa ah (Applied Behavior Analysis, ABA)**
- **Modheelka Kobaca, Farqiga Shakhsiga, Ku Salaysan Xiriirka (Developmental, Individual Difference, Relationship-Based, DIR)/Floortime**
- **Early Start Denver Model (ESDM)**

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

- **Mashruuca PLAY (PLAY Project)**
- **Wax-kaqabadka Kobaca Xiriirka (Relationship Development Intervention, RDI)**
- **Isdhexgalka Hore ee Bulsheed (Early Social Interaction, ESI)**
  https://www.dhs.state.mn.us/EIDBI-TreatmentModalities

**Adeegyada la daboolo:**

- **Qiimaynta Dhinacyada Badan ee Dhammaystiran** (CMDE) oo loogu baahan yahay go'aaminta mutaysiga iyo daruuriga caafimaadka ee adeegyada EIDBI (https://www.dhs.state.mn.us/CMDE)
- **Dejinta Qorshaha Daaweynta Qofka (ITP)** (Bilawga) (https://www.dhs.state.mn.us/ITP)
- **Hormarinta Qorshaha Daaweynta Qofka (ITP)** iyo Kormeerida Hormarka*
- **Waxqabad Toos ah**: Qof, Koox, iyo/ama heer intii hore ka sarreeya (https://www.dhs.state.mn.us/EIDBI-DirectIntervention)
- **Kormeerka Waxqabadka iyo Jiheynta** (https://www.dhs.state.mn.us/EIDBI-ObservationandDirection)
- **Tababarka iyo la-talinta Qoyska/Daryeel-bixiyaha**: Shakhsi iyo/ama Koox (https://www.dhs.state.mn.us/EIDBI-CaregiverTrainingandCounseling)
- **Shirka Daryeelka Isku-dubaridan** (https://www.dhs.state.mn.us/EIDBICoordinatedCareConference)
- **Waqtiga safarka**

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Adeegyada caafimaadka degdega ah iyo daryeelka dejinta kadib ah

**Adeegyada la daboolo:**

- Adeegyada qolka gargaarka degdega ah
- Daryeelka Dejinta Kadib
- Ambalaasta (hawada ama dhulka waxaa ka mid ah gaadiidka biyaha mara)

**Adeegyada aan la daboolin:**

Xaalad degdeg ah, dhakhso ah, ama adeegyo kale oo daryeel caafimaad oo la geeyo ama alaabta laga keeno bixiyeyaasha ku teedsan meel ka baxsan Maraykanka (US). Ma sameyn doono lacag bixinta loogu talagalay daryeelka caafimaadka inaan siino bixiyaha ama hay'ad kasta oo ka baxsan U.S.

**Qoraalada:**

Haddii aad qabto xaalad degdeg ah oo aad isla markiiba u baahan tahay daawayn, wac 911 ama isticmaal qolka gargaarka degdegga ah ee kuugu dhow. Tus kaarkaaga aqoonsiga xubinimo oona ka codso inay kuu wacaan dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ah.

Dhammaan xaalaha kale, wac dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ah, haddii ay suurtagal tahay. Lambarka taleefoonka ee rugaha caafimaadka waxa uu sidoo kale ku qoran yahay kaarka aqoonsiga xubinta.

Haddii aad kabaxsan tahay magaalada, aad qolka gargaarka degdega ah ee kuugu dhow ama wac 911. Tus kaarkaaga aqoonsiga xubinimo oona ka codso inay kuu wacaan dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ah.

Waa inaad ku wacdaa Adeegyada Xubinta 48 saacadood gudahooda ama sida ugu dhakhsaha badan kadib marka aad hesho daryeelka degdega ah ee isbitaal aan ka mid ahayn shabakada Qorshaha.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Adeegyada qorsheynta qoyska

**Adeegyada la daboolo:**

- Baaritaanka qorsheynta qoyska iyo daaweynta caafimaadka — **Adeegga si furan loo helo**
- Shaybaarka qorsheynta qoyska iyo baaritaanada ogaanshaha — **Adeegga si furan loo helo**
- Hababka qorsheynta qoyska (tusaale, kaniiniyada xakameynta uurka, balastar, giiraanta, Aalada dhalmada xakameyso ee la geliyo ilmo-galeenka(IUD), irbadaha, ku talaalida) — **Adeegga si furan loo helo**
- Agabyada qorsheynta qoyska oo leh warqada uu dhakhtarka qoro (tusaale, kondhom, suufka ilmo-galeenka lagu dhajiyo, makaanka xiraha, sharootada, mina xayiraha, dabool) — **Adeegga si furan loo helo**
- La-talinta iyo ogaanshaha dhalmo la'aanta, oo ay ku jiraan adeegyada la xiriira — **Adeegga si furan loo helo**
- Daaweynta xaaladaha caafimaad ee dhalmo la'aanta — **Ma ahan** Adeeg si furan loo helo. Waa inaad isticmaashaa bixiye ku jira shabakada Qorshaha. Ogsonoow: Adeegan kuma jiraan qaabab macmal ah oo uur lagu yeelan karo.
- La-talinta iyo baarista cudurrada galmada la isku qaadsiiyo (STD-yada), AIDS-ka, iyo xaaladaha kale ee la xiriira HIV-ga — **Adeegga si furan loo helo**
- Daawaynta cudurrada galmada lagu kala qaado (STDs) — **Adeegga si furan loo helo**
- Dhalmo-xirka ikhtiyaariga ah — **Adeegga si furan loo helo Ogsonoow:** Waa inay da'daada ahaataa 21 jir ama ka weyn waana inaad saxiixdaa foomka oggolaanshaha dhalmo-xirka ee dowladda federaalka. Ugu yaraan 30 maalmood, laakiin aan ka badnayn 180 maalmood, waa inaad ku soo gudbisaa inta u dhaxaysa taariikhda aad saxiixday foomka iyo taariikhda qalliinka.
- La-talinta hida sidaha — **Adeegga si furan loo helo**
- Tijaabada hida sidaha — **Ma ahan** adeeg si furan loo helo. Waa inaad isticmaashaa bixiye ku jira shabakada Qorshaha.
- Daawaynta AIDS-ka iyo xaaladaha kale ee HIV-ga la xiriira — **Ma ahan** Adeeg si furan loo helo. Waa inaad isticmaashaa bixiye ku jira shabakada Qorshaha.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Qaababka macmalka ah ee aad uur ku yeelan karto (Bacriminta macmalka ah, oo ay ka midka yihiin bacriminta macmalka iyo adeegyada la xiriira; daawooyinka dhalmada iyo adeegyada la xiriira)
- Dib u soo celinta nadiifinta isxilqaanka ah
- Qalliinka madhalaysnimada oo lagu saameyo qof ku hoos jira ilaalin ama mas'uuliyad

**Qoraalada:**

Sharciga dawladda dhexe iyo kan gobolka ayaa kuu oggolaanaya inaad doorato dhakhtar kasta, rug caafimaad, isbitaal, farmashiye, ama hay'ada qorsheynta qoyska si aad u hesho **Adeegyada loo helo si furan**, xitaa haddii aysan ku jirin shabakada Qorshaha.

# Caawiyeyaasha maqalka

**Adeegyada la daboolo:**

- Baytariyaasha caawiyaha maqalka
- Caawiyeyaasha maqalka*
- Dayactirka iyo badelka caawiyeyaasha maqalka sababtoo ah xirashada iyo jeexida caadiga ah, iyadoo xaddidan

# Adeegyada daryeelka guriga

**Adeegyada la daboolo:***

- Booqashada kalkaalisada xirfadda leh
- Daaweynada baxnaaninta si loogu soo celiyo shaqada (tusaale ahaan, hadalka, jirka, shaqada, neefsashada)
- Booqashada kaaliyaha caafimaadka guriga

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Guriga xanaanada bukaanka daran

**Adeegyada la daboolo:***

Macaashyada Guriga xanaanada waxaa ka mid ah caynsanaanta adeegyada soo socda, marka si toos ah loo bixiyo iyadoo laga jawaabayo cudurka kama dambaysta ah:

- Adeegyada dhakhtarka
- Adeegyada kalkaalinta
- Adeegyada caafimaadka bulshada
- La-talinta
- Agabyada iyo qalabka caafimaadka
- Daawooyinka bukaan-socodka ee loogu talagalay calaamadaha iyo xakamaynta xanuunka
- Nafaqada iyo la-talin kale
- Daryeelka muddada gaaban ee bukaan-jiifka
- Daryeelka nasashada
- Kaaliyaha caafimaadka guriga iyo adeegyada sameeyaa guriga
- Daaweynta Jirka, shaqada, iyo hadalka
- Tabarucayaal
- Alaabooyinka iyo adeegyada kale ee ku jira qorshaha daryeelka ee si kale loo daboolo ee adeegyada caafimaadka

**Qoraalada:**

**Doorashada Medicare**

Waa inaad doorataa faa'iidooyinka guriga xanaanada gaarka ah si aad u hesho adeegyada guriga xanaanada.

Haddii aad labadaba u-qalantaan Medicare- iyo Medicaid oo aad doorataan guriga xanaanada bukaanka daran, waa inaad doorataan daryeelka hospice-ka ee Medicaid marka lagu daro daryeelka hospice-ka Medicaid. Habraacyada dowlada dhexe waxay kaa mamnuucayaan inaad ku doorato daryeelka guriga xanaanada bukaanka daran iyadoo loo maraayo hal barnaamij ee ma ahan marka kale marka aad u qalanto labadaba.

Xubnaha da'doodu tahay 21 iyo kuwa ka yar weli waxay heli karaan daawaynta ku aadan xaaladooda kama dambaysta ah marka lagu daro adeegyada guriga xanaanada bukaanka daran.

Haddii aad xiisaynayso isticmaalka adeegyada guriga xanaanada gaarka ah, ka wac Adeegyada Xubinta taleefanka ku qoran Qeybta 1aad.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Isbitaal – Bukaan-jiif

**Adeegyada la daboolo:***

Adeegyada isbitaalka bukaan-jiifka waa la daboolaa haddii la go'aamiyo inay caafimaad ahaan lagama maarmaan u yihiin. Tani waxaa ka mid ah:

- Isbitaal joogitaanka bukaan-jiifka
- Qolkaaga bar-gaarka ah iyo cuntooyinka
- Qolka gaarka ah marka caafimaad ahaan lagama maarmaan yahay
- Tijaabooyin iyo raajooyin
- Qalliin
- Daawooyinka
- Sheyda loo isticmaalo Caafimaadka
- Adeegyada xirfadeed
- Adeegyada daawaynta (tusaale ahaan, jirka, shaqada, hadalka, neefsashada)

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Alaabaha raaxada gaarka ahaaneed, sida Muqaal-baahiyaha, telefoonka, timo-jaraha iyo adeegyada qurxinta, iyo adeegyada martida
- Karashyada la xiriira daryeelka isbitaalka ee loogu talagalay adeegyada baarista, qalliinka caaga ah, ama qalliinka qurxinta laguma daboolin marka laga reebo haddii la go'aamiyo inay caafimaad ahaan lagama maarmaan u tahay iyadoo loo maraayo hannaanka dib-u-eegista caafimaadka

**Qoraalada:**

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan noocyada kala duwan ee isbitaal seexinta bukaan-jiifka ee caafimaadka dhimirka /habdhaqanka ama isticmaalka maandooriyaha (SUD), ka tixraac qaybahaan gaarka ah gudaha buug-gacmeedkan xubinta.

Daryeelka xaaladda aan gurmadka ahayn ee qofku ka helo isbitaaalka waxay u baahan kartaa oggolaansho hore. la shaqee dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ah si aad u hesho oggolaanshaha hore marka loo baahdo. Sidoo kale waxaad ka wici kartaa Adeegyada Xubinta lambarka telefoonka ee ku qoran Qeybta 1-aad si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

## Isbitaalka – Cuntooyinka Kadib Ka Saarista Isbitaalka ee Bukaan-jiifka:

**Adeegyada la daboolo:**

Qorshuhu wuxuu adeegyadan soo socda siin doonaa xubnaha u-qalma Cuntooyinka Kadib Ka Saarista Isbitaalka ee Bukaan-jiifka:

- Waxaa laga yaabaa inaad u-qalanto inaad qaadato ilaa 2 cunto maalintii, oo ku xaddidan 2 isbuuc kadib marka lagaa saaro isbitaalka wadar ahaana dhan 28 cunto oo diyaarsan. Cuntooyinkan ayaa laguugu keeni doonaa gurigaaga.
- Xubnaha da'doodu tahay 18 sano jir iyo wixii ka weyn ee la seexiyay ama laga saaray isbitaalka, goobta lagu magacaabo qolka gurmadka degdegga ah ama waarka bukaan-jiifka ama xarunta kalkaalinta ee shatiyeysan.

**Qoraalada:**

Cuntooyinka ka saarista isbitaalka kadib la qaato waxaa lagu saleeyaa baahida loo qabo in la siiyo cunto nafaqo leh, oo diyaarsan xubnaha dhawaan laga saaray isbitaalka iyo kuwa leh awood xaddidan oo ay ku qabtaan hawlaha nolosha maalinlaha ah (ADLs). Waanu kula soo xiriiri doonaa si aan kuu siino macaashkan marka aan ogaano ka saarista isbitaal ee dhawaan dhacday. Sidoo kale waxaad ka wici kartaa Adeegyada Xubinta (Member Services) lambarka telefoonka ee ku qoran Qeybta 1-aad si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

## Isbitaalka – Cuntooyinka Kadib Ka Saarista Isbitaalka ee Bukaan-jiifka – Barnaamijka Hooyada iyo Dhallaanka:

**Adeegyada la daboolo:**

Qorshuhu wuxuu adeegyadan soo socda siin doonaa xubnaha u-qalma Cuntooyinka Kadib Ka Saarista Isbitaalka ee Bukaan-jiifka:

- Waxaad u-qalmi kartaa in laguugu keeno 28 cunto oo diyaarsan gurigaaga kadib marka lagaa saaro isbitaalka ama xarunta kalkaalinta ee shatiyeysan.
- Xubnaha la seexiyay ama laga saaray isbitaalka kadib dhalmada dhallaanka

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

**Qoraalada:**

Cuntooyinka ka saarista isbitaalka kadib waxaa lagu saleeyaa baahida loo qabo in la siiyo cunto nafaqo leh, oo diyaarsan xubnaha dhawaan laga saaray isbitaalka kadib dhalmada dhallaanka si loo taageero soo kabashada iyo nafaqeynta. Waanu kula soo xiriiri doonaa si aan kuu siino macaashkan marka aan ogaano ka saarista isbitaal ee dhawaan dhacday. Sidoo kale waxaad ka wici kartaa Adeegyada Xubinta (Member Services) lambarka telefoonka ee ku qoran Qeybta 1-aad si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

# Isbitaalka – Bukaan-socodka

**Adeegyada la daboolo:**

- Daryeelka degdega ah ee loogu talagalay xaaladaha aan sida gargaarka degdega ah u darnayn
- Xarunta qalliinka bukaan-socodka
- Tijaabooyin iyo raajooyin
- Kelyo-sifaynta
- Adeegyada qolka gargaarka degdega ah
- Daryeelka Dejinta Kadib
- Adeegyada kormeerka — haddii aan“ lagu gudbin isbitaalka bukaan-jiif ahaan, waxa aad geli kartaa heerka “kormeerka bukaan-socod” ilaa uu bixiyahaaga go'aamiyo in xaaladdaada ay u baahan tahay isbitaal seexinta bukaan-jiifka ama guriga laga saaro. Adeegga kormeerka waxaa la daboolaa ilaa 48 saacadood. UnitedHealthcare waxay tixgelin doontaa adeegyada kormeerka ilaa 72 saacadood xaalado aan caadi ahayn markii lagula soo gudbiyo dukumeenti dheeraad ah.*

**Qoraalada:**

Daryeelka xaaladda aan gurmadka ahayn ee qofku ka helo isbitaaalka waxay u baahan kartaa oggolaansho hore. la shaqee dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ah si aad u hesho oggolaanshaha hore marka loo baahdo. Sidoo kale waxaad ka wici kartaa Adeegyada Xubinta lambarka telefoonka ee ku qoran Qeybta 1-aad si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Adeegyada dejinta guryeynta
## (loogu talagalay xubnaha 18 sano jir iyo ka weyn)

**Adeegyada la daboolo:**

Qorshaha waxaa uu siinaya adeegyada soo socda xubnaha u qalma Adeegyada Dejinta Guryaha:

- Adeegyada la talinta guriyeynta si loo soo saaro qorshe udub dhaxaad u ah qofka oo loogu talagalay dadka aan lahayn adeegyada maaraynta kiisaska Caawimada Caafimaadka
- Adeegyada ka badelashada guriyeynta si ay kaaga caawiyaan qorshaynta, helitaanka, iyo uguurista guri
  - Beddelashada guriga — kharashyada guuritaanka (ku xadidan $3000 sanadkiiba)
  - Waxaa loogu talagalay kaliya dadka ka tagaya machad lagu maalgeliyo Kaalmada Caafimaadka ama goob uu maamulo daryeel-bixiye ee u guuraya gurigooda
  - Codsiyada, dabaajiyada dhigaalka ah, iyo kharashka sugida dukumiintiyada looga baahan yahay si loo kireysto dabaqa ama guriga
  - Alaabta muhiimka ah ee guriga looga baahan yahay si loogu noolaado oo loo isticmaalo guriga, oo ay ku jiraan alaabta guriga, dahaarka daaqadaha, alaabta cuntada lagu diyaariyo, iyo gogosha sariirta ama qubayska
  - Khidmadaha lagu rakibayo ama dabaajiyada loogu talagalay adeegyada muhiimka, oo ay ku jiraan telefoonka, korontada, qalabka kululeynta iyo biyaha
  - Adeegyada lagama maarmaanka u ah caafimaadka iyo badqabka shakhsiga sida ka saarida cayayaanka iyo nadiifin hal mar ka hor inta aan la gelin guriga
  - Beddelaadyada lama huraanka u ah gelitaaanka guriga
- Adeegyada joogtaynta guryeynta si ay kaaga caawiyaan ilaalinta guryaha
- Gaadiidka lagu helo Adeegyada Dejinta Guryaha (dhexroorka 60 mayl gudaheeda)

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Bixinta kirada ama amaahda guryaha
- Cuntada
- Dharka
- Alaabooyinka madadaalada, oo ay ku jiraan aaladaha ciyaaraha/fidiyowyada khadka ee tooska ah, kombiyuutarada, telefishinada, fiilada telefiishanada, samaacadaha iyo wixii la mid ah
- Wixii ah shay, kharash ama taageero kuwaasi oo nuqul ka ah adeeg kale ama uu leeyahay ama uu kireeyo adeeg-bixiyaha

---

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

**Qoraalada:**

Waa in lagugu sameeyaa qiimaynta u-qalmitaanka Adeegyada Dejinta Guriyeynta oo lagu helo inaad u qalanto adeegyadan. Haddii aad u baahan tahay Adeegyada Dejinta Guriyeynta, waxaad codsan kartaa qiimayn ama waxaa ku taageeraya bixiyahaaga ama maamulahaaga kiiska. Haddii aad leedahay maareeye kiis oo la bartilmaameedsanaayo ama maareeyaha kiis ka dhaafitaanka, maareeyaha kiiska ayaa kaa taageeri kara helitaanka adeegyada, ama waxaad si toos ah ula xiriiri kartaa bixiyaha Adeegyada Dejinta Guryeynta si uu kuu caawiyo.

Shaqaalaha Waaxda Adeegyada Dadweynaha (DHS) waxay isticmaali doonaan natiijooyinka qiimaynta si ay u go'aamiyaan inaad buuxisay shuruudaha ku salaysan baahiyaha si aad u hesho adeeggan. DHS waxay kuu soo diri doontaa warqad oggolaansho ama diidmo ah oo ku aadan Adeegyada Dejinta Guryaha.

Haddii laguu ansixiyo kharashyada guuritaanka, adeeg-bixiyahaagu waa inuu inoo soo diraa risiidhka kharash kasta oo guuritaanka ku baxay. kala shaqee adeeg-bixiyahaaga sidii aad u heli lahayd faa'iidadan.

# Adeegyada turjubaanka

**Adeegyada la daboolo:**

- Adeegyada turjubaanka luqadda lagu hadlo
- Adeegyada turjubaanka luqadda calaamadaha

**Qoraalada:**

Adeegyada turjubaanka ayaa la heli karaa si ay kaaga caawiyaan helitaanka adeegyada caynsan.

Ka tixraac Adeegyada Turjubaanka qaybta 1-aad si aad u hesho macluumaadka xiriirka iyo si aad u ogaato turjubaanada aad isticmaali karto.

# Qalabka iyo agabyada caafimaadka

**Adeegyada la daboolo:**

- Xubnaha jirka ee Macmalka ah ama duubabka kabaha laga dul xirto
- Qalabka caafimaadka ee waaraya (tusaale ahaan, kuraasta curyaamiinta, sariiraha isbitaalka, biraha lagu lugeeya, ulaha jiiska, qalabka lagu istaago, qalbka qubeyska iyo musqusha iyo timaha macmalka ah ee dadka timuhu uga daadanayaan xaalad caafimaad darro oo ay qaybaan darteed). La xiriir Adeegyada Xubnaha si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caymiska iyo xadka faa'iidooyinka ee loogu talagalay baluukada.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

- Dayactirka qalabka caafimaadka
- Batariyada loogu talagalay qalabka caafimaadka
- Kabaha qaar, oo ay ku jiraan kabaha dabiibinta, marka shuruudo qaas ah la buuxiyo iyo marka kabaha si qaas ah loo qaabeeyey ama ay kabtu qayb ka tahay duub xajinayo lugta
- Ogsajiinta iyo qalabka ogsijiinta
- Aaladaha nadiifinta mariinka hawada
- Aaladda kicinta korantada
- Agabyada caafimaad oo aad u baahan tahay si aad u daryeesho xannuunkaada, dhaawacaaga ama naafanimadaada
- Qalabka iyo agabyada sonkorowga
- Wax soo saarka nafaqeynta ama mindhicirka, marka shuruudo gaar ah la buuxiyo
- Alaabaha kaadi-ceshan la'aanta
- Agabyada qorsheynta qoyska — **Adeegga si furan loo helo**. Ka tixraac Adeegyada Qorsheynta Qoyska ee qaybtan ku jirta.
- Aalado isgaarsiinta kordhiya, oo ay ku jiraan taabledyada elektarooniga ah
- Wax soo saarka loo adeegsado yareynta xasaasiyadda (xubnaha u qalma ee da'doodu ka yar tahay 21 jir kuwaas oo laga helay cudurka neefta oo aan si fiican loo xakameyn karin)
- Aaladaha lagu ogaado qallalka

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Wax ka badelka qaabdhismeedka ee guriga, gawaarida, ama goobta shaqada, oo ay ku jiraan meelaha la qabsado ee musqusha
- Waxsoosaarka la xiriira bii'ada (sida sifeeyayaasha hawada, qaboojiyayaasha ama mukeefyada, qoyaan-keenayaasha) ilaa inta lagu soo darayo adeegyada caymiska ee waxsoosaarka la xiriira walxaha yareynta xasaasiyadda ee loogu talo-galay xubnaha
- Qalabka jimicsiga

**Qoraalada:**

Waxaad u baahan doontaa inaad isticmaasho dhakhtarkaaga oo aad hesho warqad dhakhtar qalabka iyo agabyada caafimaadka loo daboolo.

wac lambarka telefoonka ee shuruudaha caymiska ee qalabka caafimaadka waara ee ku yaalo Qaybta 1-aad haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha caymiskeena joogtada ah ee qalabka caafimaadka ee waara.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Caafimaadka Maskaxda iyo Adeegyada Habdhaqanka Caafimaadka

**Adeegyada la daboolo:**

- Rugta Caafimaadka Habdhaqanka Bulshada ee Shatiyaysan (CCBHC)
- Adeegyada Habdhaqanka Caafimaad ee Caruurta ee Degdega ah (Children's Intensive Behavioral Health Services, CIBHS) (loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 sano jir)
- La-talinta Daryeelka Caafimaadka
- Adeegyada ka jawaabida dhibaatooyinka oo ay ka mid yihiin:
  - Baaritaan
  - Qiimeyn
  - Waxqabadka
  - Dejinta oo ay ku jirto dejinta deeganaanshaha
  - Faragelinta bulsheed
- Qiimeynta ogaanshaha oo ay ku jiraan baaritaanka jiritaanka xannuunka dhimirka ee wada-socda iyo cillada isticmaalka maandooriyaha
- Daawaynta Habdhaqanka Lahjadeed (DBT) Barnaamijka Bukaan-socodka degdega ah (IOP)
- Daawaynta Been-abuurka ah ee Bulsheed ee Dhimirka (FACT)
- Joogitaanka isbitaalka dhimirka ee bukaan-jiifka, oo ay ku jirto joogida isbitaalka dhimirka ee bukaan-jiifka oo la balaariyey
- Bixiyaha caafimaadka dhimirka wakhtiga safarka
- Maareynta Kiis Bartilmaameedka Caafimaadka Maskaxda (MH-TCM)
- Adeegyada caafimaadka dhimirka ee bukaan-socodka oo ay ka mid yihiin:
  - Sharaxaada natiijooyinka
  - Adeegyada waxbarashada cilmi nafsiga qoyska (loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21)
  - Maareynta daaweynta caafimaadka dhimirka
  - Adeegyada cilmi nafsiga dabeecada iyo habdhaqanka
  - Daaweynta cilmi nafsiga (bukaanka ama qoyska, qoyska, dhibaatada, iyo kooxda)
  - Baaritaanka maanka

---

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

- Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Dhakhtarka oo ay ku jiraan:
  - Qiimaynta waxqabadka caafimaadka iyo habdhaqanka
  - Booqashooyinka bukaan-jiifka
  - La-talinta xanuunada maanka ee bixiyeyaasha daryeelka aasaasiga ah
  - La-talinta dhakhtarka, qiimaynta, iyo maareynta
- Adeegyada Caafimaadka Baxnaaninta Maskaxda oo ay ku jiraan:
  - Daweynta Caafimaadka Maskaxda ee Bulshada (ACT)
  - Daryeelka maalinta ee dadka waaweyn
  - Adeegyada Caafimaadka Maskaxda ee Baxnaaninta Dadka Waaweyn (ARMHS)
  - Takhasuslayaasha asaagga qoyska ee shatiyaysan (loogu talagalay xubnaha da'doodu ay ka yar tahay 21)
  - Adeegyada taageerada ee Takhasuslaha Asaagga ee Shatiyaysan (CPS) mararka qaarkood
  - Adeegyada daawaynta deegaanka caafimaadka maskaxda ee carruurta (loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21)
  - Adeegyada Daaweynta Carruurta iyo Taageerada (CTSS) oo ay ku jiraan Daaweynta Maalinta Carruurta (loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21)
  - Adeegyada waxbarashada cilmi nafsiga qoyska (loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21)
  - Adeegyada Daryeel Korinta Daawaynta Degdegga ah (loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21)
  - Barnaamijka Isbitaal Dhigista Qaybta ah (PHP)
  - Adeegyada Caafimaadka Maskaxda ee ah Xanaanada Degdega ah (IRMHS)/Daaweynta Xaqiijinta Dhallinyarada ee Bulshada (Youth ACT): Adeegyada caafimaadka dhimirka ee baxnaaninta degdega ah ee dadka aan goobta deganayn (loogu talagalay xubnaha da'doodu tahay 18 ilaa 20 jir)
- Deganaanshaha Xarunta Daawaynta Xanuunka Maanka (PRTF) ee loogu talagalay xubnaha da'doodu tahay 21 iyo ka yar
- Daryeelka fogaan-aragga

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Baddalida daaweynta

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

Adeegyada soo socda laguma daboolin hoosta qorshaha laakiin waxaa laga yaabaa in la helo iyadoo loo maraayo gobolkaaga. Wac gobolkaaga si aad u hesho wixii macluumaad ah. Sidoo kale ka tixraac Qaybta 9-aad.

- Daaweynta lagu helo xarumaha Xeerka 36-aad ee aan ruqsada u haysan inay bixiyaan Adeegyada Daaweynta Deganaanshaha degdega ah (IRTS)
- Qolka iyo guddiga la xiriira Adeegyada Daaweynta Deganaanshaha degdega ah (IRTS)
- Adeegyada daawaynta iyo qolka iyo guddiga ee xarumaha daawaynta caafimaadka xanuunka dhimirka ee carruurta qaarkood ee deganaanshaha ee gobollada xuduudka leh

**Qoraalada:**

Ka tixraac Caafimaadka Maskaxda iyo Adeegyada Habdhaqanka Caafimaadka ee Qaybta 1-aad wixii macluumaad ah oo ku saabsan meesha ay tahay inaad wacdo ama aad ku qoreyso.

Isticmaal bixiye ku jira shabakada qorshaha si aad u hesho adeegyada caafimaadka dhimirka.

Haddii aan go'aansanno inaan loo baahnayn daaweynta caafimaadka dhimirka oo habaysan, waxaad heli kartaa fikrad labaad. Fikradda labaad, waa inaan kuu oggolaano inaad isticmaasho xirfadle kasta oo caafimaad oo aad dooneyso oo aan ku jirin shabakada Qorshaha. Annaga ayaa bixin doona tan. Waa inaan tixgelinaa fikrada labaad laakiin ma ahan inaan aqbalno fikrada labaad. Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato go'aankeena.

Ma go'aamin doono baahida caafimaad ee adeegyada caafimaadka dhimirka ee ay maxkamaddu amartay. Isticmaal bixiye ku jira shabakad Qorshaha si aad u samayso qiimaynta caafimaadka dhimirka ee ay maxkamadaada amartay.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Adeegyada guriga kalkaalinta

**Adeegyada la daboolo:**

- Qolka Guriga Kalkaalinta iyo Guddiga — Waxaan mas'uul ka nahay bixinta wadarta 100 maalmood ee qolka guriga kalkaalinta iyo guddiga. Haddii aad u baahan tahay daryeelka guriga kalkaalinta ee sii socota ee ka badan 100 maalmood, Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Minnesota (DHS) ayaa si toos ah u bixin doonta qolkaaga iyo guddigaaga. Haddii DHS ay hadda bixinayso kharashka qolkaaga iyo guddiga guriga kalkaalinta, DHS, maaha anaga, way sii wadi doontaa bixinta kharashka qolkaaga iyo guddigaaga.
- Daryeelka kalkaalinta
- Adeegyada daawaynta/terabiga
- Daawooyinka lagu daboolo Kaalmada Caafimaadka
- Agabyada iyo qalabka caafimaadka

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Qol gaar ah, haddii uusan dhakhtarkaagu u amrin sabab caafimaad awgeed mooyee
- Alaabaha raaxada gaarka ahaaneed sida Muqaal-baahiyaha, taleefoonka, timo-jaraha iyo adeegyada qurxinta, adeegyada martida

# Khadka Telefoonka ee Kalkaalinta

Kala hadal kalkaalinta diiwaangashan (RN) walaacyada iyo su'aalaha aad qabto ee ku saabsan caafimaadkaaga.

**Adeegyada la daboolo:**

Adeegyada Khadka Tooska ah ee Kalkaalinta ayaa la heli karaa, 24 saacadood maalintii, 7 maalmood toddobaadkii. Wac 1-800-718-9066. Wicitaankan waa bilaash.

Sidoo kale waxaad ka wici kartaa Adeegyada Xubinta (Member Services) lambarka telefoonka ee ku qoran Qeybta 1-aad si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

---

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Adeegyada dhalmada iyo cudurada haweenka (OB/GYN)

**Adeegyada la daboolo:**

- Daryeelka dhalmada ka hor, dhalmada, iyo dhalmad ka dib
- Heerarka dhalmada ilmaha
- La-talinta HIV-ga iyo baaritaanka ku aadan haweenka uurka leh — **Adeegga si furan loo helo**
- Daaweynta loogu talagalay haweenka uurka leh ee HIV-ga qaba
- Tijaabinta iyo daawaynta cudurada galmada lagu kala qaado (STDs) — **Adeegga si furan loo helo**
- Adeegyada uurka la xiriira ee la helay ee la xiriira ilmo iska soo xaaqida (kuma jiraan adeegyada la xiriira ilmo soo xaaqida)
- Adeegyada umulisada oo ay bixinayso umuliso shati haysato
- Adeegyada uu bixiyo xirfadle caafimaad oo ruqsadeysan oo ku sugan xarumaha dhalmada ee sharciyeysan, oo ay ku jiraan adeegyada kalkaalisada umulisooyinka shahaadeysan iyo umulisooyin dhaqameedka sharciyeysan

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Ilmo iska soo xaaqid: Adeegan laguma daboolin hoosta Qorshaha. Waxaa laga yaabaa inuu gobolka daboolo. Ka wac Taageerada Macmiilka Daryeelka Caafimaadka ee DHS (HCCS) 651-297-3862 ama 800-657-3672 ama 711 (TTY), ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso ee loogu talagalay macluumaadka caymiska. Wicitaankan waa bilaash. Sidoo kale ka tixraac Qaybta 9-aad.
- Dhalmada guriga ee la qorsheeyay

**Qoraalada:**

Waxaad leedahay “helitaan toos ah” oo ku aadan bixiyeyaasha OB-GYN ee loogu talagalay adeegyada soo socda: baaritaan caafimaad oo kahortag ah oo sanadle ah, oo ay ku jiraan baaritaanada dabagalka ah oo dhakhtarkaagu sheegay inay lagama maarmaan tahay; qiimaynta iyo daawaynta loogu talagalay xaaladaha cudurada haweenka ama xaaladaha degdega ah. Si aad u hesho adeegyada helitaanka tooska ah, waa inaad u tagtaa bixiye kujira shabakadda Qorshaha. Wixii ku aadan adeegyada lagu asteeyay **helitaan furan**, waxaad isticmaali kartaa rug kasta oo dhakhtar, isbitaal, farmashiye, ama wakaaladda qorsheynta qoyska.

---

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Adeegyada indhaha

**Adeegyada la daboolo:**

- Baaritaanada indhaha
- Muraayadaha aragga ee bilawga, markay caafimaad ahaan daruuriga yihiin (xulshada fareemyada muraayadaha indhaha way xaddidnaan kartaa)
- Badelaada muraayadaha, marka caafimaad ahaan lagama maarmaan ay tahay
- Badelka isku midka ah ee okiyaalayaasha indhaha ee daboolan ee ku aadan lumida, xatooyada, ama dhaawaca aan la dayactiri karin
- Dayactirka wareegyada iyo muraayadaha okiyaalayaasha indhaha ee lagu daboolo Qorshaha
- Midab-madow, muraayadaha jawiga la jaanqaada (tusaale ahaan, muraayadaha Transition®) ama muraayadaha kala shaandeeya Iftiinka, marka caafimaad ahaan lagama maarmaan ay tahay
- Okiyaalayaasha indhaha, marka caafimaad ahaan lagama maarmaan uu yahay

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Laba muraayad oo dheeraad ah
- Laba muraayadlaha ama sadex muraayadlaha hormarsan (iyadoo an lahayn xariiqmo)
- Lakabka difaaca ah ee loogu talagalay muraayadaha caagga ah
- Agabyada muraayadaha indhaha

# Adeegyada goobta ka baxsan

**Adeegyada la daboolo:**

- Adeeg aad u baahan tahay marka aad si ku meel gaar ah uga baxdo aagga adeegga Qorshaha. la xidhiidh Adeegyada Xubinta wixii su'aalo ah ee ku saabsan adeegyada caymiska la daboolo ee ka baxsan aagga adeegga Qorshaha.
- Adeeg aad u baahan tahay kadib markaad ka guurto aagga adeega inta aad weli xubin ka tahay Qorshaha
- Adeegyada degdega ah ee loogu baahan yahay si degdega ah kuwaasoo u baahan daawaynta isla markaaba ah
- Daryeelka Dejinta Kadib

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

- Daryeelka degdega ah ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah marka aad ka baxsan tahay aagga adeega Qorshaha. (Ka wac Adeegyada Xubinta lambarka telefoonka ee ku qoran Qaybta 1-aad sida ugu dhakhsaha badan.)
- Adeegyada la daboolo ee aan laga heli karin goobta adeegga Qorshaha

**Qoraalada:**

Haddii aad u baahan tahay inaad isticmaasho farmashiye markaad ka baxsan tahay aagga adeegga Qorshaha, Adeegyada Xubnaha ka wac lambarka taleefanka ee ku qoran qaybta 1-aad marka hore ka hor intaadan bixin lacagta daawada laguu qoray ama daawada aad iibsaneyso qoraal dhakhtar la'aan, xitaa haddii dawadu ku jirto liiskayaga dawooyinka caynsan (LOCD) (liiska daawooyinka). Dib kuuguma soo celin karno lacagta haddii aad bixiso.

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Xaalad degdeg ah, dhakhso ah, ama adeegyo kale oo daryeel caafimaad ama alaabta laga keeno bixiyeyaasha ku teedsan meel ka baxsan Maraykanka (US). Ma sameyn doono lacag bixinta loogu talagalay daryeelka caafimaadka inaan siino bixiyaha ama hay'ad kasta oo ka baxsan U.S.

# Adeegyada ka baxsan shabakada

**Adeegyada la daboolo:**

- Adeegyada qaarkood ee aad u baahan tahay oo aadan ka heli karin adeeg bixiyaha ku jira shabakada Qorshaha
- Adeegyada degdega ah ee loogu baahan yahay si degdega ah kuwaasoo u baahan daawaynta isla markaaba ah
- Daryeelka Dejinta Kadib
- Fikrad labaad oo ku saabsan caafimaadka maskaxda iyo cillada isticmaalka maandooriyaha
- Adeegyada loo helo si furan
- Adeegyada uurka la xiriira ee la helay ee la xiriira ilmo iska soo xaaqida (kuma jiraan adeegyada la xiriira ilmo soo xaaqida)
- Adeeg caafimaad oo aan degdeg ahayn oo aad u baahan tahay marka aad si ku meel gaar ah uga maqan tahay shabakada ama goobta adeegga ee qorshaha aad ku leedahay ama lagu qoray, lagu taliyey, ama uu hadda bixiyo bixiye shabakad
- Adeegyada la xidhiidha baaritaanka, la socodka, iyo daawaynta cudur ama xaalad naadir ah

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

**Qoraalada:**

Mararka qaarkoodna xubnaha ayaa u baahan doona inay arkaan dhakhtar gaar ah oo takhasus badan leh. Waxaan la shaqayn doonaa dhakhtarkaaga si aan u hubino inaad hesho takhasuska caafimaadka ama adeegga markaad u baahan tahay, muddada aad u baahan tahay, xitaa haddii aanu bixiyuhu ahayn bixiye hadda ku jira shabakadda. Ma jirto wax kharash oo adiga kaaga baxaya markaan oggolaano daryeelka ama adeegga kahor intaadan u tagin bixiyaha.

# Daawooyinka uu dhakhtarka qoray
## (ee loogu talagalay xubnaha AAN haysan Medicare)

**Adeegyada la daboolo:**

- Daawooyinka dhakhtarku qoro
- Adeegyada maamulka daaweynta teraabiga (MTM)
- Daawooyinka aan dhakhtar qorin ee farmashiyaha Laga gato qaarkood (marka uu qoro bixiye daryeel caafimaad oo u qalma oo awood u leh inuu qoro)

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Daawooyinka loo isticmaalo daaweynta kacsi la'aanta ama cilladaha galmada
- Daawooyinka loo isticmaalo si kor loogu qaado dhalmada
- Daawooyinka loo isticmaalo ujeedooyinka isqurxinta oo ay ku jiraan daawooyinka lagu daaweeyo tima daadashada
- Daawooyinka uu ka saaray caymiska sharciga dowlada dhexe ama gobolka
- Daawooyinka tijaabada ah, daawooyinka baaritaanku ku socdo, ama daawooyinka aysan ansixinin Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka (FDA)
- Daawada xashiishka

**Qoraalada:**

Liiska daawooyinka la daboolo (LOCD) (liiska daawooyinka) waxa ku jira daawooyinka dhakhtar qoray ee ay bixiso UnitedHealthcare. Daawooyinka liiska ku jira waxaa doortay Qorshuhu iyadoo ay gacan ka geysteen koox dhakhaatiir ah iyo farmashtiyeyaal. Liisku waa waa khasab in uu la mid noqdaa liiska uu daboolo Kaalmada Caafimaadka (Medicaid) ee Khidmad-Ku-Hel-Adeegga. Liisaska sidoo kale waa in lagu daraa daawooyinka ku qoran Liiska Daawooyinka La Doorbiday ee Waaxda Adeegyada Aadanaha (PDL).

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

Marka lagu daro daawooyinka dhakhtarku qoro ee ay bixiso UnitedHealthcare, qaar ka mid ah daawooyinka farmashiyaha laga iibsado ayaa lagugu daboolay hoosta faa'iidooyinkaaga Caawimada Caafimaadka (Medicaid). Waxaad raadin kartaa daawooyinka qoro adigoo isticmaalaya qalabkeena raadinta onlaynka ah **myuhc.com/CommunityPlan**. Liiska daawooyinka la daboolo (liiska daawooyinka) ayaa sidoo kale la geliyay mareegta. Waxaa sidoo kale aad wici kartaa Adeegyada Xubinta oo aad waydiin kartaa nuqul qoraal ah oo liiska daawooyinka la daboolo (liiska daawooyin ka).

Haddii daawada aad hadda qaadanayso aysan hoos imaanayn qorshahaaga cusub, waxaa laga yaabaa inaad awooddo inaad hesho sahay kumeelgaar ah oo 90 maalmood ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, wac Adeegyada Xubinta.

Daawooyinka la daboolo qaarkood ayaa waxaa laga yaabaa inay leeyihiin shuruudo ama xaddidaadyo caymis oo dheeraad ah. Shuruudahan iyo xaddidaadan waxaa ka mid noqon kara:

- **Oggolaanshaha Hore (PA):** UnitedHealthcare waxay u baahan tahay adiga ama dhakhtarkaaga inaad heshaan oggolaanshaha hore ee ku aadan daawooyinka qaarkood. Tani waxay ka dhigan tahay inaad u baahan doonto inaad oggolaansho ka hesho UnitedHealthcare kahor intaadan buuxin daawooyinkaaga. Haddii aadan ansixin helin, UnitedHealthcare waxaa laga yaabaa in aysan daboolin daawada.
- **Xadadka tirada (QL):** Daawooyinka qaarkood, UnitedHealthcare waxay xaddidaysaa qaddarka daawada ay UnitedHealthcare dabooli doonto.
- **La door biday iyo kuwa aan la door bidin (P/NP):** Kooxaha daawooyinka qaarkood, UnitedHealthcare waxay kaaga baahan tahay inaad isku daydo daawooyinka la door biday kahor inta aadan bixinin daawooyinka aan la door bidin. Si loo helo daawo aan la doorbidin, dhakhtarkaaga ama bixiyahaaga daryeelka caafimaadka waa inay helaan oggolaansho hore.
- **Shuruudaha da'da:** Xaaladaha qaarkood, waxaa jira shuruudo da'da si aad iskugu daydo daawooyinka qaarkood. Oggolaanshaha hore ayaa loo baahanyahay iyadoo ku xiran da'daada iyo daawada gaarka ah ee laguu qoray.
- **Daawooyinka magaca-astaanta leh:** Nooca magaca astaanta daawada ee ay dabooli doona UnitedHealthcare kaliya marka:
  1. Dhakhtarkaagu wuxuu qoraal ahaan ku ogeysiiyaa UnitedHealthcare in nooca astaanta magaca daawadu ay tahay mid caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah; AMA
  2. UnitedHealthcare waxay door bidaysaa bixinta nooca magaca astaanta marka loo eego nooca guud ee daawada; AMA
  3. Sharciga Minnesota waxaa uu u baahan yahay bixinta nooca magaca astaanta daawada

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

Waxaad ogaan kartaa haddii dawadaada ay u baahan tahay oggolaan hore, ay leedahay xaddidaad tiro, ay leedahay xaalad la door biday ama aan la door bidin, ama ay leedahay shuruud da'da adoo la xiriiraaya Adeegyada Xubinta ama booqo mareegteena halkan **myuhc.com/CommunityPlan**. Xayiraada ama xaddidaadda daawada waa laga saari karaa haddii dhakhtarkaaga soo gudbiyo qoraal ama dukumeenti taageeraya codsiga. Waxaad sidoo kale heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaddidaadaha loo adeegsaday daawooyinka gaarka ah ee la daboolay adiga oo la xiriiraaya Adeegyada Xubinta ama booqanayo mareegteen **myuhc.com/CommunityPlan**.

Haddii UnitedHealthcare ay badesho shuruudaha oggolaanshaha hore, xadadka tirada, ama xaddidaadaha kale ee saaran daawada aad hadda qaadanayso, UnitedHealthcare ayaa ku soo ogeysiin doonta adiga iyo dhakhtarkaaga daawada kuu qoro wax kun saabsan isbadelka qoraha ugu yaraan 10 maalmood kahor inta uusan isbadelka noqonin mid hirgala.

Waxaan dabooli doonaa daawo aan caymis ku jirin haddii bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah uu na tuso in: 1) dawada sida caadiga ah loo daboolo ay adiga kuu keentay falcelin waxyeelo leh; 2) ay jirta sabab lagu rumaysan karo in dawada sida caadiga ah loo daboolo ay keeni karto falcelin waxyeelo leh; ama 3) dawada uu kuu qoray dhakhtarkaaga ay kaaga waxtar badan tahay marka loo eego dawada sida caadiga ah loo daboolo. Daawada waa inay ku jirtaa nooc ka mid daawooyinka la daboolo.

Waxaan dabooli doonaa daawada dhimirka, xitaa haddii aysan ku jirin liiskeena daawada, haddii daryeel bixiyahaaga uu caddeeyo inay tani adiga kuu fiican tahay. Ma jirto wax lacag canshuur ah oo lagu bixiyo daawooyinka xanuunka dhimirka. Xaaladaha qaarkood, waxaanu sidoo kale dabooli doonaa daawooyinka kale ee loo isticmaalo daawaynta jirrooyinka dhimirka ama qaska dareemaha xitaa haddii aysan daawadu ku jirin liiskeena daawooyinka la ansixiyay. Waxaan tani sameyn doonaa ilaa hal sano haddii bixiyahaaga uu caddeeyo in daawadu ay kuugu fiican tahay oo lagugu daaweeynaayay daawada muda 90 maalmood kahor: 1) waxaan ka saarnay daawada liiskeena daawada; ama 2) aad iska diiwaangalisay Qorshaha.

**Daawooyinka intooda badan, waxaad heli kartaa oo kaliya agab maalintii xadidan hal mar**

Daawooyinka intooda badan iyo agabyada qaarkood ayaa la heli karaa ilaa 34 maalmood. Daawooyinka qaarkood oo aad si joogto ah u qaadato iyagoo ku saleysan xaalad xanuun oo daba dheeraatay ama mid muda dheer ayaa la heli karaa sahayda ilaa 90-maalmood ah waxayna ku qoran yihiin halkan: **https://mn.gov/dhs/assets/90-day-supply-list_tcm1053-490928.pdf**.

Haddii UnitedHealthcare aysan daboolin daawadaada ama ay leedahay xayiraadyo ama xaddidaadyo daawadaada dul saaran oo aadan u maleyneynin inay ku shaqeyn doonto, waxaad sameyn kartaa mid ka mid ah waxyaabahan:

---

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

- Waxaad waydiin kartaa bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii ay jirto daawo kale oo caymis ah oo adiga kuu shaqayn doonta
- Adiga ama bixiyahaaga daryeelka caafimaadka waxaad waydiisan kartaan UnitedHealthcare inay samayso "ka reebitaano" oo ay daawada kugu daboosho ama meesha ka saarto xayiraadaha ama xadidyada. Haddii codsigaaga ka reebanaanshaha la ansixiyo, daawada waxaa lagu dabooli doonaa heerka ku habboon ee guud ama magaca astaanta ee ku habboon.

Daawadu waa inay ku jirtaa liiskayada daawooyinka la daboolo (liiska daawooyinka).

**Miyey jiraan wax xaddidaadyo ah oo caymiskayga dul saaran?**

Daawooyinka qaar ee liiskan ku jira waxaa laga yaabaa inay leeyihiin shuruudo dheeraad ah ama xadidaadyo caymis. Shuruudahan iyo xadidaada waxaa ka mid noqon kara kuwa soo socda:

- **Oggolaanshaha hore:** UnitedHealthcare Community Plan of Minnesota waxay ugu baahan tahay dhakhtarkaaga inuu helo oggolaanshaha hore ee ku aadan daawooyinka qaarkood. Tani waxay ka dhigan tahay inaad u baahan doonto inaad oggolaansho ka hesho UnitedHealthcare Community Plan of Minnesota kahor inta aadan buuxin rijeetadaada laguu qoray. Haddii aadan ansixin helin, UnitedHealthcare Community Plan of Minnesota waxaa laga yaabaa in aysan daboolin daawada.
- **Xadadka tirada:** Daawooyinka qaarkood, UnitedHealthcare Community Plan of Minnesota waxay xaddidaysaa qaddarka daawada an dabooli doono.
- **Shuruudaha da'da:** Daawooyinka qaarkood waxay leeyihiin shuruudaha da'da. Oggolaanshaha hore ayaa laga yaabaa in loo baahdo iyadoo ku xiran da'daada iyo daawada gaarka ah ee laguu qoray.

  Waxaad ogaan kartaa haddii dawadaada ay u baahan tahay oggolaan hore, ay leedahay xaddidaad tiro, ay leedahay xaalad la door biday ama aan la door bidin, ama ay leedahay shuruud da'da adiga oo eegaaya liiskaan daawooyinka la daboolay. Ka reebitaano ku aadan xayiraadaha ama xaddidaadda daawooyinka ayaa la samayn karaa haddii dhakhtarkaaga uu soo gudbiyo qoraal ama dukumeenti taageeraya codsiga. Ka tixraac Qaybta 7-aad: Adeegyada caynsan (Daawoyinka Dhakhtarku Qoro) ee ku jira Buug-gacmeedkaaga xubinta si aad u hesho macluumaad dheeri ah Waxaad sidoo kale heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaddidaadaha lagu dabaqay daawooyinka qaar ee caynsan adiga oo Adeegyada xubinta ka wacaaya **1-888-269-5410**, TTY **711** ama adiga oo booqanaayo mareegteena ah **myuhc.com/CommunityPlan**. Sidoo kale tixraac "Miyaan codsan karaa ka-reebitaanka xayiraadaha caymiska?"
- **Daawooyinka laga saaray:** Daawooyinka qaar ayaa laga saaray liiska daawooyinka la daboolo. Tani waxay ka dhigan tahay in aysan ahayn kuwa la daboolo. Daawooyinka laga saaray waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

---

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

- Daawooyinka loo isticmaalo daaweynta cillada galmada ama kacsi la'aanta
- Daawooyinka loo isticmaalo si kor loogu qaado dhalmada
- Daawooyinka loo isticmaalo ujeedooyinka isqurxinta, oo ay ku jiraan daawooyinka lagu daaweeyo tima daadashada
- Daawooyinka uu ka saaray caymiska sharciga dowlada dhexe ama gobolka
- Daawooyinka tijaabada ah, daawooyinka baaritaanka, ama daawooyinka aysan ansixinin Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka(FDA)
- Daawada xashiishka

Haddii shaqaalaha farmashiyaha ay kuu sheegaan in daawadu aaysan caymis lahayn oo ayna ku weydiiyaan inaad lacag bixiso, ka codso inay u wacaan dhakhtarkaaga. Dib kuuguma soo celin karno lacagta haddii aad bixiso. Waxaa laga yaabaa inay jirto daawo kale oo shaqayn doonta oo aan caymis ku lahayn hoosta Qorshaha. Haddii farmashiyaha uusan kuu wiciin dhakhtarkaaga, waad sameyn kartaa. Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Adeegyada Xubinta **1-888-269-5410**, TTY **711** wixii caawimaada ah.

Haddii shaqaalaha farmashigu ay kuu sheegaan in farmashigu uusan ku jirin shabakada, la xiriir Adeegyada xubinta.

Daawooyinka khaaska ah waxaa isticmaala dadka qaba cudurrada adag ama muda dheera. Daawooyinkani waxay inta badan u baahan yihiin la tacaalid gaar ah, qaybinta, ama la socodka farmashiistaha si gaar ah u tababaran. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan daawooyinka khaaska ah, ka wac Adeegyada Xubinta lambarka ku yaala dhabarka dambe ee kaarka Aqoonsiga (ID) Xubinimadaada.

Haddii laguu qoro daawo ku jirta Liiska Daawooyinka Khaaska ah ee UnitedHealthcare, dhakhtarkaaga waxaa uu u baahan doonaa inuu u soo diro rijeetadaas ku aadan daawada khaaska ah mid ka mid ah kuwan soo socda ee Farmashiyada Khaaska ah ee UnitedHealthcare (UnitedHealthcare's Specialty Pharmacies) ee hoos ku qoran.

Magaca Farmashiyaha Gaarka ah: Optum Specialty Pharmacy

Telefoonka iyo TTY: 1-855-427-4682, TTY 711

Fakiska: 1-877-342-4596

Saacadaha Shaqada: Waxaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, todobada maalmood ee isbuuca

Mareegta: **specialty.optumrx.com**

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

Specialty Pharmacy ayaa kula soo xiriiri doona si aad u hagaajisato koontadaada ka dib marka aad u oggolaatay dhakhtarkaaga inuu u soo diro warqada rijeetada Specialty Pharmacy oo aad oggolaansho ka hesho UnitedHealthcare Community Plan ee Minnesota.

# Daawooyinka dhakhtarka uu qoro

(ee loogu talagalay xubnaha haysta Medicare)

**Adeegyada la daboolo:**

- Qaar ka mid ah badeecooyinka aan farmashiyaha laga iibsan, qaar ka mid ah rijeetada qufaca iyo badeecooyinka qabow, iyo fiitamiinnada qaarkood kuwaas oo an lagu daboolin sida waafaqsan Barnaamijka Daawada Rijeetada ee Medicare (Medicare Qaybta D)

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Daawooyinka dhakhtar uu qoro kuwaas oo u qalma in lagu daboolo sida waafaqsan Barnaamijka Daawada Rijeetada ee Medicare (Medicare Qaybta D)
- Daawooyinka loo isticmaalo daaweynta kacsi la'aanta ama cilladaha galmada
- Daawooyinka loo isticmaalo si kor loogu qaado dhalmada
- Daawooyinka loo isticmaalo ujeedooyinka isqurxinta oo ay ku jiraan daawooyinka lagu daaweeyo tima daadashada
- Daawooyinka uu ka saaray caymiska sharciga dowlada dhexe ama gobolka
- Daawooyinka tijaabada ah, daawooyinka baaritaanka ku socda, ama daawooyinka aynan ansixinin ama aynan oggolaanin Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka (FDA)
- Daawada xashiishka

**Qoraalada:**

Medicare waxa ay kaa bixineysaa daawooyinka laguu qoray intooda badan iyada oo loo marayo Barnaamijka Daawooyinka Rijeetada ee Medicare (Medicare Qaybta D). **Waa inaad iska diiwaangelisaa qorshaha daawada rijeetada ee Medicare** si aad u hesho inta badan adeegyada daawada rijeetada laguu qoray. Waxaad ka heli doontaa adeegyada daawada rijeetada laguu qoray iyada oo loo maraayo qorshahaaga daawada rijeetada ee Medicare ee ma ahan iyadoo loo maraayo Qorshaheena. Waxa laga yaabaa inaad bixiso lacagta canshuurta ee ku aadan rijeetooyinka laguu qoray ee uu daboolo qorshahaaga daawada rijeetada ee Medicare.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Dhaqancelin

**Adeegyada la daboolo:**

- Daaweynada baxnaaninta si loogu soo celiyo shaqada: daaweynta jirka, daaweynta mihnadeed, daaweynta hadalka
- Aaladaha caawinta hadalka
- Adeegyada takhasuska maqalka oo ay ku jiraan tijaabooyinka maqalka

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Baxnaaninta xirfadeysan
- Naadiyada caafimaadka iyo qololka jirdhiska

# Adeegyada Bulshada ee ku Salaysan Dugsiga

## (loogu talagalay xubnaha da'doodu ay ka yar tahay 21 sano)

Adeegyada Bulshada ee ku Salaysan Dugsiga (SBCS) waa adeegyo caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah. MHCP ayaa bixin doona/soo celin doona lacagta marka carruurta dugsiga ku jirta uu adeegyada siiyo daryeel caafimaad bixiye xirfad u leh oo u shaqeeya ama qandaraas kula jira dugsiga. Dugsiyada dadweynaha ee Minnesota ayaa awood u yeelan doona inay soo dallacaan biilka adeegyadan.

SBCS waa ikhtiyaari. Ma ahan adeegyo cusub ama la ballaariyay, laakiin waa qayb ka mid ah xirmada dheefta Kaalmada Caafimaadka (MA). Dugsiyadu, markay bixinayaan adeegyadan waxay leeyihiin ikhtiyaar ah inay caawiyaan ardayda aan helin adeegyada la xiriira caafimaadka iyagoo u marayo Barnaamijka Waxbarashada Shakhsiyeed (IEP) ama Qorshaha Adeegga Qoyska ee Shakhsiyeed (IFSP) ama marka adeegyada aan lagu aqoonsan IEP.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

**Adeegyada la daboolo:**

- Adeegyada baxnaanada
- Cilmi-sayniska Maqalka
- Daaweynta shaqada
- Daaweynta jirka
- Barashada cudurrada luqadda hadalka
- Adeegyada caafimaadka maskaxda
- Adeegyada iyo taageerooyinka daaweynta carruurta
- Qiimaynta cudur-ogaanshaha
- Sharaxaada natiijooyinka
- Waxbarashada cilmi-nafsiga ee qoyska
- Qiimaynta/wax-kaqabadka habdhaqanka caafimaad
- Adeegyada caafimaadka maskaxda ee bukaan-socodka
- Baaritaanka maanka
- Baaritaanka caafimaadka dhimirka
- Daaweynta dhimirka ee loogu talagalay qallalaasaha

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Caawimaada daryeelka shakhsiga ah
- Farsamada gargaarida leh
- Kalkaalinta daryeelka guriga
- Gaadiidka gaarka ah
- IEP taasoo looga baahan yahay in lagu daboolo iyadoo loo maraayo dugsiga

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Adeegyada Cillada Isticmaalka Maandooriyaha (SUD)

**Adeegyada la daboolo:**

- Baarista/qiimaynta/habka ogaanshaha cudurka oo ay ku jiraan adeegyada iyo qiimaynaha dhammaystiran ee la oggolaaday ee Baarista Wax-ka-qabadka Kooban ee u Gudbinta Daawaynta (Screening Brief Intervention Referral to Treatment, SBIRT)
- Qiimaynada dhamaystiran
- Daaweynta bukaan-socodka
- Isbitaalka bukaan-jiifka
- Daaweynta aan isbitaalka ahayn ee deegaanka
- Daawaynta daawada bukaan-socodka lagu caawiyo
- Sun ka saarida (kaliya marka isbitaal-dhigista bukaan-jiifka ay caafimaad ahaan lagama maarmaan tahay sababtoo ah xaaladaha ka dhalan kara sida dhaawaca ama shilka ama dhibaatooyin caafimaad inta lagu jiro sun-saarida)
- Isku duwida daaweynta SUD
- Taageerada soo bogsashada ee dhalinyarta is le'eg
- Maareynta ka bixinta

**Adeegyada aan la daboolin:**

Lacag bixinta loogu talagalay qolka iyo guddiga lagu go'aamiyay in ay lagama maarmaan u tahay qiimeynta cillada isticmaalka maandooriyaha waa mas'uuliyadda Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

**Qoraalada:**

Ka tixraac Qaybta 1-aad wixii ah macluumaadka xiriirka ee Adeegyada Cillada Isticmaalka Maandooriyaha.

Xirfadle aqoonteeda leh oo ku jira shabakadda Qorshaha ayaa kaaga talobixin doona adeegyada xaaladda isticmaalka daroogada. Waxaad dooran kartaa heerka ugu sarreeya ee daryeelka uu soo jeediyay xirfadlaha aqoonta leh. Waxaad heli kartaa qiimeyn dheeraad ah haddii aadan aqbalin adeegyada lasoo jeediyay taladooda. Haddii aad oggolaato qiimaynta labaad, Waxaad heli kartaa adeegyada iyadoo loo eegayo halbeegyada cillada isticmaalka maandooriyaha iyo qiimaynta labaad. Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato. Ka tixraac Qaybta 13-aad ee Buug-gacmeedkan Xubinta.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Qalliin

**Adeegyada la daboolo:**

- Booqashooyinka xafiiska ama rugaha caafimaadka iyo qalliinka
- Ka saarida calaamadaha uu shaqsiga ku dhalashay
- Qalliin dib u dhis ah (tusaale ahaan, qalliinka unug ka saarida naaska ka dib, qalliinka ku aadan dhaawaca, xanuunka ama cudurrada kale; cilladaha dhalashada)
- Adeegyada suuxinta
- Gudniinka marka caafimaad ahaan lagama maarmaan u yahay
- Qaliinka jinsi-beddelka

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Qalliinka qurxinta ah

# Adeegyada fogaan-aragga caafimaadka

**Adeegyada la daboolo:**

Adeegyada fogaan-aragga caafimaadka waa adeegyada iyo hawlaha la-talinta ee lagama-maarmaanka ah kuwaasoo uu bixiyo daryeel-bixiye caafimaad oo haysta ruqsadda shaqada isagoo qofka xubinta ah kusoo wacaya qaabka telefoonka ama fiidyowga. Goobta xubinku waxay noqon kartaa gurigiisa. Daryeelka fogaan-aragga waxaa lagu qeexaa bixinta adeegyada daryeelka caafimaadka ama la-talinta iyadoo la adeegsanayo wakhtiga dhabta ah, isgaarsiinta maqalka iyo muuqaalka ah ee isdhexgalka labada dhinac ah. Ujeedada daryeelka fogaan-aragga waa in la bixiyo ama la taageero gaarsiinta daryeelka caafimaadka iyo fududaynta qiimaynta, ogaanshaha, la-talinta, waxbarashada daaweynta, iyo maaraynta daryeelka ee daryeelka caafimaadka bukaanka inta uu bukaanku joogo goobta uu asal ahaan ka soo jeedo iyo bixiyaha daryeelka caafimaad ee shatiyaysan uu joogo goob fog.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Dabagalka loo adeegsado telefoonka

Dabagalka loo adeegsado telefoonku waa adeegsiga tiknolojiyad lagu bixinayo adeeg daryeel iyo taageero loogu talo-galey xubnaha ay daran yihiin baahiyahooda caafimaad iyadoo goob fog lagala soo xiriirayo sida guriga xubinta gudihiisa. Dabagalka loo adeegsado telefoonka waxa lagula socon karaa astaamaha muhiimka ah ee xubinta iyadoo la adeegsanayo qalab ama aalad taasoo adeeg-bixiyaha u suurtagelinaysa inuu xogta qofka u helo qaab elektarooni ah si uu u muraajaceeyo xogta. Tusaalayaasha astaamaha muhiimka ah ee dabagalka lagu sameyn karo iyadoo uu daryeeluhu ku sugan yahayq goob fog waxaa ka mid ah heerka garaaca wadnaha, heerka cadaadiska dhiigga, iyo heerka sonkorta dhiigga.

**Adeegyada la daboolo:**

- Adeegyada la xiriira dabagalka ee loo adeegsado qaabka telefoonka kaasoo loogu talagaley xubnaha ay la soo dersaan xaalado aad khatar u ah, duruufo caafimaad oo daran sida shaqayn la'aanta wadnaha ee la xiriira caburka, adkaanshaha neefasashada ee sanbabka (COPD) ama cudurka sonkorta (marka ay caafimaad ahaan lama huraan noqoto ama marka la buuxiyo shuruudo gaar ah)

# Joojinta Tubaakada iyo Nikotiinka

Adeegyada joojinta tubaakada iyo nikotiinka waa la daboolaa marka uu bixiyo dhakhtarka daryeelka caafimaadka kaasoo shaqadiisu ay tahay waxbarashada iyo la-talinta joojinta tubaakada iyo nikotiinka.

Adeegyada joojinta tubaakada iyo nikotiinka waxaa ka mid noqon kara, balse kuma xaddidna kuwa soo socda:

- Dhakhaatiirta Caafimaadka Maskaxda
- Xirfadlayaasha Caafimaadka Maskaxda
- Takhasuslayaasha taageera caafimaadka dhimirka ee shatiyeysan
- La-taliyayaasha khamriga iyo daroogada
- Taageerada bogsashada/kabashada
- Takhasuslayaasha daawaynta tubaakada ee shatiyaysan
- Xirfadlayaasha Caafimaadka Bulsheed
- Dhakhaatiirta
- Kaaliyeyaasha dhakhaatiirta

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

- Kalkaaliyeyaasha xirfadda sare leh ee diiwaangashan; ama xirfadlayaasha kale ee shatiga haysta ama aan shatiga haysan ama xirfad-yaqaanada tababaran ee tubaakada iyo joojinta nikotiinka iyo adeegyada la-talinta

**Qoraalada:**

Adeegyada la-talinta telefoon ee joojinta tubaakada iyo nikotiinka waxaa si toos ah looga heli karaa daryeel-bixiyeyaasha horay loo xusay ama iyadoo loo marayo Khadka Joojinta (Quitline). Adeegyada khadka joojinta ayaa lagu bixin karaa wadaxiriir maqal ah oo keliya. Sidoo kale waxaad ka wici kartaa Adeegyada Xubinta (Member Services) lambarka telefoonka ee ku qoran Qeybta 1-aad si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

# Lacag-celinta Caafimaadka Dhaqameed

Kani waa macaash sannadle ah oo gaaraya ilaa $250 oo loogu talagalay xubin kasta si loo daboolo daryeelka caafimaadka dhaqameed.

**Adeegyada la daboolo:**

Lacag-celinta Caafimaadka Dhaqameed ayaa daboosha adeegyada la xiriira waxyaabahan soo socda:

- Daryeelka kahortagga ah ee caafimaadka dhaqameed
- Hawsha daaweynta ama sahminta ogaanshaha xaaladda
- Tusaalayaasha lacag-celinta waxaa ka mid ah baddeecadaha, adeegyada, agabka/iyo ama sahayda loo baahan yahay si loo dhammaystiro adeegyada caafimaadka dhaqameed

**Qoraalada:**

Xubintii hesha adeegyada ama agabka si toos ah looma siin karo lacag-celinta loogu talagalay adeegyada sababo la xiriira sharciga Medicaid awgood.

Yaa heli kara lacag-celinta?

- Bixiyaha adeegyada ama hay’adiisa ama hay’ad qabiileedkiisa
- Shaqsiga, hay’adda ama hay’ad qabiileedka agabka keentay

Daryeel-bixiyahaaga, hay’adda ama hay’ad qabiileedku waa inay buuxiyaan foomka lacag-celinta oo ay dib ugu soo diraan cinwaanka ku dul qoran foomka. Hubi in la soo raaciyo risiidyada W9 ama I9 ee bixiyahooda iyo rasiidyo kasta oo kale 90 maalmood gudahooda kadib taariikhda adeega.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

Foomka waxaa la soo geliyay mareegta **myuhc.com/CommunityPlan**. Sidoo kale waxaad wici kartaa Adeegyada Xubinta (Member Services) waxaadna codsan kartaa in foomka laguugu soo diro boostada ama iimaylka.

Haddii aad horay u bixisay lacagta adeegyada, la xiriir daryeel-bixiyahaaga, hay'adda, ama hay'ad qabiileedka si aad u hesho lacag-celinta marka codsiga wax laga qabto. Sidoo kale waxaad ka wici kartaa Adeegyada Xubinta (Member Services) lambarka telefoonka ee ku qoran Qeybta 1-aad si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

# Ku-tallaalidda

**Adeegyada la daboolo:**

- Talaalida xubnaha iyo unugyada, oo ay ku jiraan dhuuxa lafta, moyda isha, wadnaha, wadnaha-sambabada, mindhicirka, mindhicirka-beerka, keliyaha, beerka, sambabada, xameetida, xameetida-keliyaha, unugga uur ku jirta xameetida, unugyada asliga ah, iyo talaalyada kale
- Aaladda Caawinta Wadnaha Macmalka ah: Loo geliyo sidii buundada wadnaha tallaalan ama daawaynta teraabiyada loo baxo

**Qoraalada:**

Nooca tallaalka waa in uu noqdaa: 1) mid ku qoran Buugga Bixiyaha Adeegyada Dadweynaha ee Waaxda Minnesota; 2) nooc ay dabooshay Medicare; ama 3) mid ay ansixiyeen wakiilka dib-u-eegista caafimaadka ee gobolka.

Ku tallaalidda waa in lagu sameeyaa xarun talaalid ah taasoo ah xarun tallaalid oo ay Medicare ansixisay.

Ku talaalida unugyada asliga ah ama dhuuxa lafta waa inay buuxiyaan heerarka ay dejisay Aasaaska loogu talagalay Aqoonsiga Daawaynta Unugyada (XAQIIQADA).

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Gaadiidka u baxa iyo kana yimaado adeegyada caafimaadka

**Adeegyada la daboolo:**

- Ambalaasta (hawada ama dhulka waxaa ka mid ah gaadiidka biyaha)
- Gaadiidka darawalka tabarucaha ah
- Gaadiidka aan la caawin (taksi ama gaadiidka dad weynaha)
- Gaadiid la caawiyay
- Gaadiidka Lift-equipped-ka ama sagxada jiiftada ah
- Gaadiidka la ilaaliyo
- Gaadiidka bareelada fidsan

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Lacag celinta masaafada (tusaale ahaan, marka aad isticmaasho baabuurkaaga gaarga ah), cuntada, hoyga, iyo baakinka gaariga sidoo kale ay ku jiraan safarka ka baxsan gobolka. Adeegyadaan laguma daboolin hoosta Qorshaha laakiin waxaa laga yaabaa in la helo iyadoo loo maraayo gobolka deegaanka ama hay'adda qabiilka. Wac gobolkaaga ama wakaalada qabiilka wixii macluumaad dheeraad ah.

**Qoraalada:**

Haddii aad u baahan tahay gaadiidka ku geeya oona kaa soo celiyo adeegyada caafimaadka ee aan daboolno, wac lambarka telefoonka gaadiidka ee ku yaalo Qaybta 1-aad. Waxaan bixin doonaa habka ugu habboon uguna kharash wax ku oolsan ee gaadiidka.

Qorshaha uma baahna inuu ku siiyo gaadiid rugtaada daryeelka aasaasiga ah haddii ay ka badan tahay masaafada 30 mayl laga soo bilaabo gurigaaga ama haddii aad doorato bixiye khaas ah oo gurigaaga u jira masaafa dhan in ka badan 60 mayl. Wac lambarka telefoonka gaadiidka ee ku yaalo qaybta 1-aad haddii aadan lahayn rugta daryeelka aasaasiga ah oo laga heli karo meel masaafo 30 mayl u jirta gurigaaga ama haddii aadan lahayn bixiye khaas ah oo laga heli karo meel masaafo 60 mayl u jirta gurigaaga.

Raacitaanka sharciyadan fudud waxay kaa caawin doonan inaad hesho waditaan:

- Wac ugu yaraan laba maalmood oo shaqo kahor wakhtiga
- Wac 1-888-444-1519, TTY 711 si aad u qabanqaabsato waditaankaaga
- Haddii aad baajiso booqashadaada, wac 1-888-444-1519 si aad u baajiso waditaankaaga

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

- Hayso oo diyaar ka dhigo kaarkaaga aqoonsiga xubineed
- Waditaanka waxaa loogu talagalay sababo la oggolaaday oo kaliya
- Ogow cinwaanka bixiyahaaga daryeelka caafimaadka iyo taariikhda iyo wakhtiga ay tahay ballantaada

# Daryeelka dhakhsaha ah

**Adeegyada la daboolo:**

- Daryeelka degdega ah ee ka jira gudaha aagga adeega Qorshaha
- Daryeelka degdega ah ee ka baxsan goobta adeegga Qorshaha

**Adeegyada aan la daboolin:**

- Xaalad dhakhso ah, degdeg ah, ama adeegyo kale oo daryeel caafimaad oo la geeyo ama alaabta laga keeno bixiyeyaasha ku teedsan meel ka baxsan Maraykanka (US). Ma sameyn doono lacag bixinta loogu talagalay daryeelka caafimaadka inaan siino bixiyaha ama hay'ad kasta oo ka baxsan U.S.

**Qoraalada:**

Xaalad dhakhso ah ma ahan mid halis daran u ah sidii xaalad degdeg ah. Tan waa daryeelka loogu talagalay xaalad u baahan daaweyn degdeg ah si looga hortago in xaaladda sii xumaato. Daryeelka degdega ah ayaa la heli karaa 24 saacood maalintiiba.

Waxaad sidoo kale ka wici kartaa NurseLine lambarka 1-800-718-9066, TTY 711. NurseLine waxay taageero caafimaad bixiyaan 24 saacadood, maalin kasta, 7-da maalmood ee todobaadka.

Waa wax fiican in la ogaado goobta rugta daryeelka degdega ah ee shabakada ka tirsan ee kuugu dhow. Waxaad ka heli kartaa rugta daryeelka degdega ah halkan: qalabka raadinta ee Find-A-Doctor **myuhc.com/CommunityPlan**. Ama waxaad wici kartaa Member Services.

Ka wac Adeegyada Xubinta lambarka telefoonka ee ku qoran Qaybta 1-aad sida ugu dhakhsaha badan marka aad hesho daryeel degdeg ah oo ka baxsan aagga adeegga Qorshaha.

* Waxaa uu u baahan yahay ama laga yaabaa inuu u baahdo oggolaansho hore.

# Qaybta 8-aad: Adeegyada aan annagu daboolin

Haddii aad hesho adeegyo ama agabyo aan caymis lahayn, waxaa laga yaabaa inaad adigu qudhaada iska bixiso. Qaar ka mid ah adeegyada iyo agabyada "aan la daboolin" waxay ku qoran yihiin qayb kasta oo ka mid Qaybta 7-aad. Kuwa soo socdaa waa liiska adeegyada iyo agabyada kale ee aan lagu daboolin hoosta qorshaha. Kani ma ahan liis dhamaystiran. Wac Adeegyada Xubinta si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

- Baaritaanka Maydka (baaritaano lagu sameeyo jirka maydadka dadka dhintay si loo ogaado sababta dhimashada)
- Habraacyada qurxinta ama daaweynta
- Xaalad degdeg ah, dhakhso ah, ama adeegyo kale oo daryeel caafimaad oo la geeyo ama alaabta laga keeno bixiyeyaasha ku teedsan meel ka baxsan Maraykanka (US). Ma sameyn doono lacag bixinta loogu talagalay daryeelka caafimaadka inaan siino bixiyaha ama hay'ad kasta oo ka baxsan U.S.
- Adeegyada tijaabada ama baaritaanka
- Adeegyada daryeelka caafimaadka ama agabyada kuwaasoo caafimaad ahaan an loo baahneyn
- Daawooyinka homeopathic iyo dhirta
- Adeegyada shilalka ah ee bukaan-jiifka iyo hoyga kalkaalinta, sida Muqaal-baahiyaha, telefoonka, timo-jaraha iyo adeegyada qurxinta, iyo adeegyada martida
- Agabyada aan loo isticmaalin in lagu daaweeyo xaalad caafimaad



**Su'aalo ma qabtaa?** Booqo **myuhc.com/CommunityPlan**, ama ka wac Adeegyada Xubinta lambarka **1-888-269-5410**, TTY **711**, ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso. Wicitaankan waa bilaash.

# Qaybta 9-aad: Adeegyada aan lagu daboolin Qorshaha laakiin laga yaabo in la daboolo iyadoo loo marayo ilo kale

Adeegyadaan ma daboolo Qorshaha, laakiin waxaa laga yaabaa inay daboolaan ilo kale, sida gobolka, degmada, dawladda dhexe, qabiilka, ama qorshaha daawada dhakhtarku qoro ee Medicare. Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan adeegyadaan, wac Taageerada Macaamiisha Daryeelka Caafimaadka ee DHS (HCCS) 651-297-3862 ama 800-657-3672 ama 711 (TTY), ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso. Wicitaankan waa bilaash.

- Adeegyada ilmo soo xaaqida
- Maareynta kiiska ee loogu talagalay xubnaha leh naafanimada korriinka
- Maareynta kiisaska ku wajahan xanaanada carruurta
- Adeegyada baxnaaninta iyo tababarka maalinta
- Maareynta kiisaska fayraska difaac la'aanta jirka aadanaha (human immunodeficiency virus, HIV)
- Kalkaalinta Daryeelka Guriga (HCN): Si aad wax badan uga ogaato adeegyada HCN, la xiriir hay'ada daryeelka guriga si aad u qiimeyso. Si aad u hesho wakaalada daryeelka guriga oo ku taala aagaaga, wac lambarka Nambarka HCCS ee hore loo xusay.
- Xarunta daryeelka dhexdhexaadka ee loogu talagalay xubnaha qaba naafanimada koriinka (ICF/DD)
- Adeegyada tababarka shaqada iyo waxbarashada
- Adeegyada lagama maarmaanka u ah caafimaadka ee lagu cayimay Qorshaha Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) ama Qorshaha Adeegga Qoyska ee Shakhsi ahaaneed (IFSP) ee ay bixiso degmo dugsiyeedka oo lagu daboolo qorshaha Caawimaada Caafimaadka (Medicaid)
- Lacag celinta masaafada (tusaale ahaan, marka aad isticmaasho baabuurkaaga gaarga ah), cuntada, hoyga, iyo baakinka gaariga. La xiriir gobolkaaga wixii macluumaad dheeraad ah.
- U guurista Guriga Adeegyada Minnesota

- Joogitaanka goob kalkaalin oo uusan Qorshahayagu masuul ka ahayn. Ka tixraac “Adeegyada Guriga Kalkaalinta” ee qaybta 7aad.
- Caawimaada Daryeelka Shakhsiga ah (PCA). Adeegyada Koowaad ee Bulshada iyo Taageerada (CFSS) ayaa bedeli doona adeegyada PCA-ga, marka dowladda dhexe ansixiso. Kala xiriir gobolkaaga aad deggan tahay qaadashada ku aadan adeegyada daryeelka muddada-dheer iyo taageerada si aad wax badan uga ogaato adeegyada PCA-ga iyo si aad u qabanqaabsato qiimayn.
- Xiritaanka ka dib Isku duwida Adeegyada Ku salaysan Bulshada
- Daawooyinka dhakhtarku qoro ee lagu daboolo Barnaamijka Daawooyinka Dhakhtarku Qoro ee Medicare (Medicare Part D). Waa inaad ka diiwaangashan tahay qorshaha daawada dhakhtarku qoro ee Medicare si aad u hesho adeegyadaan.
- Isku duwida adeegga dib-u-meelaynta
- Qolka iyo guddiga la xiriira Adeegyada Daaweynta Deganaanshaha degdega ah (IRTS)
- Qolka iyo guddiga la xiriira adeegyada daaweynta ee ka jira xarumaha daaweynta caafimaadka maskaxda ee carruurta la deggan yahay. Qolka iyo guddiga waxa laga yaabaa inuu daboolo gobolkaaga. Wac gobolkaaga si aad u hesho wixii macluumaad ah.
- Adeegyada ay bixiyaan hay'adaha dawladda dhexe
- Adeegyada ay bixiso xarunta daaweynta ee dowlad goboleeda, xarun daryeel muda dheer oo ay dawladda leedahay marka laga reebo haddii aan anagu ansixino ama adeega ay ku amarto maxkamad marka la eego xaalado lagu qeexay sharciga
- Daaweynta lagu helo xarumaha Xeerka 36-aad ee aan ruqsada u haysan inay bixiyaan Adeegyada Daaweynta Deganaanshaha degdega ah (IRTS)
- Ka dhaafitaanadda Guriga iyo Adeegyada Ku Salaysan Bulshada

# Qaybta 10-aad: Goorta la wacaayo shaqaalaha gobolkaaga

Wac shaqaalaha gobolkaaga si aad uga warbgeliso isbadeladan:

- Isbadelka Magaca
- Isbadelada cinwaanka oo ay ku jiraan ka guurista Minnesota
- Taariikhda bilawga uurka iyo dhammaanshaha
- Ku soo darsamida ama ka bixida xubin qoyska ka mid ah
- Kaarka aqoonsiga (ID) Barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Minnesota ee lumay ama la xaday
- Caymiska cusub ama taariikhda bilawga iyo dhamaadka Medicare
- Isbadelka dakhliga oo ay ku jiraan isbeddellada shaqada

# Qaybta 11-aad: Isticmaalida Qorshaha caymiska ee caymiye kale

Haddii aad leedahay caymis kale, noo sheeg inta aadan daryeel helin. Waanu ku soo ogaysiin doonaa haddii ay tahay inaad isticmaasho bixiyayaasha ku jira shabakada Qorshaha, ama bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee uu isticmaalo caymiskaaga kale. Waxaan iskugu duwi doonaa lacag bixinteena ayaga. Tani waxaa loo yaqaana "isku-duwida macaashyada." Tusaalooyinka caymiska kale waxaa ka mid ah:

- Caymiska baabuurta oo aan khaladka loo tixgelineyn
- Magdhawga shaqaalaha
- Medicare
- Tricare
- Caymiska Ururka Dayactirka Caafimaadka Kale (HMO)
- Caymiska ganacsiyada kale

Marka aad xubin ka noqoto Qorshaha, waxaad oggolaatay inaad:

- Noo fasaxday inaan biilasha ku soo dirno caymiskaaga kale
- Noo fasaxday inaan macluumaadka ka helno caymiskaaga kale
- Noo fasaxday inaan lacag ka helno caymiskaaga kale badelkii lacagta adiga laguu soo diri lahaa
- Naga caawiso inaan lacag ka helno caymiskaaga kale

Haddii caymiskaaga kale isbadelo, wac shaqaalaha gobolkaaga.



**Su'aalo ma qabtaa?** Booqo **myuhc.com/CommunityPlan**, ama ka wac Adeegyada Xubinta lambarka **1-888-269-5410**, TTY **711**, ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso. Wicitaankan waa bilaash.

# Qaybta 12-aad: Kharash-soo-ceshiga ama qaansheegashada kale

Waxaa laga yaabaa inaad haysato ilo kale oo lacag bixineed oo ku aadan daryeelkaaga caafimaadka. Waxaa laga yaabaa inay ka socdaan qof kale, koox, shirkad caymis, ama urur kale. Sharciyada dowladda dhexe iyo kuwa gobolka ayaa bixiya in macaashyada Caawimaada Caafimaadka (Medicaid) ay bixiso kaliya haddii aysan jirin il kale oo lacag bixineed. Haddii aad hayso sheegasho ka dhan ah ilo kale oo ku aadan dhaawacyada, waxaanu samayn doonaa sheegasha gaar ah oo ku aadan daryeelka caafimaadka oo aan caymis kuugu yeelnay. Sharciga waxaa uu kaa doonayaa inaad naga caawiso sameynta tan. Sheegasha waxaa laga yaabaa in laga soo celiyo il kasta oo laga yaabo inay mas'uul ka tahay bixinta daryeelka caafimaadka ee aan kuu daboolnay. Qadarta qaansheegashada kama badnaan doonto inta sharciga dawladda dhexe iyo gobolka oggol yihiin.

# Qaybta 13-aad: Hannaanka Cabashada, Racfaanka iyo Racfaanka Gobolka (Dacwad-dhageysiga Cadaaladda ah ee gobolka)

Qaybtani waxa ay kuu sheegaysaa wax ku saabsan nidaamka cabashada iyo racfaanka oo ay ku jiraan ogaysiisyada, cabashooyinka (ashtakooyinka), racfaanada qorshaha caafimaadka, iyo Racfaanka Gobolka (Dhagaysiga Caddaaladda ah ee lala yeesho gobolka). Waxaa uu kuu sheegayaa sida iyo goorta la isticmaalayo nidaamka cabashada iyo racfaanka haddii aadan ku qanacsanayn daryeelkaaga caafimaad ama adeeggaaga, aad nagu khilaafsan tahay go'aan aanu gaarnay. Waxay kuu sheegaysaa wax ku saabsan xuquuqdaada marka aad isticmaalayso nidaamka cabashada iyo racfaanka.

ka wac Adeegyada Xubinta lambarka telefonka ee ku qoran Qaybta 1-aad haddii aad qabto su'aalo ama aad u baahantahay in lagaa caawiyo xaraysashada cabasho ama racfaan.

## Shuruudaha nidaamka cabashada iyo racfaanka ee ay tahay in la ogaado

**Cabashada** waa marka aadan ku qanacsanayn adeegyada aad heshay oo waxaa ku jiri kara mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Tayada daryeelka ama adeegyada la bixiyo
- Ku guuldareysiga in la xushmeeyo xuquuqdaada
- Edabdarada bixiyaha ama shaqaalaha qorshaha caafimaadka
- Dib u dhigista daaweynta ku haboon ama gudbinta
- Ugu falcelin la'aanta muddada loo baahan yahay gudaheeda ee loogu talagalay cabashooyinka iyo racfaanada

**Diidmada, joojinta, ama yareynta (DTR) (ogaysiiska tallaabada)** waa foom ama warqad aan kuu soo dirno si aan kuugu sheegno go'aanka aan ku gaarnay oo ku saabsan codsi ku aadan adeeg, qaansheegashada lacag bixinta, ama codsi kasta oo kale. Ogeysiiska waxaa uu kuu sheegi doona sida racfaanka loogu xareysto qorshaha caafimaadka ama aad u codsan karto Racfaan Goboleed (Dacwad-dhageysiga Cadaaladda ah ee gobolka) haddii aadan ku raacsanayn go'aankeena.

**Racfaan ka qaadashada qorshaha caafimaadka** waa codsigaaga ku aadan inaan dib-u-eegis ku sameeyno go'aanka aanu gaarnay. Waxaad codsan kartaa racfaan haddii aadan noogu raacsanayn go'aankeena mid ka mid ah **tallaabooyinka soo socda** (go'aamada):

- Diidmada ama oggolaanshaha xaddidan ee nooca ama heerka adeegga uu codsaday bixiyahaaga
- Yareynta, hakinta, ama joojinta adeeg kaasoo hore loo ansixiyay
- Diidmada dhammaan ama qayb ka mid ah lacag bixinta loogu talagalay adeegga
- Aan lagu bixinin adeegyada (oo ay ku jiraan gaadiidka) qadar waqti macquul ah gudihiisa
- Diidmada codsiga xubinta si ay u helaan adeegyada ka baxsan shabakada oo ku aadan xubnaha ku nool aagga miyiga kaasoo leh hal qorshe caafimaad oo kaliya
- Aan ku bixinin jawaab ku aadan cabashadaada ama racfaanka jadwalka wakhtiyada ee loo baahan yahay gudihiisa
- Diidmada lagu sameeyay codsigaaga si aad uga doodo isla xisaabtan maaliyadeed oo ay ku jiraan lacagaha canshuurta iyo kharash wadaagista kale

Bixiyahaaga waxaa laga yaabaa inuu magacaaga racfaan ku qaato asiga oo wata oggolaanshahaaga qoran. Bixiyahaaga daaweynta ayaa laga yaabaa inuu Racfaan ka qaato go'aanka Oggolaanshaha Hore ee Adeegga asiga oo an haysanin oggolaanshahaaga.

**Racfaanka Gobolka (Dacwad-dhageysiga Cadaaladda ah ee gobolka)** waa codsigaaga ah in gobolku dib u eego go'aan aan gaarnay. Waa inaad racfaan u qaadataa UnitedHealthcare kahor inta aadan codsan Racfaanka Gobolka. Haddii aan qaadano in ka badan 30 maalmood si aan go'aan uga gaarno racfaankaaga ma haysatid muddo kordhin ama maanu kordhin, uma baahnid inaad sugto go'aankeena si aad u codsato Racfaanka Gobolka. Waxaad racfaan ka qaadan kartaa mid ka mid ah tallaabooyinkaan (go'aamada):

- Diidmada ama oggolaanshaha xaddidan ee nooca ama heerka adeegga
- Yareynta, hakinta, ama joojinta adeeg kaasoo hore loo ansixiyay
- Diidmada dhammaan ama qayb ka mid ah lacag-bixinta loogu talagalay adeegga
- Bixin la'aanta adeegyada qadar waqti macquul ah
- Ku fashilmitaankeena inaan ka falcelino inta lagu guda jiro waqtiyada loo baahanyahay oggolaanshaha hore iyo racfaanada
- Isla xisaabtanka maaliyadeed oo ay ku jirto lacagta canshuurta ama kharashyada kale ee la wadaago
- Tallaabo kasta oo kale

# Jadwalka waqtiyada muhiimka ah ee loogu talagalay racfaanada

**Waa inaad raacdo jadwalka waqtiyada ee loogu talagalay in lagu xaraysto racfaanada qorshaha caafimaadka, iyo Racfaanada Gobolka (Dhageysiga Cadaaladda ah ee lala yeesho gobolka). Haddii aad ka gudubto wakhtiga laguu oggolyahay, waxaa laga yaabaa in aanan dib-u-eegis ku samaynin racfaankaaga gobolkana ma aqbali doono codsigaaga ku aadan racfaanka.**

Waa inaad racfaan noogu soo dirtaa **60 maalmood gudahooda** laga bilaabo taariikhda DTR (ogaysiiska tallaabada). Waxaan ku siin karnaa waqti dheeraad ah haddii aad hayso sabab wanaagsan oo ku aadan waxaa aad ugu baaqatay wakhtiga kama dambaysta ah. Waa inaad noo soo xaraysataa racfaan **kahor** inta aadan codsan Racfaanka Gobolka. Haddii aan qaadano in ka badan 30 maalmood si aan go'aan uga gaarno racfaanka qorshahaaga ma haysatid muddo kordhin ama maanu kordhin, waxaad codsan kartaa Racfaanka Gobolka adiga oo aan inaga na sugin.

Waa inaad ku codsataa Racfaan Goboleed **120 maalmood gudahooda** laga bilaabo go'aanka racfaanka.

Haddii aan joojineyno ama yareyneyno adeegga, waxaad sii wadi kartaa helitaanka adeegga haddii aad ku xareysato racfaanka qorshaha caafimaadka **10 maalmood gudahooda** laga bilaabo taariikhda ogeysiiska, ama kahor inta aan adeegga la joojin ama la yareynin, hadba tii u dambeysay. **Waa in aad codsataa inaad sii wadato helista adeegga marka aad racfaan ka gudbisaneyso.** Adeegga waa uu sii socon karaa ilaa go'aanka racfaanka laga gaarayo. Haddii aad ku guuldareysato racfaanka, waxaa laga yaabaa in lagugu dallaco adeegyadaan, laakiin waa kaliya haddii siyaasada gobolka ay kuu oggolaato.

Haddii aad ku guuldareysato racfaanka, waxaad sii wadi kartaa helitaanka adeegga inta lagu jiro Racfaanka Gobolka haddii aad ku codsato Racfaanka Gobolka 10 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda go'aanka racfaanka qorshahaaga.

Barnaamijka qaataha la xaddiday, xubinta hesha ogeysiiska xaddidaada waxay annaga naga soo gudbisan karaan racfaan. Waa inaad racfaan ku xaraysataa **60 maalmood gudahooda** laga bilaabo taariikhda ku qoran ogaysiiskan. Waa inaad racfaan qaadataa 30 maalmood gudahooda si aad uga hortagto xaddidaada in la fuliyo inta lagu gudajiro racfaankaaga. Waxaad codsan kartaa Racfaan Goboleed kadib marka aad hesho go'aankeena.

## Si aad noola xaraysato racfaan af ama qoraal ah:

Waxaad racfaan ku qaadan kartaa telefoon, qoraal, fakis, ama fool-ka-fool ahaan. Waxaad ka heli kartaa Macluumaadka xiriirka iyo cinwaanka waxaa qaybta 1-aad ee ku hoos qoran “Racfaanada iyo Cabashooyinka.”

Waxaad soo gudbin kartaa dukumiinti kasta oo waxaad macluumaad ku bixin kartaa fool-ka-fool, taleefan, ama qoraal. Diiwaanadaada waxaa loo xafidi doonaa si asturan sida sharcigu qabo. Waxaad naga heli doontaa warqad cadeyneysa inaan helnay codsigaaga racfaanka.

Codsigaaga racfaanka waa inay ku jiraan:

- Magacaaga
- Taariikhda dhalashada
- Cinwaanka
- Lambarka xubinimada
- Lambarka telefoonka
- Sababaha racfaan-qaadashada

Waxaad sidoo kale ku dari kartaa macluumaad kasta oo aad rabto in aan dib u eegno, sida diiwaanada caafimaadka, waraaqaha dhakhtarka, ama macluumaad kale oo sharaxaya sababta aad ugu baahan tahay shayga ama adeegga. Wac dhakhtarkaaga haddii aad u baahan tahay macluumaadkan. Waxaan kugula talineynaa inaad nuqul ka haysato wax kasta oo aad noo soo dirto.

Codsiyada degdega ah ayaa loogu talagalay adeegyada si degdegga ah loogu baahanyahay. Haddii aan isku waafaqno inay degdeg tahay, waxaan kugu siin doonaa go'aan 72 saacadood gudahooda. Waxaan isku dayi doonaa inaan kugu wacno go'aanka kahor inta aanan go'aanka qoraal ahaan u dirin.

Waxaa laga yaabaa inaan qaadano ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah haddii aan u baahanahay macluumaad dheeraad ah oo ay dantaada wanaag ugu jirto ama haddii adiga ama adeeg bixiyahaaga aad codsataan waqti dheeraad ah. Waan kuu sheegi doonaa sababta aan u qaadaneyno waqtiga dheeriga ah.

Haddii racfaankaaga uusan ahayn mid degdeg ah, waxaan kuugu sheegi doonaa 10 maalmood gudahood inaan iyada helnay. Waxaan kuugu siin doonaa 30 maalmood gudahooda go'aan qoraal ah. Waxaa laga yaabaa inaan qaadano ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah haddii aan u baahanahay macluumaad dheeraad ah waxayna noqon doontaa mid ay ku jirto dantaada ugu fiican ama haddii aad codsato waqti dheeri ah. Waxaan kuu sheegi doonaa inaan qaadaneyno waqti dheeraad ah iyo sababta aan u qaadaneyno.

Qofka go'aan ka gaarayaa ma noqon doono isla qofka ku lug lahaa dib-u-eegistii ama go'aan qaadashadii hore.

Haddii aad go'aansanayno racfaan ku saabsan adeeg kaasoo la diiday sababtoo ah ma ahayn mid caafimaad ahaan muhiim ah, go'aanka waxaa gaari doona xirfadle daryeel caafimaad oo leh khibrad caafimaad oo ku habboon daaweynta xaaladaada ama cudurkaaga.

Adiga ama wakiilkaaga waxaad ku soo bandhigi kartaan macluumaadkaaga si fool-ka-fool ah, teleefoon, ama qoraal ahaan.

Haddii aad racfaan qaadato, waxaanu kuu soo diri doonaa adiga ama wakiilkaaga faylka kiiska markaad codsataan, oo ay ku jiraan diiwaanada caafimaadka iyo dukumeentiyada kale iyo diiwaanada aan tixgelinay inta lagu guda jiray geedi-socodka racfaanka.

## Si aad u xarayso Racfaan Goboleed (Dacwad-dhageysiga Cadaaladda ah ee gobolka) Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota:

Waa inaad nala xaraysataa racfaan **kahor** inta aadan codsan Racfaan Goboleed. Waa inaad ku codsataa Racfaan Dawladeed **120 maalmood gudahooda** laga bilaabo taariikhda go'aanka racfaankayaga (xalka).

Racfaankaaga ku socda gobolka waa inuu ahaadaa mid qoraal ahaan ah. Waxaad u qori kartaa Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota si aad u codsato Racfaanka Gobolka.

| | |
|---|---|
| U qor: | Xafiiska Racfaanada Waaxda Adeegyada<br>Aadanaha ee Minnesota<br>P.O. Box 64941<br>St. Paul, MN 55164-0941 |
| Onlayn ugu xarayso halkan: | **https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-0033-ENG** |
| Ama fakis ugu dir: | 651-431-7523 |

U sheeg gobolka sababta aad u diidan tahay go'aanka aanu gaarnay. Waxaad ka codsan kartaa saaxiib, qaraabo, u doode, bixiye, ama qareen inuu ku caawiyo. Bixiyahaaga waa inuu haystaa oggolaansho qoraal ah si uu kuugu codsado Racfaan Dawladeed.

Garsooraha adeegga aadanaha ee ka socda Xafiiska Racfaanka Gobolka ayaa qaban doona dhageysi. Waxaad codsan kartaa inaad kaga soo qaybgasho dhageysiga telefoon, muuqaal, ama fool-ka-fool ahaan. Waxaad ka codsan kartaa bixiyeyaashaada ama kuwa kale inay marqaati ku siiyaan. Waxaad keeni kartaa dukumeenti si uu garsooraha u tixgeliyo.

Geedi-socodka waxaa uu qaadan karaa 90 maalmood. Haddii dhageysigaaga uu ku saabsan yahay adeeg si degdeg ah loogu baahan yahay, u sheeg Garsooraha ama Qofka Dhexdhexaadiyaha ah markii aad wacayso ama u qorayso waraaq iyaga.

Haddii dhageysigaaga uu ku saabsan yahay adeeg la diiday maadaama uusan ahayn mid caafimaad ahaan lagama maarmaan ah, waxaad codsan kartaa inuu dib-u-eego khabiir caafimaad. Khabiirka caafimaadka wuu ka madaxbannaan yahay gobolka iyo UnitedHealthcare labadaba. Gobolka ayaa bixinaya kharashka dib-u-eegistan. Ma jiraan wax kharash ah oo ay kugu fadhido.

Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka garsoorayaasha adeegga aadanaha, waxaad ka codsan kartaa gobolka inay dib-u-eegaan go'aankooda. U dir codsi qoraal ah oo ku aadan dib-u-eegista uu sameeyso Xafiiska Racfaanka Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota 30 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda go'aanka. Macluumaadka xiriirka waxa ay ku qornaayeen waagii hore qaybtan.

Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka gobolada, waxaad rafcaan u qaadan kartaa maxkamadda degmada ee ku taalo gobolkaaga.

# Cabashooyinka (ashtakooyinka)

Waxaad nala xaraysan kartaa cabasho wakhti kasta. Ma jiro wakhti go'an oo cabasha aad nala xaraysan karto. Si aad noola xaraysato cabasho afka ah: Kal wac Adeegyada Xubinta **1-888-269-5410**, TTY **711** oo noo sheeg wax ku saabsan dhibaato.

Waxaan go'aan kugu siin doonaa 10 maalmood gudahooda. Waxaa laga yaabaa inaan qaadano ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah si aan go’aan u gaarno haddii aan u baahanahay macluumaad dheeraad ah oo ay dantaada ku jirto ama haddii adiga ama adeeg bixiyahaaga aad codsataan waqti dheeraad ah. Waxaan kuu sheegi doonaa 10 maalmood gudahood inaan qaadaneyno waqti dheeraad ah iyo sababaha aan u qaadaneyno.

Haddii cabashadaada ay ku saabsan tahay diidmadeena racfaanka degdegga ah ama cabashada ku saabsan arrimaha daryeelka caafimaadka degdegga ah, waxaan go'aan kugu siin doonaa 72 saacadood gudahooda.

## Si aad noola xaraysato cabasho qoraal ah:

Noo soo dir warqad ku saabsan cabashadaada. U qor cinwaanka ku qoran Qaybta 1-aad ee ku taalo hoosta “Racfaanada iyo cabashooyinka.”

Waxaan kaa caawin karnaa inaad cabashadaada qoraal ahaan u gudbiso. Ka wac Adeegyada Xubinta **1-888-269-5410**, TTY **711** haddii aad u baahantahay caawimaad.

Waxaan kuugu soo sheegi doonaa inaan helnay cabashadaada 10 maalmood gudahood.

Waxaan kuugu siin doonaa 30 maalmood gudahooda go'aan qoraal ah. Waxaa laga yaabaa inaan qaadano ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah haddii aan u baahanahay macluumaad dheeraad ah waxayna noqon doontaa mid ay ku jirto dantaada ugu fiican. Waxaan kuu sheegi doonaa inaan qaadaneyno waqti dheeraad ah iyo sababta aan u qaadaneyno.

Haddii aadan ku raacsanayn go'aankeena, waxaad cabashadaada u gudbin kartaa Waaxda Caafimaadka ee Minnesota.

| | |
|---|---|
| U qor: | Waaxda Caafimaadka ee Minnesota<br>Qaybta Kormeerka u Hoggaansanaanta Siyaasada iyo Nidaamyada Caafimaadka<br>Nidaamyada Daryeelka ee La Maareeyo<br>P.O Box 64882<br>St. Paul, MN 55164-0882 |
| Wac: | 1-800-657-3916 (Wicitaankan waa bilaash.)<br>ama 651-201-5100, TTY 711, ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso |
| Booqo: | **https://www.health.state.mn.us/facilities/insurance/clearinghouse/complaints.html** |

Waxaad sidoo kale wici kartaa Qofka Dhexdhexaadiyaha ah ee loogu talagalay Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka Dadweynaha ee la Maareeyay si aad caawimaad u hesho. Macluumaadka xiriirka waxa ay ku taxan yihiin qaybtan hoosteeda.

## Macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan xuquuqdaada marka aad buuxinayso cabasho, racfaan, ama aad codsanayso Racfaanka Gobolka (Dacwad-dhageysiga Cadaaladda ah ee gobolka):

Haddii aad go'aansato inaad xarayso cabasho ama racfaan, ama aad codsato Racfaan Goboleed, ma saamaynayso u qalmitaankaaga ku aadan adeegyada caafimaadka. Sidoo kale saameyn kuma yeelan doonto isku diiwaangelintaada qorshaheena caafimaadka.

Waxaad heli kartaa qaraabo, saaxiib, u doode, bixiye, ama qareen inuu kaa caawiyo cabashadaada, racfaanka, ama Racfaanka Gobolka.

Ma jiro wax kharash ah oo ay kuugu fadhido xaraysashada racfaanka qorshaha caafimaadka, cabashada, ama Racfaanka Gobolka. Waxaa laga yaabaa in aan bixino kharashaadka qaarkood sida gaadiidka, daryeelka ilmaha, sawir qaadista, iwm.

Haddii aad codsato diiwaanadaada caafimaadka ama dukumeentiyo kale oo aan u adeegsanay inaan ku gaarno go'aankeena ama aaad dooneyso nuqulo, annaga ama bixiyahaaga waa inaanu kuugu siinaa si lacag la'aan. Haddii aad codsato, waa inaan ku siina nuqul ka mid habraacyada aan u isticmaalnay si aan u gaarno go'aankeena, iyadoo wax kharash ah aanu kugu fadhin. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad ka dhigto codsigaaga qoraal ahaan.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo cabashadaada, racfaankaaga, ama Racfaanka Gobolka, waxaad wici kartaa ama aad warqad u qori kartaa Qofka Dhexdhexaadiyaha ah ee loogu talagalay Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka La Maareeyo ee Dadweynaha. Waxaa laga yaabaa inay kaa caawiyaan helitaanka, adeegga, ama dhibaatooyinka biilasha. Waxay sidoo kale ay kaa caawin karaan inaad cabasho nala xaraysato ama racfaan ama aad codsato Racfaan Goboleed.

| | |
|---|---|
| Wac: | 651-431-2660<br>1-800-657-3729 ama TTY 711, ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad door bidayso. Wicitaankan waa bilaash.<br>Saacadaha adeegga waa Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo. |
| Ama | |
| U qor: | Qofka Dhexdhexaadiyaha ah ee loogu talagalay Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka ee La Maareeyey ee Dadweynaha<br>P.O. Box 64249<br>St. Paul, MN 55164-0249 |
| Fakis ugu dir: | 651-431-7472 |

# Qaybta 14-aad: Qeexitaano

Kuwani waa macnayaasha erayada qaarkood ee buug-gacmeedkan xubinta ku jira.

**Tallaabo:** Tani waxaa ka mid ah:

- Diidmada ama oggolaanshaha xaddidan ee nooca ama heerka adeegga
- Yareynta, hakinta, ama joojinta adeeg kaasoo hore loo ansixiyay
- Diidmada dhammaan ama qayb ka mid ah lacag bixinta loogu talagalay adeegga
- Bixin la'aanta adeegyada qadar waqti macquul ah
- Ugu falcelin la'aanta muddada loo baahan yahay gudaheeda ee loogu talagalay cabashooyinka iyo racfaanada
- Diidmada codsiga xubinta si ay u helaan adeegyada ka baxsan shabakada oo ku aadan xubnaha ku nool aagga miyiga kaas oo leh hal qorshe caafimaad oo kaliya

**Suuxinta:** Daawooyinka kaa dhigaya inaad hurdo la dhacdo waqtiga qalliinka.

**Racfaan:** Waa qaab aad ugu doodi kartid falkeena haddii aad u malaynayso inaan khalad samaynay. Waxaad naga codsan kartaa inaan badelno go'aanka caymiska adiga oo buuxinaya racfaan qoraal ah ama afka ah.

**Iskuduwaaha daryeelka:** Qofka sameeya, isku xira oo bixiya (mararka qaarkood) taageerooyinka iyo adeegyada lagu xusay qorshaha daryeelka. Qofkani innaga ayuu nala shaqeeyaa.

**Ilmaha:** Xubin da'dooda ay ka yar tahay 21 sano.

**Baaritaanada Ilmaha iyo Dhallinta (C&TC):** Barnaamij daryeel caafimaad oo gaar ah oo ah booqashooyinka carruta wanaagsan ee loogu talagalay xubnaha da'dooda ay ka yar tahay 21 sano. Waxaa ka mid ah baaritaanka si loo hubiyo dhibaatooyinka caafimaad. Waxaa sidoo kale ka mid ah gudbinta loogu talagalay ogaanshaha iyo daaweynta, haddii lagama maarmaan ay tahay.

**Tijaabo Caafimaad:** Daraasad tijaabo caafimaad ah oo u-qalanto taasoo: ku xiran dib-u-eegista asaaga qeexan; uu kafaalo qaaday barnaamij cilmi baaris caafimaad kaasoo buuxiya shuruucda dowladda dhexe iyo gobolka iyo heerarka la ansixiyay; iyo taasoo natiijooyinkooda runta ah laga soo warbixiyo.

**Lacag bixinta ama Lacag la bixinta:** Qadar go'an oo aad u bixin karto qaybtaada kharashka mar kasta oo aad hesho adeegyo gaar ah, agabyo, ama daawooyinka dhakhtarka kuu qoray. Lacagta caymiska waxaa badanaa la bixiyaa waqtiga adeegyada, agabyada, ama daawooyinka la qoro la bixinayo.

**Kharash Wadaaga:** Qadarta aad mas'uulka ka noqon karto inaad ku bixiso adeegyadaada caafimaad dhankooda. Ka tixraac qaybta 6-aad wixii macluumaadka kharash wadaagista ah.

**Adeegyada La Daboolo:** Adeegyada daryeelka caafimaadka ee u qalma in lacag laga bixiyo.

**Karti Dhaqameed:** Kartida dhaqanka iyo luqadda waa awoodda ururada daryeelka la maareeyo iyo bixiyayaasha shabakadooda ku jira si ay u siiyaan daryeel xubnaha leh qiyamyada, caqiidooyinka, iyo habdhaqanada kala duwan, iyo inay habeeyaan gaarsiinta daryeelka si ay u daboolaan baahiyaha bulshada, dhaqanka, iyo luqada xubnaha. Hadafka ugu dambeeya waa nidaamka gaarsiinta daryeelka caafimaadka iyo xoog shaqaale oo gaarsiin kara tayada ugu sareysa ee daryeelka bukaan kasta, iyadoon loo eegin jinsiyada, qowmiyada, sooyaalka dhaqanka, aqoonta luqadeed, wax akhriya oona qora, da'da, jinsiga, nooca galmada, naafanimada, diinta, ama xaalada bulsho-dhaqaale.

**Dafirida, Joojinta, ama Yareynta (DTR) (Ogaysiiska Tallaabada):** Foom ama warqad aan kuu soo dirno si aan kuugu sheegno wax ku saabsan go'aanka sheegashada, adeegga, ama tallaabo kasta oo kale oo aan anagu qaadnay.

**Adeegyada Helitaanka Tooska ah:** Waxaad isticmaali kartaa bixiye kasta oo ku jira shabakada Qorshaha si aad u hesho adeegyadaan. Ugama baahnid gudbin ama oggolaansho hore oo aad ka hesho PCP-gaaga ama PCC kahor inta aadan helin adeegyada.

**Ka Bax ama Ka Bixida:** Habka soo afjarida xubinimadaada qorshahayaga.

**Qalabyada Caafimaadka ee Waara (DME):** Qalab caafimaad oo gaar ah oo dhakhtarkaaga uu dalbaday in lagu isticmaalo marka la joogo guriga. Tusaalooyinku waa biraha lagu socda, kuraasta curyaanka, qalabka ogsijiinta iyo sahayda.

**Gurmadka:** Xaalada degdega ah ee caafimaadka waa marka adiga, ama qof kasta oo kale oo si dhexdhexaad aqoon ugu leh caafimaadka iyo daawada, aad aaminsan tahay in aad leedahay calaamado caafimaad oo u baahan daryeel caafimaad oo degdeg ah si looga hortago dhimashada, waayitaanka xubin jirka qayb ka ah, ama waayitaanka shaqada qayb jirka ka mid ah ama waxay keeni kartaa dhaawac jireed ama maskaxeed oo hjalis daran leh. Calaamadaha caafimaadka waxay noqon karaan dhaawac halis ah ama xanuun daran. Tani waxaa sidoo kale loo yaqaanaa Xaalad Caafimaad oo Degdeg ah.

**Adeegyada/Daryeelka Degdegga ah:** Adeegyada la daboolo ee uu bixiyo bixiye loo tababaray bixinta adeegyada degdegga ah loona baahanyahay in lagu daaweeyo xaalad caafimaad oo degdeg ah. Tani waxaa sidoo kale loo yaqaanaa Daryeelka Qolka Gargaarka Degdegga ah.

**Gaadiidka Caafimaadka Gargaarka Degdegga ah:** Adeegyada ambalaasta ee loogu talagalay xaalad caafimaad oo degdeg ah.

**Adeegyada Laga Saaray:** Adeegyada qorshaha uusan ka bixinin. Caawimaada Caafimaadka (Medicaid) sidoo kale iyadana ma ka bixin doonto iyaga.

**Adeegga Tijaabada:** Adeeg aan la caddaynin inuu yahay mid ammaan iyo waxtar leh.

**Daraasadda Dib-u-eegista Tayada ee Dibada:** Daraasad ku saabsan sida tayada, jadwalka waqtiyeynta iyo helitaanka daryeelka ay bixiso UnitedHealthcare. Daraasadani waa mid bannaanka ah oona madaxbannaan.

**Qorsheynta Qoyska:** Macluumaadka, adeegyada, iyo agabyada ka caawinaaya shaqsiga inuu go'aansado inuu carruur yeeshto. Go'aamadan waxaa ka mid ah doorashada inaad ilmo yeelato, goorta aad ilmo yeelaneyso, ama in aadan yeelan ilmo.

**Adeegga Khidmada lagu helo (FFS):** Habka lacag bixinta ee loogu talagalay adeegyada caafimaadka. Bixiyaha caafimaadka waxaa si toos ah biilasha ugu soo dalacayaa Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Minnesota (DHS). DHS waxay siisaa bixiyaha adeegyada caafimaadka. Habkan waxaa la isticmaalaa marka aad u qalanto MHCP laakiin aadan ka diiwaangashaneen qorshe caafimaad.

**Liiska Daawooyinka:** Liiska daawooyinka la daboolo ee hoos yimaada Qorshaha.

**Cabashada:** Cabashada aad naga qabto annaga ama mid ka mid ah bixiyayaasha shabakadeena ama farmashiyeyaasheena. Tani waxaa ku jira cabasho ku saabsan tayada daryeelkaaga.

**Daryeelka Caafimaad ee Guriga:** Adeegyada daryeelka caafimaadka ee ku aadan xanuunka ama dhaawac lagu bixiyo guriga ama bulshada dhexdeeda halkaasoo hawlo nololeed oo caadi ah ay qaataan xubinta.

**Guriga xanaanada gaarka ah ee bukaanka daran:** Barnaamij gaar ah oo loogu talagalay xubnaha kuwaasoo xanuun kama dambays ah qabo oo aan la filaynin inay noolaadaan in ka badan lix bilood si ay ugu noolaadaan si raaxo leh inta ka hartay waqtiga xubinta. Wuxuu bixiyaa adeegyo gaar ah oo loogu talagalay xubinta iyo qoyskooda. Tani waxaa sidoo kale loo yaqaanaa Adeegyada Guriga Xanaanada Gaarka ah.

**Isbitaal dhigista:** Daryeelka ka jira isbitaalka ee u baahan in loo seexiyo sida bukaan-jiif ahaan oo sida caadiga ah wuxuu u baahanyahay joogitaanka habeenki.

**Daryeelka Bukaan-socodka Isbitaalka:** Daryeelka ka jira isbitaalka kaas oo aan u baahnayn joogitaanka habeenki.

**Adeegga Xasilinta Guryeynta:** Adeegyada lagu caawiyo dadka naafada ah, oo ay ku jiraan xanuunada dhimirka iyo dhibaatada isticmaalka muqaadaraadka, iyo helitaanka waayeelada oo ayna guryeyta u xafidaan. Ujeedada adeegyadan waa in laga taageero u guurida qofka xaga guryenta, kordhinta xasilloonida muddada dheer ee guryeynta bulshada, iyo in laga fogaado xilliyada guri la'aanta ama hay'adaynta mustaqbalka.

**Isbitaalka Joogitanka Bukaan-jiifka:** Joogitaanka isbitaal ama xarun daawayn taasoo badanaa qaata 24 saacadood ama ka badan.

**Adeegga Baaritaanka:** Adeeg aan la caddaynin inuu yahay mid ammaan iyo waxtar leh.

**Caafimaad ahaan lagama maarmaan ah:** Tani waxay qeexaysaa adeegyada, agabyada, ama daawooyinka aad u baahan tahay si aad isku difaacda, u baarto, ama u daaweyso xaaladaada caafimaad ama si aad u ilaaliso xaaladaada caafimaadka ee hadda jirta. Tani waxaa ka mid ah daryeelka kaa ilaalinaaya inaad isbitaalka ama guriga kalkaalinta aado. Waxaa sidoo kale ay la macno tahay adeegyada, agabyada, ama daawooyinka buuxiya heerarka dhaqanka caafimaad ee la aqbalay. Daryeel caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ayaa ku habboon xaaladaada. Tani waxaa ka mid ah daryeelka la xiriira xaaladaha jirka iyo habdhaqanka caafimaadka (ay ku jiraan Caafimaadka Maskaxda iyo Cillada Isticmaalka Maandooriyaha). Waxaa ka mid ah nooca iyo heerka adeegyada. Waxaa ka mid ah tirada daaweynada. Waxaa sidoo kale ka mid ah meesha aad ka hesho adeegyada iyo mudada ay sii wadi doonaan. Adeegyada caafimaadka u ah laga maarmaanka waa inay:

- Noqdaan adeegyada, agabyada iyo daawooyinka dhakhtarka uu qoro oo bixiyeyaasha kale ay badanaa dalbadaan
- Kaa caawiyaan sidii aad u fiicnaan lahayd ama aad ugu wanaagsanaatid sida aad tahay
- Kaa caawineyso inay joojiso xaaladaada inay ka sii xumaato
- Kaa caawiyaan kahortagga ama ogaanshaha dhibaatooyinka caafimaadka

**Medicare:** Barnaamijka caymiska caafimaadka dowlada dhexe ee loogu talagalay dadka da'doodu tahay 65 ama ka weyn. Waxaa sidoo kale loogu talagalay dadka qaar ee yar da'da 65 ee naafanimada qaba, iyo dadka qaba Cudurka Keliyaha Marxalada-dhamaadka.

**Qorshaha Daawada Dhakhtarku Qoro ee Medicare:** Qorshe caymis oo bixiya macaashyada daawada ee Barnaamijka Daawada Dhakhtarku Qoro ee Medicare (Medicare Part D).

**Barnaamijka Daawada Dhakhtarku Qoro ee Medicare:** Faa'iidada rijeetada daawada lagu qoray ee loogu talagalay xubnaha Medicare. Waxaa mararka qaarkood loo yaqaanaa Medicare Part D. Caymiska daawada waxaa la bixiyaa iyadoo loo marayo qorshaha daawada dhakhtarku qoro ee Medicare.

**Xubinta:** Qofka adeegyada ku helaya barnaamij gaar ah, sida barnaamijka daryeelka caafimaadka Minnesota ama Medicare.

**Buugga-Gacanta Xubinta:** Kani waa dukumeentiga aad akhrinayso. Dukumeentigani waxaa uu kuu sheegayaa adeegyada lagu daboolo Qorshaha. Waxa uu kuu sheegayaa waxa ay tahay inaad samayso si aad u hesho adeegyada la daboolo. Waxa uu kuu sheegayaa xuquuqdaada iyo mas'uuliyadaada. Waxa uu kuu sheegayaa xuquuqdeena iyo mas'uuliyadeena.

**Shabakada:** Bixiyeyaasheena daryeelka caafimaadka ee qandaraaska ku haysta bixinta Qorshaha.

**Bixiyeyaasha Ku Jira Shabakada:** Kuwaani waa bixiyayaasha ku heshiiyey inay la shaqeeyaan qorshaha caafimaadka oo ayna aqbalaan lacag bixinteena oo ayna xubnaheena ku dalacin qadar dheeraad ah. Inta aad xubin ka tahay qorshaheena, waa inaad isticmaashaa bixiyayaasha shabakada si aad u hesho adeegyada la daboolo. Bixiyeyaasha shabakada waxaa sidoo kale loo yaqaana bixiyayaasha qorshaha ama bixiyayaasha kaqaybqaata.

**Qofka Dhexdhexaadiyaha ah ee loogu talagalay Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka Dadweynaha ee La Maareeyo:** Shaqsi jooga Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota kaasoo kaa caawin kara dhibaatooyinka helitaanka, adeegga ama biilasha. Qofka Dhexdhexaadiyaha ah wuxuu sidoo kale kaa caawin karaa inaad gudbiso cabasho ama racfaan ama aad codsato Racfaan Goboleed (Dacwad-dhageysiga cadaaladda ah ee gobolka).

**Adeegyada loo helo si furan:** Sharciga dawladda dhexe iyo kan gobolka ayaa kuu oggolaanaya inaad doorato dhakhtar kasta, rug caafimaad, isbitaal, farmashiye, ama hay'ada qorsheynta qoyska—xitaa haddii aysan ku jirin shabakadeena— si aad u hesho adeegyadaan.

**Adeegyada Isbitaalka Bukaan-Socodka:** Adeegyada lagu bixiyo isbitaalka ama xarunta bukaan-socodka kuwaasoo aan gaarin heerka daryeelka bukaan-jiifka. Adeegyadaan waxaa sidoo kale laga yaabaa in laga helo rugtaada caafimaadka ama xarun kale oo caafimaad.

**Adeegyada Goobta ka Baxsan:** Daryeelka caafimaadka ee la siiyo xubin oo uu siiyo bixiye ka baxsan shabakada lagu siiyo meel ka baxsan goobta adeega Qorshaha.

**Bixiyaha Shabakadda Ka baxsan ama Xarunta Shabakadda Ka baxsan:** Bixiye ama xarun aan la shaqaaleysin, la lahayn, ama an ku shaqaynin qorshaheena oo aana qandaraas nagula jirin si ay adeegyada la daboolo u siiyaan xubnaha qorshaheena. Tani waxaa sidoo kale loo yaqaana-bixiye aan kaqaybqaadanaynin.

**Adeegyada Shabakadda Ka baxsan:** Daryeelka caafimaadka ee la siiyo xubin oo uu siiyo bixiye aan qayb ka ahayn shabakada Qorshaha.

**Qorshaha Dhiiragelinta Dhakhtarka:** Hababka lacag bixinta gaarka ah oo naga dhexeeya annaga iyo dhakhtarka ama koox dhakhtar ah oo laga yaabo inay saameyso isticmaalka gudbinta. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inay saameyso adeegyada kale ee laga yaabo inaad u baahato.

**Adeegyada Dhakhtarka:** Adeegyada uu bixiyo shaqsi ruqsadeysan sida uu dhigayo sharciga gobolka si uu ugu dhaqmo daawada ama lafo kala bixinta. Adeegyada daryeelka caafimaadka ee uu dhakhtar caafimaad oo ruqsadeysan (M.D. – Dhakhtarka Caafimaadka ama D.O. – Dhakhtarka Daawada Lafo Kala Bixinta) bixiya ama isku dubarida.

**Qorshe:** Urur leh shabakad dhakhaatiir ah, isbitaalo, farmashiyeyaal, bixiyeyaasha adeegyada muddada dheer, iyo bixiyeyaal kale. Waxaa sidoo kale ay leedahay isuduwayaal daryeel oo ku caawiya.

**Daryeelka Dejinta Kadib:** Adeeg isbitaal ayaa loo baahanyahay si uu u caawiyo xaaladaha qofka inay xasiloonaadaan kadib marka uu helo daryeelka degdega ah. Waxay bilaabaneysaa marka isbitaalka naga codsado oggolaanshaheena ku aadan caymiska. Way socotaa ilaa iyo: qofka laga saarayo; Dhakhtarka ku jira shabakadeena Qorshaha ayaa bilaabaya daryeelka; ama annaga, isbitaalka, iyo dhakhtarka ayaa isku waafaqayno wax kale.

**Qadarka canshuurta:** Lacag bixinta joogtada ah ee Medicare, shirkad caymis, ama qorshaha daryeelka caafimaadka ee caymiska caafimaadka ama rijeetada daawada laguu qoray.

**Barnaamijka Caawimaada Caafimaadka ee Horay loo bixiyay (PMAP):** Barnaamij uu gobolka qandaraas kula galaayo qorshayaasha caafimaadka si uu u daboolo oo uuna maareeyo adeegyada daryeelka caafimaadka ee loogu talagalay isdiiwaangeliyeyaasha Caawimada Caafimaadka (Medicaid).

**Daawooyinka uu dhakhtarka qoro:** Daawooyinka iyo daroogooyinka uu dalbado bixiye caafimaad.

**Caymiska Daawooyinka Dhakhtarka uu qoro:** Qorshe caafimaad oo ka caawiya bixinta kharashka daroogooyinka iyo daawooyinka dhaqtarka uu qoro. Sidoo kale loo yaqaano "Barnaamijka Daawada Dhakhtarku Qoro ee Medicare."

**Adeegyada Kahortagga ah:** Adeegyada kaa caawiya inaad caafimaad qabtid, sida jirdhiska joogtada ah, tallaalada, iyo daryeelka qofka wanaagsan. Waxay adeegyadaan kaa caawinayaan helida iyo kahortagga dhibaatooyinka caafimaadka. Dabagalka lagu sameeyo xaaladaha la ogaaday (sida baaritaanka sonkorowga) inaysan kahortag ahayn.

**Rugta Daryeelka aasaasiga ah:** Rugta daryeelka aasaasiga ah (PCC) ee aad u doorato daryeelkaaga joogtada ah. Rugtan waxay ku siin doontaa daryeelkaaga intiisa badan.

**Bixiyaha Daryeelka Asaasiga ah:** Bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP) waa dhakhtarka ama bixiye daryeel caafimaad oo kale oo aqoon leh oo aad kula kulanto rugtaada daryeelka aasaasiga ah. Qofkan ayaa maareyn doona daryeelkaaga caafimaad.

**Oggolaanshaha Hore:** Ansixinteena taasoo looga baahan yahay adeegyada qaar kahor inta aadan helin ayaga. Tani waxaa sidoo kale loo yaqaanaa oggolaansho kahor ama oggolaansho adeeg.

**Bixiye:** Xirfadle daryeel caafimaad oo u qalma ama xarun lagu ansixiyay sida waafaqsan sharciga gobolka si ay u bixiso daryeel caafimaad.

**Cabashada tayada daryeelka:** Ujeedooyinka buug-gacmeedkan, "cabashada tayada daryeelka" waxaa loola jeedaa ku qanacsanaan la'aan la muujiyay ee ku saabsan adeegyada daryeelka caafimaadka taasoo keeneysa waxyeello imaan kara ama dhibaato dhab ah oo soo gaarta xubin. Cabashooyinka tayada daryeelka waxaa ka mid noqon kara: helitaan; bixiyaha iyo kartida shaqaalaha; ku habboonaanta rugta daryeelka; isgaarsiinada; habdhaqanka; tixgelinada xarunta iyo deegaanka; iyo arrimo kale kuwaasoo saamayn kara tayada adeegyada daryeelka caafimaadka.

**U-Gudbinta:** Oggolaansho qoran oo ka socda bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah oo laga yaabo inaad u baahato inaad hesho kahor inta aadan la kulmin bixiyeyaasha qaarkood, sida khabiirada, oo loogu talagalay adeegyada la daboolo. Bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah waa inuu kuu soo qoraa gudbinta.

**Adeegyada Dhaqancelinta iyo Qalabyada:** Daaweynta iyo qalabka aad hesho si ay kaaga caawiyaan inaad ka soo bogsooto xanuunka, shilka ama qalliinka weyn.

**Barnaamijka qaataha la xaddiday (RRP):** Barnaamij loogu talagalay xubnaha helay daryeel caafimaad oo aana u hogaansamin sharciyada ama si khaldan u isticmaalay adeegyada. Haddii aad ka tirsan tahay barnaamijkan, waa inaad adeegyo caafimaad ka heshaa mid ka mid ah bixiyeha daryeelka aasaasiga ah ee loo magacaabay. Waa inaad tani sameysaa ugu yaraan 24 bilood oo ah xaq u yeelashada ku aadan MHCP. Xubnaha ka tirsan barnaamijkan kuwaasoo ku guuldareysta inay raacaan sharciyada barnaamijka waxaa looga baahan doonaa inay sii wataan barnaamijka 36 bilood oo dheeraad ah.

**Fikrada Labaad:** Haddii aadan ku qanacsaneyn fikrada aad ka heshay bixiye ku jira shabakada Qorshaha, waxaad xaq u leedahay inaad fikrad ka hesho bixiye kale. Annaga ayaa bixin doona tan. Wixii ku saabsan adeegyada caafimaadka maskaxda, fikrada labaad waxay ka iman kartaa-bixiye shabakada ka baxsan. Wixii ku saabsan adeegyada cillada isticmaalka maandooriyaha, fikrada labaad waxay ka iman doontaa qiimeeye kaloo aqoon buuxda u leh oo aan u baahnayn inuu ku jiro shabakada Qorshaha. Waa inaan tixgelinaa fikrada labaad laakiin maaha inaan aqbalno fikrada labaad oo ku saabsan cillada isticmaalka maandooriyaha ama adeegyada caafimaadka maskaxda.

**Goobta Adeegga:** Goobta ay waajib tahay in qofka uu ku noolaado si uu awood ugu yeesho in uu xubin ka noqdo ama uu ugu sii jiro Qorshaha. Adeegyada Xubinta ka wac lambarka taleefoonka ee ku qoran Qaybta 1-aad si aad u hesho tafaasiil ku saabsan aagga adeega.

**Oggolaanshaha adeegga:** Ansixinteena taasoo looga baahan yahay adeegyada qaar kahor inta aadan helin ayaga. Tani waxaa sidoo kale loo yaqaanaa oggolaanshaha kahor ama oggolaanshaha hore.

**Daryeelka Kalkaalinta Xirfadeysan:** Daryeelka ama daaweynta kuwaasoo ay sameyn karaan oo kaliya kalkaaliyayaal ruqsadeysan.

**Dhakhtarka Takhasusaha ah:** Dhakhtar bixiya daryeel caafimaad oo loogu talagalay cudur gaar ah ama qayb ka mid ah jirka.

**Daryeelka aasaasiga ah ee Baahiyaha Gaarka ah (SNBC):** Barnaamijka daryeelka la maareeyay ee ikhtiyaari ah oo loogu talagalay dadka naafada ah. SNBC waxaa loogu talagalay dadka haysta Kaalmada Caafimaadka (Medicaid) oo da'doodu ay u dhaxeyso 18-64. SNBC waxay dabooshaa adeegyada daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ee Kaalmada Caafimaadka (Medicaid), marka laga reebo kaalmada daryeelka shakhsiyeed iyo kalkaalinta daryeelka guriga.

**Oggolaanshaha Joogtada ah:** Oggolaansho qoran oo annaga naga socda si aad ula kulanto khabiir ka baxsan shabakada in ka badan hal mar (ku aadan daryeel joogto ah).

**Racfaanka Gobolka (Dacwad-dhageysiga Cadaaladda ah ee gobolka):** Dhageysi ka socda gobolka si dib loogu eego go'aanka aan annagu gaarnay. Waa inaad dhageysiga ku codsata qoraal ahaan. Bixiyahaaga waxaa laga yaabaa inuu codsado Racfaanka Gobolka isagoo wata oggolaanshahaaga oo qoran. Waxaad codsan kartaa dhageysi haddii aadan ku waafaqsaneyn mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Dafirida, joojinta, ama yareynta adeegyada
- Diiwaangelinta ka tirsan Qorshaha
- Dafirida qayb ama dhammaan qaansheegashada ku aadan adeegga
- Ku fashilmitaankeena inaan ka falcelino inta lagu guda jiro waqtiyada loo baahanyahay oggolaanshaha hore iyo racfaanada
- Tallaabo kasta oo kale

**Kharash-soo-ceshiga:** Xaqa aan u leenahay inaan lacag magacaaga kaga ururino qof kale, koox, ama shirkad caymis. Xaq ayaan u leenahay tani marka aad caymis caafimaad qaadato oo hoos yimaada Qorshahan oo loogu talagalay adeegga uu dabooo il kale ama bixiye saddexaad.

**Cillada Isticmaalka Maandooriyaha:** U isticmaalida khamriga ama daroogada qaab ay waxyeelo kuugu gaarsinaayaan.

**Maraykanka:** Wixii ku aadan ujeedada Buug-gacmeedkan Xubinta, Maraykanka waxaa ugu jira kontonka gobol, Degmada Columbia, Barwaaqa sooranka Puerto Rico, Jasiiradaha Virgin Islands, Guam, American Samoa, iyo Jasiiradaha Waqooyiga Mariana.

**Daryeelka si degdega ah looga baahanyahay:** Daryeelka aad u hesho xanuunka kedis ah, dhaawaca, ama xaalad aan degdeg ahayn laakiinse u baahan daryeel isla markaa ah. Tani waxaa sidoo kale loo yaqaanaa daryeelka degdegga ah.



**Su'aalo ma qabtaa?** Booqo **myuhc.com/CommunityPlan**, ama ka wac Adeegyada Xubinta lambarka **1-888-269-5410**, TTY **711**, ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso. Wicitaankan waa bilaash.

# Qaybta 15-aad: Macluumaad dheeraad ah

Waxaad macluumaad ku saabsan dhakhaatiirta shabakada ka ogaan kartaa barta **myuhc.com/CommunityPlan**, ama adigoo wacaaya Adeegyada Xubinta.

Waxaan kuu sheegi karnaa macluumada soo socda:

1. Magaca, cinwaanka, lambarka telefoonka
2. Shahaadooyinka hawlyaqaanimo
3. Takhasus
4. Guddiga shahaadeynta
5. Luuqadaha uu ku hadlo bixiyaha
6. Macluumaadka ku saabsan dugsiga caafimaadka ee uu soo dhigtay iyo barnaamijka deganaanshaha
7. Xaalada guddiga shahaado bixinta
8. Macluumaadka ku saabsan shirkadeena iyo adeegyadeena
9. Macluumaadka ku saabsan xuquuqyadaada iyo mas'uuliyadaada

## Habraacyo cusub oo caafimaad, qalabyada ama daawooyinka

Codsiyada caymiska loogu sameynaayo habraacyada cusub ee caafimaadka, aaladaha, ama daawooyinka waxaa dib-u-eegis ku sameeya Guddiga Qiimeynta Farsamada UnitedHealthcare Community Plan. Kooxdan waxaa ka mid ah dhakhaatiirta iyo khubarada kale ee daryeelka caafimaadka. Kooxda waxay isticmaashaa tilmaamaha qaranka iyo cadaynta cilmiga sayniska ee laga helo daraasadaha caafimaadka si ay uga caawiyaan go'aansashada in UnitedHealthcare Community Plan ay tahay inay ansixiso qalab, habraacyo, ama daawooyin cusub iyo in kale.

# Ogeysiisyada Qorshaha Caafimaadka ee Habdhaqannada Asturnaanta

**OGEYSIISKANI WUXUU QEEXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO LOONA SHAACIN KARO IYO SIDA AAD KU HELI KARTO MACLUUMAADKAN. FADLAN SI TAXADAR LEH DIB UGU EEG.**

Dhaqangalayo Janaayo 1, 2023

Sharci ahaan, annagu[1] waa inaan ilaalinaa asturnaanta macluumaadkaaga caafimaad ("HI"). Waa inaan kuu soo dirnaa ogeysiiskan. Wuxuu kuu sheegayaa:

- Sida aan u isticmaali karno macluumaadkaaga caafimaadka (HI).
- Markaan la wadaagi karno macluumaadkaaga caafimaadka (HI) dadka kale.
- Xuquuqda aad u leedahay inaad hesho macluumaadkaaga caafimaadka (HI).

Sharci ahaan, annagu waa inaan raacnaa shuruudaha ogeysiiskan.

Macluumaadka caafimadka (HI) waa macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga ama adeegyada daryeelka caafimaadkaaga. Waxaan xaq u leenahay inaan beddelno dhaqammadayada asturnaanta ee loogu talagalay fara ku haynta macluumaadka caafimaadka (HI). Haddii aan beddelno, waxaan kugu soo wargelin doonaa boostada ama iimayl. Waxaan sidoo kale soo gelin doonaa ogeysiiska cusub mareegtan **(www.uhccommunityplan.com)**. Waxaan kaa soo wargalin doonaa haddii lagu xadgudubo macluumaadka caafimaadkaaga. Waxaan u ururinna oo aan u haynaa macluumaadka caafimaadkaaga (HI) si aanu u hmaamulno ganacsigayaga. Macluumaadka caafimaad (HI) waxaa laga yaabaa inay noqoto hadal, qoraal ama qaab elektaroonik ah. Waxaan helida macluumaadka caafimaadkagaa (HI) ka xaddidnaa shaqaalahaga iyo bixiyeyaasha adeegga. Waxaan leenahay hab dhowritaan lagu ilaaliyo macluumaadkaaga caafimaad (HI).

**Sida aan u uruurino, u isticmaalno, oo u wadaagno macluumaakaaga**

**Waan uruurinaa, isticmaalnaa oo wadaagnaa Macluumaadka CaafimaadkaAGA (HI):**

- Adiga ama wakiilkaaga sharci.
- Ha'ydaha Dowladda.

**Waxaan xaq u leenahay inaan uruurino, isticmaalno oo wadaagno macaluumaadka caafimaadkaaga innagoo ka leh ujeedooyin gaar ah.** Tani waa inay noqotaa mid loogu talagalay daaweyntaada, lacag bixinta daryeelkaaga, iyo maamulka ganacsigayaga. Waxaan macluumaadka caafimaadkaaga (HI) u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa sida soo socota.

- **Lacag Bixinta.** Waxaa dhici karta inaan uruurino, isticmaalno, oo wadaagno macluumaadka caafimaadkaaga si aan uga shaqeyno bixinta lacagaha carbuunta ah iyo sheegashooyinka. Tani waxaa ku jiri kara isku-duwidda macaashyada.
- **Daaweynta ama Maaraynta Daryeelka.** Waxaa laga yaabaa inaan uruurino, isticmaalno oo la wadaagno macluumaadka caafimaadkaaga daryeel bixiyayaashaada si ay gacan uga geystaan daryeelkaaga.
- **Hawgallada Daryeelka Caafimaadka.** Waxaa laga yaabaa inaanu kuu soo jeedino barnaamij maamul cudur ama wacnaan. Waxaa laga yaabaa inaanu darasno xogta si aan u horumarino adeegyadayada.
- **Si Aan Kuugu Sheegno Barnaamijyada ama Sheyada Caafimaadka.** Waxaa laga yaabaa inaan kuu sheegno daawooyin kale, sheyo, iyo adeegyo kale. Hawlahani waxaa laga yaabaa inuu sharcigu xaddido.
- **Kafaalo-qaadayaasha Qorshaha.** Waxaa laga yaabaa inaan loo-shaqeeyahaaga siino saajilinta, ka saarka sajilka iyo soo koobka macluumaadka caafimadkaaga (HI). Waxaa laga yaabaa inaan iyaga siino macluumaadka caafimaadka (HI) ee kale haddii ay si habboon u xaddidaan isticmaalkeeda.
- **Ujeeddooyin Dammaanad-qaad.** Waxaa laga yaabaa inaan uruurino, isticmaalno, ama wadaagno macluumaadka caafimaadkaaga si aan u gaarno go'aamada dammaanad qaadka. Uma isticmaali doono macluumaadkaaga hiddaha ee caafimaadka arrimo dammanad ka qaad.
- **Xusuusimaha Arrimaha Macaashyada Ama Daryeelka.** Waxaa laga yaaba inaan uruurino, isticmaalno ama wadaagno macluumaadka caafimaadkaaga si aanu kuugu soo dirno xusuusimaha ballanta dhakhtarka iyo macluumaadka ku saabsan faaiifooyinkaaga caafimaadka.
- **Loogu Talagalay Wadaxiriirada Kugu Socdo Adiga.** Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno lambarka telefoonka ama iimaylka aad na siiso si aan kuugu soo sheegno wax ku saabsan macaashyadaada, daryeelka caafimaadkaaga ama lacag-bixintaada.

**Waxaa laga yaaba inaan u ururino, u isticmaalno ama u wadaagno macluumaadka caafimaadkaaga sida soo socota:**

- **Sida Sharcigu u Farayo.**
- **Kusocota Dadka Ku Lug Leh Daryeelkaaga.** Qofkaasi wuxuu noqon kara xubin qoys markay jirto xaalad gurmad. Tani waxay dhici kartaa haddii aadan awoodin inaad oggolaatid ama aad diidid. Haddii aadan awoodin inaad diiddo, waxaanu isticmaali doonaa garashadayada ugu wanaagsan. Haddii la noo oggolaado, kadib markaad geeriyooto, waxaan la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadkaaga (HI) xubnaha qoyska ama asxaabta gacanta geystay daryeelkaaga.
- **Hawlaha Caafimaadka Dadwaynaha.** Tani waxay u noqon kartaa waa mid looga hortago dillaaca cudurrada.

- **Soo Sheegista Xadgudubka, Dayaca, iyo Khilaafka Guriga.** Waxaa laga yaabaa inaan kaliya la wadaagdno qolooyinka sharcigu oggol yahay inay helaan macluumaadkan caafimaadkan (HI). Tani waxy noqon kartaa hay'ad bulsheed ama mid ilaalin.
- **In Hawlaha Kormeerka Caafimaadka** awgood loo siiyo hay'ad uu sharcigu u oggol yahay inay helsho macluumaadka caafimaadka (HI). Tani waxay noqon kartaa marka loo isticmaalo arrimaha baaritaanka liisanka, xisaabinta, xatooyada iyo xadgudubka.
- **Dacwada makamadeed ama maamuleed, sida ka jawaabidda amar maxkamadeed.** Si looga jawaabo amar maxkamad ama u yeedhid maxkamadeed.
- **Ujeeddooyinka Sharci Fulinta.** Si loo helo qof lumay ama ka warbixin dembi.
- **Halista Caafimaadka ama Badqabka.** Tani waxay noqon kartaa in la siiyo hay'adaha caafimaadka bulshada ama sharci fulinta. Tusaale waxaa u noqon kara xaaladaha degdegga ah iyo masiibada.
- **Hawlaha Dowladda.** Tani waxaa ka mid noqon kara markay loo isticmaalo ciidamada ama horay ugu jirid ciidanka, amniga qaranka, ama adeegyada ilaalinta.
- **Magdhowga Shaqaalaha.** Si loogu hoogaansamo sharciyada shaqada.
- **Cilmi-baarista.** Si loo darso cudur ama naafanimo.
- **Si Macluumaad Looga Bixiyo Faraca.** Tani waxay noqon kartaa mid ku socota baaraha sababta ama xubnaha qofka dhintay. Si loo garto qofka dhintay, loo helo sababta dhimashada, ama sida u farayo sharcigu. Waxaa laga yaaba inaan siinno macluumaadka caafimaadkaaga (HI) mareeyeyaasha geerida.
- **Qalliinka Beddelka Xubin Jirka ka mid ah.** Si loo caawiyo helida, keydinta ama beddelka xubnaha jirka, indhaha ama unugyada.
- **Ku socota Hay'adaha Asluubta Ama Sharci Fulinta.** Dadka xiran: (1) Si loo bixiyo dayeel caafimaad; (2) Si loo ilaaliyo caafimaadkaaga iyo caafimaadka dadka kale; iyo (3) in loo isticmaalo amniga hay'adda.
- **Danwadaagtayada Ganacsiyeed** haddii loo baahdo in adeegyo ay ku siiyaan. Danwadaagtayada ayaa oggol inay ilaaliyaan macluudmaadkaaga caafimaad (HI). Looma oggola inay u isticmaalan macluumaadka caafimaadkaaga (HI) si ka baxsan sida lagu oggol yahay heshiiska iyaga lala galay.
- **Xaddidaada Kale.** Sharciyada federaalka iyo gobolka ayaa laga yaabaa inay si dheerad ah u xadeeyaan isticmaalka macluumaakda caafimaadka (HI) ee hoosta ku taxan. Waxaan raaci doonaa sharciyada sii adag ee arrinta ku lug leh.
    1. Ku-xadgudubka Qamriga iyo Maandooriyaha
    2. Macluumaadka Fara-qaadka
    3. Ku xadgudubka ama Dayaca Ilmaha Ama Qofka Qaangaarka ah, oo ay ku jirto xadgudubka galamada


**Su'aalo ma qabtaa?** Booqo **myuhc.com/CommunityPlan**, ama ka wac Adeegyada Xubinta lambarka **1-888-269-5410**, TTY **711**, ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbidayso. Wicitaankan waa bilaash.

Jadwalka Tusmada

4. Cudurrada Faafa
5. Macluumaadka Hido-sidaha
6. HIV/AIDS
7. Caafimaadka Maskaxda
8. Macluumaadka Ilmaha Yar
9. Rijeetooyinka
10. Caafimaadka Taranka
11. Cudurrada Galmada Lagu Kala Qaado

Waxaan u isticmaali doonaa kaliya macluumaadka caafimaadkaaga (HI) kaliya sida lagu qeexay halkan ama haddii aad na siiso oggolaanshahaaga qoran. Waxaan heli doonaa oggolaanshahaaga qoran si aan u wadaagno qoraalada arrimaha caafimaadka maskaxda ee adiga kugu saabsan. Waxaan u heli doonaa oggolaanshahaaga qoran inaan ka iibino macluumaadka caafimaadkaaga (HI) dad kale. Waxaan u heli doonaa oggolaanshahaaga qoran inaan ku istiCmaalno macluumaadka caafimaadkaaga (HI) xayaysiinta boostada lagu soo diro qaarkood. Haddii aad noo oggolaato wadaagga macluumaadka caafimaadkaaga (HI), qofka hela ayaa dhici karta inuu kuwo kale la sii wadaaga. Dib ayaa ula noqon kartaa oggolaanshahaaga. Si aad u ogaato sida sidaas loo sameeyo, wac telefoonka ku yaal kaarkaaga aqoonsiga.

**Xuquuqahaaga**

Waxaad leedahay xuquuqaha soo socda.

- **Inaad na weydiisato inaad xadidno** isticmaalka ama wadaagga loogu talagalay hawalaha daawaynta, lacag bixinta, ama daryeelka caafimaadka. Waxaad weydiisan kartaa in la xaddido la wadaagga xubnaha qoyska ama kuwa kale. Waxaa laga yaabaa inaan u oggolaanno kuwa kugu tiirsan inay codsadaan xaddiyo. **Waxaan isku dayi doonaa inaan maamuusno codsigaaga, laakiin qasab naguma aha.**
- **Inaad na weydiisto inaad wada xiriirka qarsoodiga ah** aad ku hesho qaab ama meel duwan. Tusaale ahaan, Sanduuqa Boostada (P.O. Box) beddelka gurigaaga. Waan waafaqi doonaa codsigaaga sida uu oggolyahay sharciga gobolka iyo kan dawladda. Waan aqbalna codsiyada hadlaka ah. Waaad beddeli kartaa codsigaaga. Tani waa inay qoraal noqoto. Boostada ugu dir cinwaanka hoosta ku yaala.
- **Si aad u aragto ama aad u hesho nuqulka** macluumaadka caafimaadka (HI). Waa inaad ku weydiisatid qoraal. Boostada ugu dir cinwaanka hoosta ku yaala. Haddii aanu ku hayno diiwaannadan qaab elektaroonik ah, waxaad weydiisan kartaa nuqul elektaroonik ah. Waxaad codsan kartaa in diiwaankaaga loo diro qolo saddexaad. Waxaa laga yaaba inaan kuu soo dirno sookoob. Waxaa laga yaaba inaan lacag kuugu soo dallacno bixinta nuqullada. Waxaa laga yaabaa inaad diidno codsigaaga. Haddii aan diidno codsigaaga, waxaa laga yaabaa inaad codsato in diidmada dib loo eego.

- **Inaad weydiisato wax-ka-beddel.** Haddii aad u malaynayso in macluumaadkgaaga HI yahay khalad ama aan dhamaystirnayn waad weyddiisan kartaa in la beddelo. Waa inaad ku weydiisatid qoraal. Waa inaad bixisaa sababaha isbedelka. Boostada ugu dir tani cinwaanka hoosta ku yaala. Haddii aan diidno codsigaaga, waxaad khilaafsanaantaada ku dari kartaa macluumaadka caafimaadkaaga (HI).
- **Inaad hesho diiwaanka** macluumaadkaaga caafimaadka (HI) ee la wadaagay lixdii sano ee ka horeeyay codsigaaga. Tani kuma jiri doonto wixii macluumaad caafimaad ah oo loo wadaagay sababaha soo socda: (i) loogu talagalay Daaweynta, lacag bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka; (ii) Adiga lagula wadaagay ama oggolaanshahaaga lagu wadaagay; (iii) Lala wadaagay hay'adaha asluubta ama sharci fulinta. Tani ma taxi doonto siidaynta uuan sharciga federaalka nooga baahannayn inaan raadraacno.
- **Inaad hesho nuqulka ogeysiiskan oo waraaq ah.** Waxaad weyddisan kartaa nuqul waraaq ah marka kasta. Waxaad sidoo kale nuqul ka heli kartaa mareegtayada ee ah **(www.uhccommunityplan.com)**.
- **Si aad u codsato inaan saxno ama wax ka bedelno** macluumaadka caafimaadkaaga (HI). Iyadoo ku xiran tahay halka aad ku nooshahay, waxaad sidoo kale naga codsan kartaa inaan tirtirno macluumaadka caafimaadkaaga (HI). Haddii aynu awoodin, waan kuu sheegi doonaa. Haddii aynu awoodin, warqad ayaad noo soo qori kartaa, adigoo xusaya sababta aad u diidan tahay oo noo soo dir macluumaadka saxda ah.

**Isticmaalka xuquuqdaaga**

- **Si Loola Xiriiro Qorshahaaga Caafimaad. Wac telefoonka lamabarka ku yaal kaarkaaga aqoonsiga.** Ama waxaad Xarunta Wicitaanka ee UnitedHealth Group kalasoo xiriiri kartaa telefoonka **1-866-633-2446**, ama TTY/RTT **711**.
- **Si Aad u soo Gudbiso Codsi Qoran.** Boosta ugu dir:
  UnitedHealthcare Privacy Office
  MN017-E300, P.O. Box 1459, Minneapolis MN 55440
- **Muddada.** Waxaan uga soo jawaabi doonaa wicitaankaaga ama codsigaaga qoraalka ah 30 maalmood gudahooda.
- **Xareynta Cabashada.** Haddii aad u malayso in xuquuqdaada asturnaantada lagu xadgudbay, waxaad cabasho u diri kartaacinwaanka korka ku yaal.

**Waxaad sidoo kale wargalin kartaa Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadwaynaha Maraykanka.** Annagu wax ficil kaaga qaadi meyno xareeynta cabasho.

[1] Ogeysiiskan Asturnnanta Macluumadka Caafimaad wuxuu khuseysaa qorshayaasha caafimaad ee soo socda ee ku xidhan Kooxda UnitedHealth: AmeriChoice of New Jersey, Inc.; Arizona Physicians IPA, Inc.; Care Improvement Plus South Central Insurance Company; Care Improvement Plus of Texas Insurance Company; Care Improvement Plus Wisconsin Insurance; Health Plan of Nevada, Inc.; Optimum Choice, Inc.; Oxford Health Plans (NJ), Inc.; Physicians Health Choice of Texas, LLC;

Preferred Care Partners, Inc.; Rocky Mountain Health Maintenance Organization, Incorporated; UnitedHealthcare Benefits of Texas, Inc.; UnitedHealthcare Community Plan of California, Inc.; UnitedHealthcare Community Plan of Ohio, Inc.; UnitedHealthcare Community Plan of Texas, L.L.C.; UnitedHealthcare Community Plan, Inc.; UnitedHealthcare Community Plan of Georgia, Inc.; UnitedHealthcare Insurance Company; UnitedHealthcare Insurance Company of America; UnitedHealthcare Insurance Company of River Valley; UnitedHealthcare of Alabama, Inc.; UnitedHealthcare of Florida, Inc.; UnitedHealthcare of Kentucky, Ltd.; UnitedHealthcare of Louisiana, Inc.; UnitedHealthcare of the Mid-Atlantic, Inc.; UnitedHealthcare of the Midlands, Inc.; UnitedHealthcare of the Midwest, Inc.; United Healthcare of Mississippi, Inc.; UnitedHealthcare of New England, Inc.; UnitedHealthcare of New Mexico, Inc.; UnitedHealthcare of New York, Inc.; UnitedHealthcare of Pennsylvania, Inc.; UnitedHealthcare of Washington, Inc.; UnitedHealthcare of Wisconsin, Inc.; iyo UnitedHealthcare Plan of the River Valley, Inc. Liiskan qorshayaasha caafimaadka wuu dhammaystiran yahay laga bilaabo taariikhda la dhaqan geliyo ogeysiiskan. Si aad u hesho liiskii ugu dambeeyay ee qorsheyaasha caafimaadka ee kuxiran ogeysiiskan, booqo **https://www.uhc.com/privacy/entities-fn-v2**.

# Ogeysiinta Asturnaanta macluumaadka Lacageed

**OGEYSIISKAN AYAA SHEEGAYA SIDA MACLUUMAADKAAGA LACAGEED LAGA YAABAA IN LOO ISTICMAALI LOONA WADAAGI KARO. SI TAXADDAR LEH DIB UGU EEG.**

Dhaqangalayo Janaayo 1, 2023

Annagu[2] waxaan ilaalinaa "macluumaadkaaga lacageed ee gaarka ah" ("FI"). FI waa macluumaad aan aheyn kan caafimaadka. FI waa lagugu aqoonsan karaa guud ahaana ma aha mid dad waynaha loo shaaciyo.

### Macluumaadka aan uruurino

- Waxaan annagu macluumaadka lacageed (FI) ka helnaa codsiyada ama foomamka. Kuwaasi waxy noqon karaan magaca, ciwaanka, da'da iyo lambarka sooshal sekuuritiga.
- Waxaan ka helnaa macluumaadka lacageed (FI) diiwaankaaga xisaabeed aan hayno ama kuwa kale. Tani waa xogta lacag bixinta muddooyinka gaarka ah.

### Wadaagga Macluumaadka Lacagta (FI)

Waxaan kaliya u wadaagi doonaa macluumaadka lacageed sida u farayo sharcigu.

Waxaa laga yaabaa inaan u wadaagno macluumaadkaaga lacageed si aan u maamulno ganacsiyaga. Waxaa laga yaabaa inaan wadaagno macluumaadkaaga lacageed xulafadayada.

Uma baahno ogolaanshahaaga si aan usamayno.

- Waxaa alaga yaabaa inaan u wadaagno macluumaadkaaga lacageed (FI) si aan wax uga qabano diiwaankaaga xisaabeed.
- Waxaa laga yaabaa inaan u wadaagno macluumaadkaaga lacageed (FI) si aan u joogtayna koontadaada(koontooyinkaaga).
- Waxaa laga yaabaa inaan u wadaagno macluumaadkaaga lacageed (FI) si aan uga jawaabno amarrada maxkamadda iyo baaritaannada sharciyeed.
- Waxaa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga lacageed (FI) shirkadaha diyaariya agabkayaga suuqgaynta.

**Qarsoodinimada iyo amniga**

Waxaan shaqaalaha ka xaddidnaa helida macluumaadkaaga lacageed (FI). Waxaan leenahay hab dhowritaan lagu ilaaliyo macluumaadkaaga lacageed (FI).

**Su'aalaha kusaabsan ogeysiiskan**

Fadlan **wac lambarka telefoonka ee lacag-la'aanta ah ee ku yaala kaarkaaga aqoonsiga (ID) ee qorshaha caafimaadkaaga** ama kala soo xiriir Xarunta Wicitaanka Macaamiisha ee UnitedHealth Group lambarka **1-866-633-2446**, ama TTY/RTT **711**.

[2] Ogeysiiskan Asturnaanta Macluumaadka Lacageed dartiis, "annaga" ama "annagu" waxa loola jeedaa qolooyinka ku qoran sadarro-saleedka 1-aad, ee ka bilaabmayo bogga ugu dambeeya ee Ogeysiisyada Habdhaqannada Asturnaanata Qorshaha Caafimaadka, iyo la-shaqeeyayaasha UnitedHealthcare ee soo socda: ACN Group of California, Inc.; AmeriChoice Corporation.; Benefitter Insurance Solutions, Inc.; Claims Management Systems, Inc.; Dental Benefit Providers, Inc.; Ear Professional International Corporation; Excelsior Insurance Brokerage, Inc.; gethealthinsurance.com Agency, Inc. Golden Outlook, Inc.; Golden Rule Insurance Company; HealthMarkets Insurance Agency; Healthplex of CT, Inc.; Healthplex of ME, Inc.; Healthplex of NC, Inc.; Healthplex, Inc.; HealthSCOPE Benefits, Inc.; International Healthcare Services, Inc.; Level2 Health IPA, LLC; Level2 Health Management, LLC; Life Print Health, Inc.; Managed Physical Network, Inc.; Optum Care Networks, Inc.; Optum Global Solutions (India) Private Limited; Optum Health Care Solutions, Inc.; Oxford Benefit Management, Inc.; Oxford Health Plans LLC; Physician Alliance of the Rockies, LLC; POMCO Network, Inc.; POMCO, Inc.; Real Appeal, LLC; Solstice Administrators of Alabama, Inc.; Solstice Administrators of Arizona, Inc.; Solstice Administrators of Missouri, Inc.; Solstice Administrators of North Carolina, Inc.; Solstice Administrators of Texas, Inc.; Solstice Administrators, Inc.; Solstice Benefit Services, Inc.; Solstice of Minnesota, Inc.; Solstice of New York, Inc.; Spectera, Inc.; Three Rivers Holdings, Inc.; U.S. Behavioral Health Plan, California; UHIC Holdings, Inc.; UMR, Inc.; United Behavioral Health; United Behavioral Health of New York I.P.A., Inc.; UnitedHealthcare, Inc.; United HealthCare Services, Inc.; UnitedHealth Advisors, LLC;

UnitedHealthcare Service LLC; Urgent Care MSO, LLC; USHEALTH Administrators, LLC; and USHEALTH Group, Inc.; iyo Vivify Health, Inc. Ogaysiiskan Asturnaanta Macluumaadka Maaliyadeed waxaa kaliya la daqi karaa marka sharcigu farayo. Gaar Ahaan, ma khuseyso (1) waxyaabaha caymiska daryeelka caafimaadka lagu bixiyo oo ay Nevada ku bixiyaan shirkadaha Health Plan of Nevada, Inc. iyo Sierra Health and Life Insurance Company, Inc.; (2) ama qorshayaasha kale ee caafimaadka ee UnitedHealth Group ee gobollada bixiya ka-dhaafyada. Liiskan qorshayaasha caafimaadka wuu dhammaystiran yahay laga bilaabo taariikhda ladhaqangeliyo ogeysiiskan. Si aad u hesho liiskii ugu dambeeyay ee qorsheyaasha caafimaadka ee kuxiran ogeysiiskan, booqo **https://www.uhc.com/privacy/entities-fn-v2**.

# Waxaan halkan u joognaa adiga

Xusuusnow, waxaan mar walba diyaar u nahay inaan ka jawaabno su'aalaha laga yaabaainaad qabto. Kaliya ka wac Adeegyada Xubinta kan **1-888-269-5410**, TTY **711**. Waxaad sidoo kale booqan kartaa mareegtayada **myuhc.com/CommunityPlan**.

**UnitedHealthcare Community Plan of Minnesota**
**Baahiyaha Gaarka ah ee Daryeelka Aasaasiga ah**
**(SNBC)**

**Adeegyada Xubinta (Member Services):**
**1-888-269-5410**, TTY **711**
8:00 subaxnimo – 6:00 galabnimo, Isniinta - Jimcaha

UnitedHealthcare
9800 Health Care Lane
Koodhka Boostada: MN006-W900
Minnetonka, MN 55343

**myuhc.com/CommunityPlan**

United
Healthcare
Community Plan

Boggaan si ula kac ah ayaa loo baneeyay

Boggaan si ula kac ah ayaa loo baneeyay

United Healthcare Community Plan

© 2024 United HealthCare Services, Inc. Dhammaan Xuquuqaha Way Dhowrsan Yihiin.